# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

### Golihii 5aad Kal-fadhigii 1aad, Fadhiyaii 5aad 6aad

**16 August 2021**

**Quraanka: -** Md. Siciid Sokeeye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Abdirisaaq Khaliif Axmed

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada

**Md. Cabdilaahi Yuusuf Axmed** *(2min 57sec):-* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiyaha, Gudoomiye ku-xigeenka, Mudanayaasha Golaha fadhiya ASC. Badin maayo oo mudanayaal badan baa is qoray, laba qodob baan doonayaa inaan wax ku kabo ama wax ku saxo xeer-hoosaadka maanta inna horyaala.

**Qodobka 29aad** ee Amniga Golaha ka hadlaya **Farqadiisa (G**) waxay Gudiddu soo jeedisay in Mudanayaashu markay soo galayaan Golaha qalab casri ah lagu baadho, waxaan qabaa in Farqadaas laga saaro oo sida dastuurka Qodobka 49aad sheegayo mudanayaasha inaan la baadhi Karin, marka qodobkaas ha laga saaro, dastuurka ayaa mudanayaasha damaanad iyo xasaanad siiyay, sidaas darted, waxaan soo jeedinayaa in halkaas lagu badalo ama lagu soo kordhiyo, waxa dhacday in Mudanayaasha meelo ka mida xarumaha dawladda ama saldhigyada ama talisyada mararka qaar la iska hor-taago oo aanay fursad u helin (access), markaa waa inaynu xeerka ku darnaa **dhamaan xarumaha dawlada, taliska ciidamda, saldhigyadooda, xabsiyada iyo haday tahay fadhiisimadooda guud in si maamuus leh loogu soo dhoweeyo Mudanayaasha oo ay gali karaan** in aynu qodobkaas ku darno xeer-hoosaadka ayaan soo jeedinayaan.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa arrimaha Gudiyada, intii gudiyadu hore u ahaayeen waxbay gudiddu ku soo kordhisay, waxaan leeyahya gudi kaliya marka laga reebo inta kale sidoodii hore ha loo daayo, Gudidda shareecada, Diinta iyo Arrimaha Qoyska waan la qabaa in lagu soo kordhiyo waana ku taageersanahay Gudidii soo diyaarisay, gudiyada inta kale waxaan soo jeedinayaa in sidoodii hore loo daayo oo aan waxba laga badalin

**Md. Sh. Siciid Maxamed Ismaaciil (Sokeeye)** *(4min 03sec):-* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Waad-mahadsan tahay Gudoomiye, **Qodobka 10aad Xarafka(I)** oo ah *"Xukun kama dambeysa ay ku riday maxkamad awood leh oo ku mutaysanayo xabsi aan ka yarayn lix bilood"*, qodobkaasi wuxuu khuseeya xil-waayida Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku-

xigeenada, sida aynu ognahay, xasaanada wakiillku leeyahay sida dastuurka qodobka 49aad sheegayo, wuxuu odhanayaa looma xidhi karro xubinta wakiillada dambi ka yar saddex sannadood, sidaa darted, waxa halkan inoogu muuqata sifo sharciya madaama xukunka lagu riday uu yahay lix bilood, aassaaskuna uu ahaa in aan loo qabanin dambi xukunkiisu ka yaryahay saddex sanadood, marka halksaas waxaan odhan lahaa si ay ula mid noqdaan xildhibaanada kale **waa in lixda bilood ee lagu qoray laga dhigaa saddex sannadood.**

**Qodobka 31aad** oo ku saabsan isu-taasita Madaxda Qaranka oo sheegaya in la isu tagayo Madax-waynaha, Madaxweyne ku-xigeenka iyo madaxweyanayaasha dalalka shisheeye ee lagu marti-qaado Golaha ama Gudoomiye baarlamaan dal kale oo lagu marti-qaaday dalka marka uu soo galo. Waxaana arkaa qodobkaasi in aanay banaanayn sharciyan qof bini'aadmi ah in loo istaago, kaba sii daran marka qofku aanu muslim ahayn, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa Madaxdeena oo muslima, inkasto, Nabigeenii CALEYHI SALAATU WA-SALAAM uu ka diiday Asxaabtiisii inay isu-taagan, isla markaana uu Illaahay siiyay SWT qofka muslimka ah cisi iyo karaamo, waxaan odhan lahaa ha laga saaro Qodobkaas Isu-taaga qof bini'aadmi ah, waayo waxay soo galaysaa Al-qiyaamo Khushuuci.

**Md. Sh. Axmed Dayib Guuleed (Ku-cadeeye)** ***(12min 24sec):-*** Bismilaahi Raxmani Raxiim, anigu insha'alah waan soo koob-koobaya a.

**Qodobka 6aad Faraq 3aad** Gudoomiyaha iyo ku-xigeenadiisa doorashadooda waxaan anigu ra'yi ahaan qabaa in codka hal-dheeriga ah laga dhigo absolute majority ama Golaha kala-badhkii iyo hal lagu dary (41+1), madaama ay hogaaminayaan golaha inay kala badh haystaan kalsoonida tirada golaha laga maarmaan baan u arkaa.

**Farqada 10aad ee isla Qodobkaas 6aad** waxaan qabaa in aan lagu dhawaaqine loo codeeyo oo isla sidaas hore uu helo Mudanayasha Golaha kala-badhkii iyo hal lagu dary (41+1), (Absolut majority).

**Farqada 13aad ee isla Qodobkaas 6aad** ee odhanaysa "*musharaxa ugu codka bata wuxuu ku guulaysanayaa inuu noqdo Gudoomiyaha Golaha Wakiilada*" anigoo tii hore tixraacaya waxaan soo jeedinayaa in xaga dambe laga sii daro **"ee hala aqlabid buuxda"**

**Qodobka 7aad ee** Qaab-dhismeedka Maamulka Golaha Farqada (B) waxa ku qoran "*qaybta aan la dooran oo noqonaysaa xoghayn iyo la-taliyayaal uu madax u yahay xoghayaha guud*"waxaan leeyahay ha laga saaro farqadaas oo ha loo daayo "qaybta aan la dooran oo noqonaysa (1) Xoghayaha guud, xoghaye ku-xigeenka, xafiiska la-taliyayaasha, waaxo aan ka badnayn 10 iyo shaqaalaha Golaha, marka anigu halka la-taliyayaasha waxaan ka dhigi lahaa xafiis, la-taliyayaashaasna ay ka mid noqdaan la-taliyayaal takhsus ku ah shareecada islaamka oo ugu yaraan PHD ah, madaama sharcigu dhigayo wixii shareecada Islaamka ka hor-yimaada waa waxba kama jiraan.

**Qodobka 20aad** marka hore lambarka waan ka saari lahaa oo farqad kaliya kumana qumana in lambar la siiyo, waxaan ku dari lahaa **Madaxweyne ku-xigeenka,** waxayna noqonaysaa "*Maamuuska Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka*" xaga ciwaankana madaxweyne ku-xigeenku wuu ku lamaan yahay.

**Qodobka 28aad Farqada 2aad** "**xukuumada**" yaan ku badalay halka ay Golaha ku qoran tahay.

**Qodobka 29aad** oo amniga ka warama **Farqada 2aad Xarafka (B**) inyar baa ka maqan hadii uu yahay mudane hubka laga qaado, marka waxaan ka dhigi lahaa **"hadii uu yahay mudane waa in hubka laga qaado"** si hadalku u dhamaystirmo

**Qodobka 34aad Farqada (F**) waxaan saxayaa typing error halka qaybo qoraalka in laga dhigo **"qabyo-qoraal"**

**Isla qaybtaas Farqada (I) iyo Qodobka 38aad** farqadiisa 4aad waa isku mid oo isku waxbay sheegayaan waxayna ka hadlayaan xeerarka guurtida u gudba hadii aanay ku soo celinin ama kaga soo jawaabin bil gudaheed inuu sidiisii hore ansax ku noqonayo. Marka labadaas farqadood micno guud oo isku mid ah bay wada sheegayaan.

**Qodobka 36aad Farqada 1aad** waajibaadka gudidda waxa ka mid ah inay hubiyaan in mashruuc sharci waafaqsan yahay dastuurka, marka waaxaan ku sii daray **"iyo shareecada islaamka"** oo lagu daro, madaama xeerarkeena oo dhami inay shareecada waafaqsanaadaan arrin lagama maarmaan ah tahay.

**Qodobka 42aad ee Mooshinka ka hadlaya Farqadiisa 8aad** Tirada xildhibaano mooshin keeni karta waa in aanay ka yarayn 7 xubnood hadla waxaa ku badali lahaa **"11 xubnood"** oo ah Golaha thumunkiis (1/8), waxa ugu yar ee dhaxal la qaataana yahay sided meeloodow meel (1/8), waxaan odhan lahaa golaha 11 xubnood ha laga dhigo xubnaha soo jeedin kara mooshin si aanay mooshinadu inoogu badan.

**Qodobka 52aad** waxaan qabaa in Gudiddaas cusub ee Gudidda arrimaha shareecada, dhaqanka iyo qoyska in sidii hore loogu daayo gudidda arrimaha bulshada hadii kale la raaciyo arrinta wax-barashada la raaciyo oo laga dhigo "Gudidda Waxbarashada, Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska" madaama waxbarashadeena ay saldhig u tahay barashada diinta islaamku sida **Qodobka 15aad** ee dastuurku dhigayo, diinta iyo waxbarashaduna aanay kala maarmayn, Wasaaradu tahay Wasaarada tarbiyada iyo tacliinta.

**Qodobka 66aad Farqadiisa 4aad** "hadii masuulku uu ku iman waayo yeedhamada gudoomiyaha, gudoomiyuhu wuxuu golewaynaha u soo jeedinayaa inay kal-soonida kala noqdaan masuulkaas, **waxayna kalsoonida kagala noqon karaan cod hal-dheeriya"** intaas dambe oo tacbiir ah baan ku sii daray farqadaas.

**Qodobka 69aad** ee wax ka badalka ka hadlaya, xeerkii hore si buu u qornaa, waxa lagu soo kordhiyay **Farqad 4aad** marka waxaad moodaa in farqadaasi wixii horeba meesha ka saarayso, waxayna leedahay waxa soo jeedin kara 2/3, mar hadii tiradaas la cayimona farqadaha hore meesha way ka baxayaan, Marka waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo sidaas dambe ee ah waxa soo jeedin karaa saddex meeloodow meel (2/3), gudidda joogtaduna golaha uun bay ka mid tahay, farqadaha horena meesha way ka baxayaan.

***Soo jeedin Guud***

Intaas markaan ka soo gudbo, Gudoomiye waxaan soo jeeidinayaa in Xeer-hoosaadka lagu cadeeyo: -

1. Reebanaanta laaluushka oo cidii laaluush qaadata shaqada goluhu inay socoto ay reeban tahay.
2. Kala madax-baanida danaha gaarka ah iyo shaqada golaha, madaama ay dhici karto xildhibaano shaqo gaar ah oo ay leeyihiin sida shirkadaha xiliyada miisaaniyada ookale marka la keeno ay dhici karto inay golaha xukuumada ay ku milmaan, meelaha qaarkoodna ay riixaan in loo soo sad-buriyo iyadoo dano gaar ah ama mashaariic ay ugu jirto sidii golihii hore lagu xaman jiray, markaa taas iyo ciqaabkeedaba in lagu xuso waansoo jeedin lahaa. WSC.

**Md. Cali Jaamac Caraale (Cali Qaran)** ***(5min 16sec):-*** Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha ASC, runtii waxaan bogaadinayaa gudidii aynu u xilsaarnay xeer-hoosaadkan saaka halkan ku hayno oo shaqo adag soo qabtay, runtii qodobo yaryar oo koob-kooban baan doonayaa inaan kaga qayb-qaato wax ka badalka iyo kaabista xeer-hoosaadka Golaha.

**Qodobka 2aad** wuxuu si kooban u *qorayaa Golaha wakiilladu wuxuu yeelanayaa tilmaamaha ku xusan Qodobka 39aad ee Dastuurka,* intaas oo qudha ayaa lagu qoray, marka waxaan soo jeedinayaa inta dastuurka qodobkiisaas ku qoran in halkan lagu soo raro oo lagu soo qoro si qofku markasta aanu raadin dastuurkii, marka qodobkaas inta ku qoran halkan ha lagu soo raro ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 3aad Farqadiisa 8aad** xoogaa khalad madbiciya ayaa ku jira, wuxuu qorayaa "*Ansixinta ama diidmada Wasiirrada, Wasiir-dawlayaasha, Wasiir ku-xigeennada madaxda hayadaha ee qodobka 113aad jideeyey iyo madaxda kale ee qaranka ee dastuurku ama xeer kale jideeyey ansixintooda*" qodobkaas meel loo raacayo ma jirto, ha la cadeeyo oo halaga yidhaahdo Qodobka 113aad ee dastuurka.

**Qodobka 7aad Farqadiisa 4aad xarafka** (I) sida Gudoomiyuhu sheegay waxa la inoo keeni doonaa xeer ama lifaaq shaqaalaha golaha ah, halkan waxa ku cad *"Si loo sugo kala madax bannaanida waaxaha dawladda, xoghaynta iyo shaqaalaha kale ee Golaha Wakiiladu, xuquuqdooda*

*iyo waajibaadkooda waxaa nidaaminaya lifaaqa xeer-hoosaadka"* hadaba, sida gudoomiyuhu sheegay waxaan qabaa in lifaaqa la inoo keeni doono lagu soo daro oo halkan laga saaro farqadaas si aynu gadaal uga ansixino.

**Qodobka 57aad** oo ka hadlaysa Gudidda Siyaasadda Arrimaha Dibada, Iskaashiga Caalamiga ah, Qorshaynta Qaranka iyo Maal-gashiga iyo **Qodobka 66aad** oo ka hadlaya Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga, marka qodobkaas hore wuxuu ka hadlayaa oo uu ku kooban yahay oo kaliya arrimaha dibada iyo iskaashiga caalamiga ah, madaama maalgashigu yahay qodob aad ugu muhiima dalka Somaliland indho badan oo caalamka ahina soo eegayaa, waxaan soo jeedinayaa in ganacsiga oo ku jira Qodobka 66aad ee Gudidda dhaqaalaha iyo Maalgashiga oo ku jira Qodobka 57aad in labadaas la is-waafajiyo oo laga dhigo **Gudi Ganacsiga iyo Maalgashiga** oo waajibaadkeediina la taxo oo la qoro.

Sidoo kale waxaan la qabaa oo aan ku raacsanahay Xildhibaan Sh. Axmed Dayib in Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska in lagu kabo oo lagu daro Gudidda Arrimaha Bulshada, waxaana qabaa in halka gudiddaas lagu badalo Gudi cusub oo ah Gudidda Ganacsiga iyo Maal-gashigaa, Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyskana lagu daro Gudidda Arrimaha Bulshada. Intas ayaan soo jeedinayaa. WSC

**Md. Xasan Saleebaan Dhuxul (Laabsaalax)** *(7min, 02sec):-* Bismilaah, Gudoomiyaha Golaha iyo Ku-xigeenadiisa, Mudanayaasha Sharafta leh iyo Shaqaalaha Golaha Wakiilada waxaan leeyahay marka hore ASC, Mudanayaal sidaynu ognahay Dastuurku waa xeerka ugu sareeyay xeerarka, waynuna ka wada-dharagsanahay in xeer-hoosaadku yahay hanaanka ama hagaha inoo fudaydinaya waajibaadkeena shaqo. Sidaa darted, waa muhiim in saxarka iyo qodaxda aynu ka gurno inagoo wakhtiga ilaalinayna.

Hadaan dooddayda u galo, **Qodobka 16aad Farqadiisa 10aad** waxay sheegaysaa in mudanayaashu leeyihiin guno fadhiyeed maalinle ha, habka mudanayaasha guna fadhiyeedka looga jarayayna cadaynaysaa in guno fadhiyeed jirto, sidaa awgeed, mudanayaal, madaama dastuurku mudanayaasha u damaanad qaaday mushahar iyo guno xileed sida ku cad **Qodobka 47aad** ee Dastuurka Qaranka, ma jirto sabab aynu u qaadano guno fadhiyeed iyadoo macalimiinteena iyo askarteenu mushahar ka hooseeya mushaharkeena ay qaataan, waxaan soo jeedinayaa in qodobkaas laga saaro, kama hadlayo mushahar iyo guno xileed, waxaan ka hadlayaa waa guno fadhiyeed, waayo inagu ma nihin gole mutadawac ku shaqaynaya.

Qodobka kale ee iigu xiga oo ah Qodob dastuurka ah, Golaha Wakiiladu wuxuu leeyahay ka dooddista, ansixinta, celinta barnaamijyada xukuumada sida uu tilmaamayo

**Qodobka 53aad** ee dastuurka qaranka **farqadiisa 3aad**, hadaba, barnaamij xukuumadeed intaan laga dooddin, la ansixin ama la cellin hanaankee loo keeni karaa Golaha Wakiilada? yaa keeni kara oo soo jeedin kara? Ma hanaan mashruuc sharci baa golaha loo keeni karaa oo loo soo jeedin karaa, mise hanaan ka duwan? marka mudanyaal waxaan soo jeedinayaa in xeer-hoosaadka lagu cadeeyo golaha sida loo keeni karo barnaamijyada xukuumada iyo la keeni karo ee u baahan in aqalku ka dooddo oo waajibaadkiisa ka guto.

**Qodobka 49aad** ee Xeer-hoosaadka, Mudanayaal daah-furnaantu waa mabda' ka mida mabaa'diida ay dawladnimadeenu ku dhisan tahay, hadaan daah-furnaani jirin xogi ma jirayso, hadaani xogi jirin isla xisaabtan ma jirayo, sidaa awgeed, fadhiyada goluhu waxay noqon karaan fadhiyo xidhan ama kuwo furan oo dadweynaha iyo saxaafada u furan sida uu tilmaamayo **Qodobka 45aad Farqadiisa 1aad** ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland. Hadaba, **Qodobka 49aad farqadiisa 1aad** ee Xeer-hoosaadku wuxuu tilmaamayaa xaaladdaha fadhiyada goluhu furnaan karaan ama xidhnaan akraan, tusaale ahaan marka laga dooddayo xaaladdo amni oo xaassaasi ah, waa sax oo danta iyo maslaxada qaranka ku jirta, isla qodobkaas waxa lagu sheegayaa fadhiyada goluhu xidhan yihiin marka laga dooddayo qandaraasyo ganacsi oo qarsoodi ah, maaxaa loolla jeedaa qandraasyo ganacsi oo qarsoodi ah? Ma dadkaynu waxaan sharci ahayn oo sameynayno ka qarinaynaa.

Mudanayaal **Qodobkaas 49aad** ee Xeer-hoosaadka, waxaan leeyahay hadii aynu aqbalno oo raali ka noqono in qandaraasyada ganacsi ay qarsoodi noqdaan oo Goluhu qarsoodi uga dooddo waxaynu jabinaynaa **Qodobka 48aad** ee dastuurka qaranka, sidaa darted waxaans oojeedinayaa in qodobkaas xeer-hosaadka laga saaro. Ama lagu caddeeyo inuu qodobkaasi la xidhiidho arrimo ciidan iyo amni.

Mudanayaal, Golaha Wakiiladu wuxuu u gudbinayaa Golaha Xukuumada talllooyin iyo tilmoomo ku saabsan siyaasada guud ee dalka, sida waxa cadeynaya **Qodobka 53aad** Dastuurka Qaranka **farqadiisa 4aad**. Xeer-hoosaadka ina horyaala **Qodobkaiisa 3aad farqada18aad** sida qodobkaas dastuurka uu ugu qornaa si la mid ah uun buu ugu yaallaa oo waa loo soo min-guuriyay, halkii ay ahayd in xeer-hoosaadka lagu fur-furo oo lagu faah-faahiyo oo waliba si xeel-dheer loogu sharaxo hanaanka tallo-gudbinta loo marayo. Waase su'aalle tallada goluhu uu golaha xukuumada u gudinayaa talladee bay noqonaysaa, ma tu shir-gudoonku muhiim u arkaa? Mise waa tu golewaynuhu muhiim u arko. Mudanayaal, waxaan soo jeedinayaa in Xeer-hoosaadka lagu cadeeyo sida uu goluhu u gudanayo masuuliyadiisa dastuuriga ah ee Qodobkaasi waajb yeelay.

**Qodobka 21aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha ama **Qodobka 46aad** ee dastuurka qaranka Goluhu sannadkii wuxuu yeelanayaa saddex kal-fadhi oo u dhigma 28 tododbaad, isla markaana noqonaya 196 maalmood, maalmaha sannadka ku jirana sidaynu ognahay waa 365 maalmood, taas macnaheedu waxa weeye inaynu sanadkii lix bilood fasaxnahay

amaba shan bilood iyo shan iyo toban cisho, lixda bilood aynu sanadkii shaqaynaynona afar saacadood baynu maalintii ka shaqaynaynaa sida ku cad Qodobka 16aad ee xeer-hoosaadka ina horyaala, hadaba qabyada sharci ee jirta markaan eego iyo waajibaadka dastuurku ina saaray iyo dhaartii aynu marnay marnaba ilama saxsana ilamana qumana in fasaxyada qaabka noocaas ah aynu u galno, waa in xeer-hoosaadka ay ku caddaato in labadii kal-fadhiba ugu ayraan afar todobaad u dhexeeyaan siduu dastuurku waajibiyay.

Waxaan la qabaa Xildhibaan Sh. Sokeeye **Qodobka 10aad** xeer-hoosaadka farqadiisa ka hadlaysa xil-waayida, waxa kale oo aan la qabaa **Qodobka 69aad** Xildhibaan Sh. Axmed Dayib. Anigu koley cutubka laga saaray baan aadu soo akhriyay oo saaka dooddaydu ahayd, laakiin intaas ayaan ku soo gabo-gabeynayaa. Waad-mahad-santihiin, WSC.

**Md. Cabdikariim Meecaad Isaaq Xuseen** ***(2min 03sec):-*** ASC, waan salaamayaa dhamaan Shir-gudoonka, Mudanyaasha, Xoghayaha Guud iyo Shaqaalaha Golaha, doodaydu waxay ku salaysan tahay Qodobka Anigoo u arka in dhibaatada dalka Somaliland manta haysata inay tahay xaga wada-marista (traffic) ama sharciyada wada-marista (traffic laws) ayaa waxaan arkaa gudidda la hoosgeeyay wada-marista, waad ogtihiin dhibaatada dalka ka jirta ee ka dhalata, waxaad arkaysaa mayd mayd loo qaadayo oo loo xukumayo magna looga doonayo, hadaad aragto waxa ugu badan ee la isku haysto maxkamadaha waa shilalka.

Anigu waxaan qabaa guddida hawlaha guud, technology-yada, guryaynta iyo gaadiidku aanay ahayn gudi meel wada-gasha, waxaan soo jeedinayaa gudi gooni ah oo qaabilsan wada-marista ama sharciyada wada-marista, waayo waxaad moodaa inay inaga badan yihiin manta dalka baabuurtu oo dadkayba ku dhowdhow yihiin, sidaa darted, hadii aan loo sameyn shuruuc ku filan waxay noqon doontaa dalku inuu maalin walba ku jiro muran iyo is-qab-qabsi ka yimaada xaga wada-marista iyo shilalka.

Waxaan la qabaa Xildhibaankii iga horeeyay arrinta ah in la baadho Xildhibaanada, waxaan u arkaa inay markii horeba ahayd gef loogu soo daray meesha, marka waxaan soo jeedinayaa in gudiddaas halkaas lagu daro xeer-hoosaadka. WSC.

**Md. Cabdinaasir Yuusuf Cismaan (Qodax)** ***(10min 27sec):-*** ugu horeyn Mudane Gudoomiye, Mudanayaal dhamaantiiba ASC, inta ka dib, waxaan halkan mahad-naq uga soo jeedinayaa gudidda soo diyaarisay xeer-hoosaadka oo si fiican uga soo shaqaysay una soo naaqishtay, waxa kale oo muhiim ah Gole ahaan horta inaynu fahamno xeer-hoosaadka micnihiisu waxa weeyaan gudaheena inagaa isku-dhaqayno, wixii golaha ka baxsan shaqo kuma lihin, laakiin waa wixii goleheena ina kala dabrayay ee inoo kala dhexeeyay ee xeer inoo noqon lahaa weeye. Sidaa daraadeed, inaynu aad uga fiirsano, qodob-qodob isu dultaagnooo aynu shilinta iyo qodaxda uga gurno oo ay inoo noqoto wax dhaxal-gal ah ayaan jeclahay.

Anigu intii aan soo akhriyay, waxaan soo qaadanayaa **Qodobka 6aad** ee ka hadlaya qaabka loo dooranayo Gudoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen **farqadiisa 6aad** waxay qeexaysaa *"Haddii guddoomiye ku xigeenka 1aad ama ka 2aad uu jagada bannaanaatay iclaamiyo in uu u sharraxan yahay, waa in uu iska casilaa xilka Gudoomiye-ku-xigeenka 1aad ama Guddoomiye ku-xigeenka 2aad goluhuna ka aqbalaa isla markaana waxaa golaha guddoominaya mudanaha ugu da'ada weyn ee aan ahayn musharraxa, habka doorashada Gudoomiyaha iyo ku xigeenadiisa waxa loo kala horaysiinayaa sida magacyadu u kala horeeyaan"*hadii aynu isla qaadanay magacyada siday u kala horeeyaan in loo kala horeysiinayo, ma waxaynu qaadanaynaa b,t,j afsomli ah, mise a,b,c English ah, halkan waa inay ku cadaato, Matalan afsomaliga "A" kuma jirto, English-kana way ku jirtaa, magacyadii axmed marka anigu **waxaans soo jeedinayaa inaynu Af-ingiriisi aynu qaadano oo ay halkan ku cadaato.**

**Qodobka 10aad** ee qeexaya xil-waayida Gudoomiyaha iyo ku-xigeenadiisa, halkan gudiddu waxay soo jeedisay in gudoomiyuhu uu xilka ku waayi karo 2/3 oo dhiganta 55 Mudane, ku-xigeenadiisana sidaas si la mid ah baa laga dhigay. Dastuurkeena qaranku **Qodobkiisa 96aad** wuxuu qeexayaa in Madaxweynaha maamuus ka xayuubin marka laga sameynayo uu cod aqlabiyad ah ama absolut majority ah uu ku waayi karo, dunida baarlamaanada markaad eegto Ingiriiska eeg, Maraykanka eeg, Kiinya oo inoogu dhow eeg, Gudoomiyuhu wuxuu xilka ku waayi karaa ama laga qaadi karaa simple majority oo cod laga qaadi karaa, inaguna dunidaynu ka midnahay, miyaad ka fadilan tihiin madaxweynaha qaran oo absolut majority laga xasuubinayo, dunida kale baarlamaanadooda maad ka fadilan tihiin, maxaa 2/3 looga dhigay, anigu waxaan soo jeedinayaa in qodobkaas absolut majority laga dhig in gudoonka xilka lagaga qaadi karo, si goluhu uu u noqdo gole dooddihiisa la wada dhageysan karo.

**Qodobka 16aad** oo qeexaya ka-xaadirida fadhiyada golaha, Mudanayaal waxaynu ognahay waajibaad qaran baa inna saaran, waxaynu xilka u qaadnay inaynu umada u shaqayno, waxa waajib inagu ah inaynu si hagar la'aana xilka u gudano, mudane kasta wakhtigiisa soo xaadiro, Matalan qodobkaas 16aad faqradiisa 2aad waxay sheegaysaa in saacadaha shaqadiisu nooqnayaan sideedda (8) subaxnimo ilaa laba iyo tobanka (12) duhurnimo, isla **qodobkaas farqadiisa 4aad** waxa ku qoran wakhiga saxeexa warqadu waa sideedda (8) illaa sideeda iyo shan iyo afartan (45) daqiiqo, isla qodobkaas farqadiisa 8aad waxa ku qoran fadhigu wuxuu bilaabmayaa sagaalka subaxnimo (9:00 AM), madaama aynu isla qirsanahay inaynu umada u shaqayno, fadhigeenu bilaabmayo 9ka ilaa 12ka duhurnimo kala cararayno qaranka ma 3 saacadood baynu u shaqaynaa, dunida 8 saacadood bay shaqeeyaan baarlamaanadoodu, kiinya oo ugu dambeysay eeg dhowr iyo toban saacadood bay mararka qaar shaqeeyeen.

Marka anigu waxaan soo jeedin lahaa **Qodobkaas farqada 4aad** in wax ka badal lagu sameeyo oo **halka 8da ay ku qoran tahay 7da subaaxnimo soo xaadiraan mudnayaashu, ilaa 45 xaadirisku socdo, 8dana fadhigu bilaabmo.**

Isla qodobkaas **farqadiisa 10aad** ee walaalkay Xildhibaan Laabsaalax ka hadlayay waxay qeexaysaa hadii mudanuhu cudur daar la'aan maqnaado mudo gaadhaysa 7 cisho gudohood xidhiidh ah ama teel-teel ah 30 cisho gudohood waxa laga jarayaa guno fadhiyeedkii maalin kasta uu maqnaado, anigu halka guno fadhiyeedka waxaan ku badali lahaa mushaharka in laga jaro waliba 30% laga jaro ayaan soo jeedin lahaa.

**Qodobka 69aad** oo ka hadlaya wax ka badalka Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, mudanayaal waxaynu ogsoonahay in goluhu yeelan doono gudiyo, halkan waxa ku qoran afar farqadood. Horta farqad waxaan la qabaa Xildhibaan ku-cadeeye oo hadaad eegtaan qodobka wax ka badalka xeer-hoosaadka farqadihiisa 1aad illaa 3aad iyo farqada 4aad way iska hor imanayaan, anigu waxaan soo jeedinayaa xeer-hoosaadkii oo ah wixii golaha lagu hagayay ee inaga wada dhexeeyay weeye maaha in gudidda joogtada oo kaliya awood loo siiyo inay wax ka badalka soo jeediso, marka taas waxa la qabaa in 1-3 laga saaro oo loo daayo farqada 4aad oo ah in Goluhu 1/3 ku soo jeediyo wax ka badalka xeer-hoosaadka.

**Ugu dambeyn waxaan ku soo ururin lahaa oo soo jeedinayaa in lagu soo daro xeer-hoosaadkeena: -**

- **Goluhu Miisaaniyad buu leeyahay,** Miisaaniyada qaranka waxaynu ognahay in la diyaariyo, Wasaarada Maaliyadu soo diyaariso oo hab-raac marto, sidaa darted, Miisaaniayda Golaha sida loo diyaarinayo, sida loo raacayo iyo sida loo isticmaalayo waa inay xeer-hoosaadka lagu soo daro oo ay qodob noqoto, si bari ka-maalin goluhu uu isula xisaabtami karo.
- In Xeer-hoosaadka lagu soo daro in qofka **xoghayaha guud** noqonayaa uu golaha shaqaalihiisa ka tirsanaa shanti sano ee u dambesay, si qof shaqadii iyo hanaankii shaqo qof garanaya uu u noqdo ee aan dibada laga keeni qofka xoghayaha noqonaya. WSC.

**Md. Cabdikariim Maxamuud Maxamed** ***(4min, 39sec): -*** Bismilaahi, Marka hore waxaan salaamayaa Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha Golaha Wakiillada dhamaan ASC, Mudanayaal waxaan jecelahay inaan laba qodob oo koob-kooban kaga hadlo.

**Qodobka 42$^{aad}$ Farqadiisa 8$^{aad}$** tirada xubnaha mooshin soo jeedin karra waxa ku qoran 7 xubnood, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **11 xubnood.**

**Qodobka 49$^{aad}$** ee kulamada xidhan ee gudiyadda **Farqadiisa (B)** oo ka hadlaya qardaraasyo ganacsi oo qarsoodi ah, **marka waxaan soo jeedinayaa in farqadaas laga saaro ama tafsiir dheerada la saaro oo la cadeeyo**, waxa inaga filan baan filayaa warbixino muhiima oo Golaha khuseeya.

**Qodobka 52$^{aad}$** tirada gudi-hoosaadyada, gudiddii soo diyaarisay Xeer-hoosaadku waxay soo jeediyeen 11 Gudi, waxaan markaa soo jeedin lahaa gudiddaas kuwa 7aad iyo 8aad ee kala ah Gudidda Arrimaha Diinta, Dhaqanka iyo Qoyska iyo Gudidda Arrimaha Bulshada in la mideeyo oo hal gudi la iskaga dhigo.

Isla **Qodobkaas 52$^{aad}$ Farqadiisa 4$^{aad}$** Gudidda Joogtada iyo Anshaxa oo ka koobanaan doonta 13 Xildhibaan, waxaan soo jeedin lahaa in Gudiddaas joogtada 11 Xildhibaan laga dhigo si ay gudiyadi kale tiro ku filan u noqon karaan. Sidoo kale xarafahan la isticmaalay ee a, b, c waxaan soo jeedin lahaa mar hadii xeer-hoosaadkii afsomali ku qoran yahay xuruuftan iyo shaqaladan in laga dhigo oo b, t, j la isticmaalo ayaa fiican.

**Qodobka 69$^{aad}$** ee wax ka badalka xeer-hoosaadka **Farqadiisa 4aad baa inaga filan baan qabaa soo jeedinta wax ka badalka xeer-hoosaadka oo loo daayo 27 xildhibaan ee Golaha ka tirsani inay soo jeediyaan,** marka waxaan soo jeedinaa in inta hore ee Gudidda joogtada laga saaro oo sidaa kaga baxaaan farqadaha 1aad iyo 2aad.

Arrinta shaqaalaha Golaha, **xoghayaha guud waxaan soo jeedinayaa in lagu qaado khibarad shaqaalenimo oo 5tii sanno dambeysay kaga soo shaqeeyay golaha**, si ay shaqaalaha dhiirigalin ugu noqoto isla markaana hadii xoghayihii meesha ka baxo aanay gaab u iman. Anigu intaas uun baan jecalahay inaan ku soo koobo doodaydii aad baad u mahadsan tihiin.

**Md. Siciid Jaamac Xasan** ***(11min 10sec):-*** Mahadsanid Mudane Gudoomiye, Bismilaahi, Gudoomiyaha, Gudoomiye ku-xigeenada, Xildhibaanada, Xoghayaha guud iyo shaqaalihiisa, runtii ku dheeraan maayo, waxaan doonayaa inaan halkan aad uga mahad-celiyo xubnihii goluhu diray inay runtii shaqo aad u fiican soo qabatay, waxaan leeyahay waad-mahadsan tihiin, ku dheeraan maayo, waxaan doonayaa  inaan dhowr qodob is dul-taagao, wixii laga hadlayna aan secondment-gareeyo.

Ugu horeyn, waxaan soo jeedinayaa in Xeer-hoosaadka loo sameeyo tusmo sidii loo raaci lahaa qodobada, tusmadii ma laha, marka in tusmadii loo sameeyo ayaan marka kowaad soo jeedin lahaa.

Hadii aan qodobadayda u sii galo, **Qodobka 5$^{aad}$ farqadiisa 2$^{aad}$** waxay u qoran tahay "*Hadii Golaha cusubi iskii u fadhiisan waayo maalinta 45aad waxaa Golaha isugu yeedhaya Guddoomiyaha Golaha Guurtida mudo 15 maalmood gudahood ah oo ka bilaambaysa maalinta*

*45aad. (Faqrad Cusub oo aannu ku kaabnay qodobkan)"*, waxaan leeyahay halkaasi way dheertahay, marka Maxkamadu bil qaadato, Madaxweynuhu bil qaato, 15 cishona iyagu fadhiisan waayaan, 15 cisho kalena Gudoomiyaha Guurtidu qaato waxay isku noqonaysaa saddex bilood, halka waxay ku dheertahay, marka anigu waxaan soo jeedin lahaa, inuu Gudoomiyaha Guurtidu isugu yeedho maalinta 16aad si wakhti badani aanu uga luminin mar hadii xaga hore wakhti badani ku lumay.

**Qodobka 7^aad^ Qaab-dhismeedka Golaha Wakiilada farqadiisa 1^aad^ Qaybta la doortay, xarafka (II**) ee **Shir-gudoonka Golaha Wakiilada,** waxaan soo jeedinayaa in halka la sii muujiyo oo laga dhigo **Gudoomiyaha, Gudoomiye ku-xigeenka 1aad iyo Gudoomiye ku-xigeenka 1aad,** marku arko qaab-dhismeedka qof ajnabi ah oo aan titles-ka garanayn inuu wax kale u qaato, marka waxaan soo jeedinayaa in titles-kooda la sheego.

**Qodobka 18^aad^** ee waayida xubnimada Golaha Wakiillada, waxa ku qoran waxa loo raacayaa Qodobka 50^aad^ ee Daastuurka, waan raacsanahay laakiin ha lagu soo raro, marka **waxaan soo jeedin lahaa in halkan lagu soo qoro Farqadihii Qodobka 50^aad^ ee dastuurka oo lagu soo muujiyo.**

**Qodobka 20^aad^** ee ka hadlaya eedaynta iyo maamuus ka xayuubinta, waxa qoran waxa loo raacayaa 96^aad^ ee Dastuurka, waa sax laakiin Iyana in halka wixii uu ka odhanayay in la soo raaciyo ayaan jeclaan lahaa.

**Qodobka 25^aad^** Noocyada codaynta, **Farqadiisa 2^aad^** oo odhanaysa *"11 mudane ayaa golaha u soo jeedin karra in codka gacan taagga ah laga dhigo qarsoodi isla markaana golaha ayaa ku ansixiniya cod hal dheeri ah"* halka dwaxaan ohanayaan mar hadii ay golaha u soo jeedinayaan waxay u soo jeednayaan Gudoomiyaha, marka waxaan soo jeedinayaa halka ha lagu daro **Gudoomiyaha**.

**Qodobka 26^aad^ Farqadiisa 2^aad^ Xarafka (B)** *"Waxa uu ugu yeedhayaa Mudane marka uu tilmaamayo xubin kale oo ka mida Golaha wakiilada"* halka waxaan soo jeedinayaa in lagu badallo **waxa loogu yeedhayaa Xildhibaan,** waayo isla qodobkaas **Xarafka (C)** ayaa sheegaya in Wasiirada iyo Masuuliyiinta loogu yeedhayo Mudane.

**Qodobka 29^aad^** ee amniga Golaha Wakiilada waxaan la qabaa Xildhibaanadii iga horeeyay ee Xildhibaan Siciid Sokeeyo iyo Xildhibaan Maxamed Cabdilaahi Yuusuf in Xarafka (J) laga saaro maadaama Xildhibaanadu leeyihiin xasaanad oo ah naftiisa, gurigiisa iyo gaadhigiisa lama baadhi karo, marka waa in laga saaro in la baadho Xildhibaanada oo lala sugo marka loo helo oo Baarlamaanka loo dhiso ama inagu aynu iska jarno ama dawlada aynu ka doonano ama deeq bixiyayaasha aynu ka doonanee, marka meelo loo helo in laga sugo.

Taas badalkeeda, anigu waxaan soo jeedin lahaa Mudane Gudoomiye maalintii fadhigeena inoogu horeysay halkan iga dambeysa xidhibaanada iyo dadku way isasoo dhex-galeen, doorashadii oo socotona waa la soo dhexgalay oo in badan buu xoghayuhu cel-celinayay, marka waxaan soo jeedinayaa in shabag lagu kala dhex xidho Xildhibaanada iyo dadwaynaha, xaga amniga waxa xeerka inoogu qoran in Gudoomiyaha iyo Xoghayaha guud amniga masuul ka yihiin, maalintaas waxa xaga dambe fadhiyay askar dharcad xidhan oo badan baa oo hub sitay, marka waa in aan wax hub ah lala soo galin fadhiga Golaha.

**Qodobka 31aad** ee xushmada istaaga, waxaan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyay maadama ay ka hor imanayso Diinta Islaamka, waxaana qabaa wixii diinta islaamka ka horimanayana in meesha laga saaro, marka qodobkaas meesha in laga tuuro ayaan qabaa.

**Qodobka 32aad** ee Nidaamka Fadhiyda Golaha, waxaan qabaa in farqadaha qodobkaas loo daayo sidii xeer-hoosaadkii hore ee 2014kii, oo Qodobkaas 5taas farqadood lagu soo koobo oo sidii xeer-hoosaadkii hore u dhigay loo daayo ayaan soo jeedin lahaa

**Qodobka 66aad** waxaan ku sameyn lahaa sixitaan baan ku samayn lahaa waxay sax ku tahay si waafsan dastuurka Qodobkiisa **53aad farqadiisa 7aad** ayay sax ku tahay.

**Qodobka 37aad** Doodda Mashruuc sharci **Farqada 2aad Xarafkiisa (B)** mudane kasta oo doodda ka qayb-galayaa wuxuu xaq u leeyahay mudo aan ka badnayna (25 daqiiqo) baa ku qoran, halka waxaa soojeedinaa marka doodda mashruuc sharci oo boqol bog ah ama laba boqol oo bog ah way ku yartahay 25 daqiiqo, **waxaan odhan lahaa ha laga dhigo 60 daqiiqo ama saacad oo aan soo jeedin lahaa.**

**Qodobka 71aad** ee dhamaadka muddada Golaha waxay ku eegtahay baa la yidhi oo halkan ku qoran marka ay Maxkamada sare ansixiso doorashada xigta, waxaan soo jeedinayaa marka ay ka dhamaato in sidii loo muuneeyay markii ay soo galeen si le'eg, la karaameeyo, sidi la isugu yeedhay oo kale la isugu yeedho, nabadgalyo la yidhaahdo iyadoo ay ka soo qayb-galayaan Maxkamada sare iyo dawladu oo ay si karaame leh ku tagaan, waayo waxaynu arkaynay kuwii inaga horeeyay sidii ay ku tageen inkasto ay mudo badan fadhhiyeen marka laga reebo maalin intii la helay qado loo sameeyay, marka waxaan odhan sida aduunka dhamaadka baarlamaanada ka dhacda si la mid ama ku dhow loo sagootiyaa. Intaas ayaan ku koobayaa. WSC.

**Md. Cumar Jaamac Faarax** ***(5min 43sec):-*** ASC, Mudane Gudoomiye iyo Gudoomiye ku-xigeen, waxaan ka hadlayaa **Qodobka 3aad** ee awoodaha Golaha Wakiilada **Farqadiisa**

**15aad** oo ah **"Ka doodista iyo ansixinta mashruuc sharci ee ay soo gudbiso Xukuumaddu, Guurtidu ama ay keenaan mudanayaal Golaha ka tirsani"** marka waxaan soo jeedinayaa in lagu daro wax ka badalka, oo laga dhigo **"Ka doodista, Wax ka badalka iyo ansixinta mashruuc sharci ee ay soo gudbiso Xukuumaddu, Guurtidu ama ay keenaan mudanayaal Golaha ka tirsani".**

**Qodobka 6aad** qaabka loo dooranayo gudoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen, barigii dhoweyd waxa la iswaydiinayay su'aal ah marka ninka ugu da'daweyni uu gudoomiyo Golaha oo Gudoomiyaha la doorto, gudoomiyaha la doortay ayaa tagaya Gudoonka oo isagaa halkaa labadii ku-xigeena codka u qaadayaa, marka halka waxaan leeyahay gudoomiyuhu inuu codeyo waa in lagu daraa, waayo arrintaasi waa critical oo dad baa la kala saarayaa, waxaana la isku qabanayaa ma codeynayaa mise ma codeynayo Gudoomiyuhu, marka waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **Gudoomiyuhu wuu codeynaaa.**

Waxaan ku raacsanahay Xildhibaan C/naasir Qodox soo jeedintiisa ah sida loo kala horeysiinayo, waxay ahayd waxa loo kala horeysiinayaa sida magacyadu u kala horeeyaan, halka waa in la qeexo oo sidaas **kala horeynta xarfaha lagu daro**, waana ku raacsanahay sida uu soo jeediyay C/naasir Qodox.

**Qodobka 7aad** Qaab-dhismeedka Maamulka Golaha Farqada 4aad Xarafka (a) *xoghayaha waxa lagu xulanayaa sida aqoontooda cilmiyeed iyo khibradoodu u kala sareyso,* halka waa inay jirta recruitment process loo raaci karo, waayo waxa loo baahan yahay marka shaqaale la qaadanayo, waa in recruitment process la sameeyo daah-furan iyo cida qabanaysa ma hay'ada shaqaalaha loo gudbinayaa mise gudidda joogtada ayaa kala saaraya, marka inay taasi ku cadaato, waana in gudidda joogtada waajibaadkooda loogu daro inay ararintaas sameeyaan oo shaqaalaha sida loo qaadanayo iyo sida loo maamulayo recuriement processkaas iyagu qabtaan.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa, Xubnaha Golaha waxa looga baahan yahay xufnaan iyo dhowrsanaan farabadan, marka waa inaynu ku darno lifaaq xeerkeenan code of conduct ah oo ninka xildhibaanka baarlamaanka ah laftigiisa anshaxiisa iyo dhaqankiisa, siduu u dhaqmayo, inaanu laaluush qaadan, inaanu mooshin wax ku qaadan, inuu mujtamaca dhexdiisa sumcad iyo karaamo ku leeyahay, markaa Iyana code of conductigaas waan soo jeedinayaa, iyo inaynu la dagaalano musuqmaasuqa oo dhaqan wanaagsan oo wadanka ka dhaca tusaale u noqono.

**Md. Cabdikariim Aaden Cumar** **(6min 14sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Mudane Gudoomiye iyo Gudoomiye ku-xigeeno, xidhibaanada sharafta mudan, Xoghaynta iyo shaqaalaha aqalka iyo saxaafadaba waxaan ku salaamayaa salaanta Islaamka Asc,

Waxaan u malaynayaa in la isku soo noq-noqonayo oo qodobada qaar badan ayaa la maray, markaa kuwaa la maray waan dhaafayaa waxaanan ka bilaabayaa Cutubka 2aad

**Qodobka 15aad, Farqadiisa 1aad** oo sheegasa in xubnaha Goluhu leeyihiin Xasaanada sida uu sheegayo Qodobka 49aad ee dastuurku, isla Qodobka 2aad iyo 4aad waxay sheegayaan waxay sheegayaan in xidhibaanku xurmo iyo maamuus ku leeyahay dhamaan hay'adaha dawlada iyo waaxyaha fulinta.

Sidoo kale waxay sheegayaan in aan xildhibaanka la xidhi karin, la baadhi karin, hadii ay noqoto gurigiisa naftiisa iyo gaadhigiisaba, hadaba waa tan ee mudane gudomiye inta badan waxa caqabadaha laga kulmaa waa ciidanka booliska ama xafiis ha joogaan ama meel kale 'e, ciidankeenu sida aynu ognahay waxay u badanyihiin niman dhalin yaro ah oo ay yartahay khibrada ay u leeyihiin sharciga, markaa waxaan leeyahay waa maxay cidda noo dhaxaynaysa hadiiba uu yimaad is qabsi, markaa waxaan leeyahay waa in uu xidhibaanku helaa jawaab deg-deg ah, waana in cid arrinkaa ka jawaabta la helaa.

**Qodobka 26aad** oo ka hadlaya in uu xidhibaanku si cad dooddiisa u dhiibto, laguna ixtiraamo oo aan laga dhex galin, hadana isla qodobkaa xagiisa danbe waxa uu dhigayaa in doodaa lagu ixtiraamo, halka **Qodobka 27aad** uu dhigayo in uu xildhibaanku xaq u leeyahay *point of correction*, waxaan leeyahay labadaasi way iska hor imanayaan, waxaan leeyahay hadi xildhibaanka aan saxayo waa in aan sugaa inta uu hadalka dhamaysanayo, hadii kale waxay u e kaanaysaa khalkhal galin ee waxaan leeyahay waa in xidhibaanka hadalkiisa loo daayaa.

**Qodobka 28aad** waxaa uu ka hadlayaa qaabka su'aalaha loo weydiinaya wasiirada, hadii uu wasiirku su'aasha uu xildhibaanku wadiiyay ka jawaabi waayo in gudoomiyuhu uu ku celinayo, hadaba hadii uu wasiirku ka jawaabi waayo su'aalaha la waydiiyay halkee looga gudbayaa? Waxaanan jeclaan lahaa in halkaa lagu cadeeyo talaabooyinka la qaadayo aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.

**Md. Maxamed Jaamac liibaan (4min 58sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shir-gudoonka, Shaqaalaha Golaha iyo Saxaafadba ASC; ugu horay waxaan u mahad-celinayaa Gudiddi wakhtiga iyo de'ddaalka badanba soo galisay Xeer-hoosaadka aad iyo aad ayay u mahadsanyihiin.

Mudane Gudoomiye dhawr qodob oo Soo-jeedin ah ayaan ku darayaa, waxaanan ka bilaabayaa Cutubka 8aad ee Guddiyada, sida aynu wada ogsoonahay Golaha Wakiiladu waa Tiir-weyn oo gaar u taagan nidaamkeena dawladnimada, kana mid ah Tiirarka is miisaamaya, iyada oo tiirkaa ay mishiin u yihiin sida ku cad qodobkan Guddiyada Golaha, sidaa awgeed Qodobada aan soo jeedinayo ee aan halkaa ku biirinayaa waxay yihiin anan ku taageersanahay guddidii ka soo shaqaysay xeer-hoosaadka in la kordhiyo Guddiyada Golaha, waayo waa in lagu sar-jaraa dhinaca istitutionka dawlada ee wada shaqaynta leeyihiin.

Waxaa halka ka muuqata in guddiyadu meelaha qaar ay iska soo galayaan markaa waxaan soo-jeedinayaa in halkaa loo sameeyo Xeer-nidaamiye inkasta oo uu xeer-

hoosaadku dhigayo hadana si aanay u iman in Giddi, Guddi kale ku halayso shaqo ay qaban lahayd.

Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in tirada Guddida Joogtada ah ee halkan ku xusan in tiradooda la soo kooba si gudiyada ayna u yaraan waxaan leeyahay waa in ilaa 9xubnood lagu soo koobaa.

Sidoo kale Xeer-hoosaadka kuma xusna imkaaniyaadkii shaqaalihii, markaa waxaan leeyahay waxaa loo baahan yahay si la isugu miisaamo waxa ay haystaan iyo waxa ay qabanayaan si aanu golahani aanu u noqon mid fadhiida oo shaqeeya, aad iyo aad ayaad u mahad-santihiin.

**Md. Maxamed Abiib Yuusuf** **(13min 11sec):-** Waad Mahadsantahay Mudane Gudoomiye, shir-gudoonka iyo Mudanayaasha sharafta badan ASC; ugu horayn waxaan u mahadnaqayaa Gudiddii iyo shaqaalihii Golaha ee ka soo shaqeeyay Xeer-hoosaadkan waxaanan idiin soo jeedin doonaa soo-jeedimahayga iyo meelaha aan wax-ka-beddelay xeer-hoosaaka.

Ugu horayn waxaan Xildhibaan Siciid la qabaa in Xeerku uu tusmo yeesho, si qofku markiiba uu u abaaro Qaybta iyo cutubka uu doonayo, sidoo kale waxaad moodaa in xeerku is dhex gashan yahay una baahan yahay in dib loo habeeyo.

**Qodobka 1aad** ee Awoodaha waxaan ku soo kordhinayaa in lagu daro ansixinta Garsoorayaasha Maxkamada Sarre, waayo mudane Gudoomiye, Godoomiyaha Maxkamada Sarre ayaynu ansixinaa oo labada Gole u fadhiistaan, halka 9ka Garsoose ee kale ayna ina soo marin iyaga oo hawlo badan qaranka u qabta marka *waxaan soo jeedinayaa in lagu daro ansixintooda awoodaheena.*

**Qodobka 5aad** ee Fadhiga ugu horeeya ee Golaha Wakiiladda hadii Golaha Cusubi iskii u fadhiisan waayo waxaa maalinta 45aad iskugu yeedhaya Gudoomiyaha Golaha Guurtida Mudo 45cashi gudahood ah oo ka bilaabmaysa maalinta 45aad, farqadaasi waxay si toos ah uga hor imanaysaa qodobka 44aad ee Dastuurka Qaranka farqadiisa 2aad oo odhanaysa hadii uu Golaha madaxweynuhu iskugu yeedhi waayo iyaga ayaa iskood u fadhiisanaya.

Waxaan leeyahay waa in laga saaraa waayo waa qayri Dastuuri Gudoomiyaha Golaha Guurtiduna awood uma laha in uu iskugu yeedho Golaha Cusub.

Sidoo kale isla qodobkani waxa uu ka hor imanayaa Dastuurka. Isugu yeedhida Gudoomiyaha Golaha Guurtida hadii uu Golaha Cusubi iskugu iman waayo 2/3 waxa uu ku fadhiisanayaa kala badh iyo hal tirada guud ee Golaha marka laga reebo xubnaha maqnaashihooda la baafiyay, iyada oo ay farqadan ku soo dareen mudanayaashii ka soo shaqaynayay.

Sidoo kale waxa uu qodobkani waxa uu ka hor-imanayaa **Qodobkaa 44aad** ee Dastuurka Qaranka oo cadeeyay iskugu yeedhida Golaha Cusub maadaamo oo uu Dastuurku uu yahay Xeerka ugu sareeya ee qaranka wax-kasta oo ka hor imanayaana uu yahay waxba kama jiraan, sidaa awgeed waxaan soo-jeedinayaa in Xeer-hoosadka laga saaro.

**Qodobka 5aad Farqadiisa 4aad** ee ah in Gudoomiyaha Maxkamada sarre ayaa furaya Golaha Cusub ah waxaan soo jeedinayaa in halkaa lagu soo daro in aanu gudoomiyuhu wax kale shaqo ah aanu ku lahayn dhaarinta mooyaane, waayo waa waayo-aragnimo ina soo martay.

Isla **Qodobkaa Farqadiisa 8aad** ee odhanaysa Golaha cusub waxaa gudoominaya mudanaha ugu da'da wayn waa in halkaana la cadeeyo si aanay marlabaad inoogu soo noqon. Waana in loo dhigaa halba mudanaha ugu da'da wayn ee Golaha Fadhiya ugu horeeya isla markaana ka mid ah mudanayaasha la dhaariyay ee aan u sharaxnayn jagada Gudoomiyaha Golaha, ku xigeenka 1aad iyo ku xigeenka 2aad toona.

Waxaa kale oo aan ku soo kordhin lahaa **Qodobka 6aad farqad 15aad** oo odhanaysa sidan; Hadii dhinacyada codaynayaa is le'ekaadaan mudada lagu jiro doorashada Gudoomiyaha ,Gudoomiye ku xigeenka 1aad iyo Gudoomiye ku xigeenka 2aad oo ay isku barbar dhacaan ama ku kala bixi waayaan natiijada doorashada, waxa codka lagu kala baxayo yeelanaya Xubinta shir-gudoominaysa shirka ama Gudoomiyaha Golaha wakiilada (Casting Vote) waxaana loo raacaya qaabka codaynta xeerarka ee hadii xildhibaaanadu sinadaan lagu kala baxayo codka Gudoomiyaha, waxaanu yeelanaya Laba cod oo loo yaqaan (CODKA GO,AAMINTA).

Waxaa kale oo aan ku soo darayaa maadaamo oo uu Goleheenani yahay gole Xeer-dajineed waa in aynu xeer-hoosaaka ku soo darnaa maadaamo oo uu dalka oo dhan siyaasad miisaaniyadeedkiisa maamulayno, waxaan soo-jeedinayaa in lagu soo daro in uu ka dooddo kana go'aan gaadho miisaaniyada Qaranka.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa si Golahani uu haybadiisii u soo celiyo, tusaale ahaan marka qofku Golaha uu soo galo waxa uu arkayaa in xildhibaan walba Magiciisu uu ku qoran yahay Hortiisa, lakiin halkaa sare waxaa lagu qoray Shirgudoonka, marka aad eegto dhamaan aduunyada iyo wadamada inala jaarka ahba, wax shirgudoon la yidhaa oo meel fadhiistaa ma jiraan, waxaana jira Gudoomiye iyo labadiisa ku xigeen, markaa waajib ayaa inaga saaran in aynu soo clino haybadii Golaha. Inaga oo aynaan ku xad-gudbayn labda Gudoomiye ku xigeen ee Golaha, *waxaan soo jeedinayaa in labada Gudoomiye ku-xeen hoos loogu soo dhigo kuraasidooda lana keeno kaabada ka hoosaysa kaabada ka hoosaysa Gudoomiyaha.*

Mudane Gudoomiye sidii mudanayaashii iga horeeyay sheegeen waxaan soo jeedinayaa in Xeerka shaqaalaha loo daayo Gudidda Joogtada ah ee la samayn doono si ay u soo samayso xeerkaa shaqaalaha Golaha wakiilada. Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in la sameeyo siyaasada shaqaalaha iyo kuwa kale ee siyaasada dhaqaalaha, habraaca qandaraasyada, maadaamo oo golahani uu yahay Gole qaran waa in ay cadaaataa qaabka uu qandaraasyada u bixiyaa.

Mudanayaal sida aad wada ogsoontihiin waxaa la inoo keenaa miisaniyada Qaranka, miisaaniyadaa oo uu saamayn weyn ku leh Qorshaha la yidhaa NDP oo ay wasaarada Qorshayntu samayso, waxaa muskilad ah iyada oo uu markii 3aad uu soo socdo NDP3 iyada oo aan wali Golaha la horkeenin Qorshahaa Qaranka, taanina waxay keenta in meelaha qaana ku noq-noqdaan meelaha qaarna aanay helinba, taasi oo ay keentay ka warhayn la'aanta Golaha Wakiilada. Sidoo awgeed waxaan soo jeedinayaa in miisaniyada la soo raaciyo qorshaha qaranka ee sanad walba.

Sidoo kale waxaan la qabaa mudanayaashii ka hadlay imaantinka Golaha, oo aan leeyahay suuro galmaaha Gole shaqadiisa bilaabaya 9:00 am. Waxaan leeyahay waa in aynu shaqaynaa 8da saacadood ee sharcigu dhigayo hadii aynaan shaqayn karayn wakhti kabadan, waxaanan soo jeedinayaa in shaqada la bilaabo 8:00 am.

Sidoo kale waxaan sh. Axmed Diyib la qabaa in Gudidda Shareecada Gooni loo saaro laguna soo daraa wax-barashada.

Ugu danbayntii waxaan laqabaa sida ay mudanayaashii iga horeeyay ka dhawaajiyeen in hadii xasaanada mudanayaashu halkan ku jabto in meelkalana ay ku jabayso, waxaana laga ma-maarmaan ah in xasaanada mudanaha la ilaaliyo, sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa laga saaro. Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in marka ay mudanayashu tagaan dalalka waa in ay helaan safaaradaha Maamuus.

Qodobka ka hadlaya xog-haya Guud ee Golaha ee ah in uu masuul ka yahay amniga guud ee Golaha wakiilada, waxaan qabaa in uu waajibaadkaa iska leeyahay Gudoomiyaha Golaha wakiiladu, waxayna ila tahay in halkaa farqadaa laga saaro.

Waxaan ku soo gabo-gabaynayaa **Qodobka 39aad** ee ka hadlaya marka Madaxweynuhu xeer soo celiyo waxaan ku kaabay farqad cusub oo odhanaysa Madaxweynuhu xeerarka wuxu ku soo celin karaa inta ka horaysa 21 maalmood hadii ay dhaafto, sidaasu dhaqan gal ku yahay kumana soo celin karo golaha si waafaqsan **Qodobka 77aad faqradiisa 6aad.**

Tusaale ahaan sida aynu ka warhayno xeerkii ururda la inaguma soo celin waa mudo dhaaf, markaa waa in ay xeer-hoosaadkeena ku cadaataa mudada lagu soo celinayaa.

Waxaan soo jeedinayaa in 11Gudi hoosaad laga dhigo Golaha, sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in qaraarada uu galani gaadho iyo kuwa aan la wadaagno Golaha Guurtida inay ka muuqdaan Xeer-hoosaadka.

Ugu danbayn gudidda aan ku soo darayo gudiyada Golaha ayaa waxay tahay Gudidda Saxaaafada iyo Dadweynaha, maadaama oo Golahani uu yahay Golaha shacabka, aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.

**Md. Axmed Maxamed Maxamuud (Kaare)** **(14min 08sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, waad mahadsantahay Mudane Gudoomiye, mudanayaasha sharafta lehna waan salaamayaa, run ahaantii waxaan ku faraxsanahay in aynu sidan quruxda badan u dul istaagno, hagihii ina kala hagayay mudadaa 5ta sanno ee mudo xileedkeena waa mid aan aad ugu faraxsanahay.

Waxaan halkan dul istaagi doonaa qodobo aan isleeyay waxay u baahanyihiin kaabis iyo wax-ka-beddel laguna soo daro xeer-hoosaadka.

**Qodobka 5aad farqadiisa 1aad** waxay tilmaamaysaa fadhiga 1aad ee golugu waxa uu ku furmi karaa 2/3. Farqadaasi waxay si toos ah uga hor imanaysaa Dastuurka Qodobkiisa 45aad farqadiisa 2aad oo tilmaamaysa in fadhiyada Goluhu ku furmi karaan kala badh iyo hal (42), markaa waxaan is leeyahay qodobkaa waa in laga dhigaa absolute majority iyada oo laga yaabo in Goluhuba furmi waayo, waxaanan is leeyahay waxay keeni kartaa caqabad.

Waxaa kale oo aan doonayaa in halkaa **Qodobkaa 5aad** lagu soo daro ama maxaa laga yeelayaa oo iyaduna u baahan in la cadeeyo hadii golahi yeedhmadii madaxweynaha iyo si kastaba uu u furmi maayo, halkee looga gudbayaa? Ama maxaa la yeelayaa.

Sidaa awgeed waxaan isleeyahay waxaa muhiim ah in xal loo helo hadii ay maalintaa 45aad noqoto maalin fasax qaran ah maxaa la yeelayaa? Yaase awood u leh in uu beddelo maalin shaqo ama maalin ku haboon? Iyada oo xubnihii loo saaray ka soo shaqaynta xeer-hoosaadku ku soo dareen in Gudoomiyaha Golaha Guurtidu u yeedhi karo, aniga waxaa ila haboon in halkaa laga dhigo Gudoomiyaha Maxkamada sare maadaama oo aynu isku shaqo nahay Golaha Guurtida.

Qaabka loo dooranayo Gudoomiyaha waxaa gudooniya sida uu xeer-hoosaadkeenan uu hada muujinayo xubinta ugu da'da weyn, waxaanan qabaa in la cadeeyo awoodaha uu

yeelanayo Gudoomiyahaasi, ma waxa uu yeelanaya awoodihii uu lahaa Gudoomiyaha Golaha Wakiiladu, mise awoodihiisu way xadidanyihiin, waxanan qabaa in la taxo awoodaha maalintaa uu yeelanayo.

Tusaale ahaan, ma leeyahay in uu gudoomiyahaasi Golaha ka saari karo qof uu doono Golaha, waxanan is leeyahay waa mi u baahan in hoos loo eego, sida aynu isla ognahay wakhtiga la codaynayo xubinta ugu da'da weyni wuu codeeyaa, laakiin xeer-hoosaadkeena inooguma qorna, markaa waxaan soo jeedinayaa in xeer-hoosaadkeena lagu cadeeyo si khilaad looga badbaado, oo sidii uu sheegayay xildhibaan Maxamed Abiib hadiiba ay is leekaadaan maxaa lagu kala saarayaa? Waxaan soo-jeedinayaa in uu gudoomiyahaasi yeesho Casting Vote.

**Qodobka 6aad** habka kala horaysiinta waxaan la qabaa mudanayaashii iga horeeyay in kasta oo ay qoreen hadana waxaan is leeyahay ma'cada oo waxaa inoo qoran sida ay magacyadoodu u kala horeeyaan, maxay tahay sida ay magacyadoodu u kala horeeyaan? Ma waxay noqonaysaa Alif-bata? Ma waxay noqonaysaa sidii ay komishanku u soo gudbiyeen? Ma waxay noqonaysaa sida ay xog-hayntu u qorto, markaa halkaasi waxay u baahantahay in la cadeeyo oo waliba alfa-bet lagu cadeeyo, walibana Alfa-bet-ka lagu qorayaa uu noqdaa Af-soomaali.

**Isla Qodobka 6aad farqadiisa 15aad;** dhaarta Gudoomiyaha, Gudoomiyaha la doortay ma loo baahanyahay in la dhaariyo, oo dhaar cusub la sameeyo, xeer-hoosaadkeenii hore wey ku jirtay laakiin guddidu way ka saareen, waxaanan qabaa in ay muhiim tahay in gudoomiyaha dib loo dhaariyo.

Waxaa kale oo aan ku dari lahaa, dhaarta xog-hayaha ee uu Gudoomiyuhu dhaarinayo, waxaan leeyahay ayayna noqon ta lagu dhaarinayo xubnaha la doortay ee waa in ay noqotaa dhaar waafaqsan shaqadiisa.

**Qodobka 7aad ee qaab dhismeedka Golaha;** qaab dhismeedka Goluha anigu waxaan qabaa in laga saaro Erayga Shirgudoonka, waayo xeer-hoosaadkeenan meel kaliya oo awoodooda iyo shaqooyinka ay qabanayaa ku jirtaa ma jiraan markaa sababtaa waxaan leeyahay waa in laga saaraa, maadaamo oo aanay jirin shaqo aynu halkan ku cadaynaynaa waa in laga saaraa eraygaa shir-gudoon, oo loo qoro Gudoomiye, Gudoomiye ku-xigeenka 1aad iyo Gudoomiye ku xigeenka 2aad.

**Qodobka 15aad** ee Maamuuska Xidhibaana waxaan la qabaa xidhibaanadii iga horeeyay oo waxaa inoo damaanad qaaday Dastuurka Qaranka **Qodobka 49aad Farqadiisa 3aad** oo

sheegaya in aan xildhibaanka labaadhi karin isla markaana xeer-hoosaadkeena ayaa **Qodobka 15aad farqadiisa 3aad**, sidaa daraadeed waxaan xildhibaanada la qabaa in aan xildhibaanka lagu baadhi karin Golaha mar hadii meelihii kale aan lagu baadhayn.

Taa baddelkeeda si amniga Golaha loo sugo ha la adkeeyo oo Xeer Ciqaabeed hala sameeyo oo mudanaha hub la soo gala Golaha la yidhaa ciqaabtaa ayaa ka dhalan karta, taana in sidaa la yidhaa ayaan soo jeedinayaa. Xaga saacadaha Golaha, mar hadii aynu waajibinayno xeerar jidayna saacado shaqo oo ah 8, maxaa inoo diidaya inynu ianan shaqayno, arrintaasina waxay u muuqanaysaa arin aan xaq ahayn, Markaa *waxaan soo jeedinayaa in halkaa lagu beddelo 8-3galabnimo lanna raaciyo lama rawixi karro ilaa inta ay shaqadu dhamaanayso.*

**Qodobka 15aad farqadiisa 5aad** ee ka hadlaysa xasaanada xildhibaanka; sida uu xeer-hoosaadkii hore sheegay waxaa ku qornaa in xasaanada lagaga qaadi karo Absolute majority, hala Guddidu ay ka soo dhigtay in laga dhigo 2/3 taasi oo fogaynaysa in mudanihii ku xad-gudba xeerarka ama shareecada Islaamka in aynu talaabo ka qaad kariweyno, *waxaanan soo jeedinayaa in la yidhaa kala badh iyo wax ka badan.*

**Qodobka** ka hadlaya Guddiyada, guddida Wax-barasha warfaafinta, dhalinyarada iyo ciyaaraha iyo Guddida Shareecada iyo Arimaha dhaqanka iyo qoska *waxaan soo jeedinaa in hal Guddi laga dhigo loona bixiyo Guddida Ariamaha Bulshada, shareecada, dhaqanka, iyo qoska waayo waa shaqo isku dhawdhaw.*

**Qodobka 67aad** Golaha wakiiladu waxa uu ansixin karaa ama dheerayn karaa xaaladaha deg-dega ah si waafaqsan dastuurka "Anigu waxaan qabaa in qadabkaa aanu Golaha Wakiiladdu lahayn maadaama oo aynaan awood u lahay xaaladaha deg-dega ah in aynu qaado ama yarayno oo uu Golaha Guurtidu inala leeyahay" *waxaan soo jeedinaynaa in qodobkaa Meesha laga saaro, markaa sida uu dastuurku sheegayo xaaladaha deg-dega ah waxaa lagu waajibin karaa kulan Baarlamaan oo kaliya.*

**Qodobada wax-ka beddelka Xeer-hoosaadka** waxaa ku jira laba qodob oo ayna Awoododu si fiican u qeexnanyn, oo marna la leeyahay Guddida Joogtada ah ayaa Wax-ka-beddelka Xeer-hoosaadka keenaysa, marna waa la leeyahay waxaa keenaysa 2/3. Dhanka kale waxaan sop jeedinayaa in xeer-hoosaadka lagu daro in la helo hab loo xalinkarro khilfaadka Golaha ama khilaafaadka Golaha iyo golayaasha kala ee qaranka, *waxaanan soo jeedinayaa in la keeno hab khilaafaadkeena Golaha guurtidu lug ku yeelato oo ay u xaliso.* Intaa ayaan ku soo koobayaa waad mahadsantihiin.

**Md. Maxamed Xayir Ducaale (3min 53sec) Bismilaahi Raxmaani Raxiim,** Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo Saxaafadaba waan salaamayaa, marka hore waxaan hambalyo iyo bogaadin u so jeedinayaa Guddidii ka soo shaqaysay xeer-hoosaadka ee sida wanaagsan u soo ururisay oo aan leeyahay waad mahadsantihiin.

Marka labaad, waxaan arkayay in Goluhu uu leeyahay lataliyayaal sharci waana mid wanaagsan in uu sheego, laakiin maan arag lataliyayaal shareecada ah, sidaa daraadeed *waxaan soo jeedinayaa in lagu soo daro lataliyayaal sharci oo ah rag xeer-dheerayaal ku ah diinta islaamka.*

**Qodobka17aad Farqadiisa 2aad labiska iyo haybada Golaha;** markaa waxaan leeyahay dumarka islaamu sida diinteenu sheegay waxay leeyihiin labis diintu sheegtay in laga dhigo ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 29aad, ee ku saabsan baadhista xildhibaan,** waxaan la qabaa in ka hor imanayso Qodobka 44aad ee Dastuurka, *waxaanan soo jeedinayaa in xeer hoosaaka laga saaro.*

*Sidoo kale waxaan la qabaa sh. Sokeeye in **Qodobka 31aad*** in aanay istaahil ku ahayn in qof loo istaago, maadaama oo aanay Diinteena aanay ku jirin, *waxaanan soo jeedinayaa in xeerka laga saaro.*

**Qodobka 63aad ee ah Guddida Shareecada,** waxaan la qabaa guddidu sidaa ay u soo jeediyeen, waxaanan leeyahay waa in ay noqdaan guddi firdircoon oo budhget-keeda iyo qadarinteeda leh.

Sidoo kale waxaan xildhibaan Maxamed Abiib la qabaa *in aynu ansixino Garyaqaananda maxkamada sare in dhaarintooda iyo ansixintoodaba Golaha yimaadaan.*

Sidoo kale waxaan mudane Laabsaalax, *laqabaa **Qodobka 16aad farqada 10aad in gunada Golaha wakiilada laga saaro Meesha maadaamo oo ay mushahar qaadanayaan.*** Wsc.

**Md. Bille Cabdi Ducaale (13min 15sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiim., waan salaamayaa Shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba, waxaan ka hadlayaa **Qodobka 2aad ee tilmaamaha Golaha wakilada** oo mudanayaashi Loo saaray xeerka ay ku soo koobeen qodonka 39aad ee dastuurka iyada oo tilmaamahaa guud ay koobsanayaa 4qodob oo kala ah qodobada 39aad, 43aad, 42 aad, iyo 40aad afartaa qodob ayaa koobsana tilmaamaha Golaha wakiilada, markaa waxaa uu ku sugnaa sidii xeerkii hore marka la raaciyo hal farqad oo odhanaysa

waxay xafiisyo ku yeelanayaan Gobolada Dalka. Marlaa *waxaan soo jeedinayaa in sidiisii hore loo daayo Qodobkaas 2aad.*

**Qodobka 5aad** waxaa ku cad in 30 maalmood gudahood laga bilaamo maalintii maxkamada sarre ku dhawaaqday natiijada Doorashada, halka Dastuurkeena Qodobk 44aad oo sheegaya in Golaha cusub waxa uu qabanayaa fadhigiisa ugu horreeya 30 (soddon) maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta Iagu dhawaaqo go'aamada doorashada, Go'aanadaa doorasha ee la sheegayaa waa ku wee ma kuwii maxkamadaa mise waa kuwii komishanka doorashooyinka, ma labadooda oo wada jiraa? Waa kuwee?

Marka waa in halkaa la cadeeyo, waayo xeerarkeena waxaan ka dheeganaynaa waa Dastuurka iyada oo qodobka aan dastuurka waafaqsanayna uu yahay waxba kama jiraan, markaa waxaan leeyahay qodobkaasi waxa uu u baahanyahay Tafsiir ee yaynaan si fududu u qaadanin.

**Qodobka 16aad farqadiisa 1aad** ee xeerka doorashooyinka waxaa uu gudbinayaa in maalinta maxkamada sare ku dhawaaqdo uu 7casho gudahoos gudoomiyaha maxkamada sarre iskugu yeedhayo isga oo qodobkaasina uu cuskanayo qodobka 4aad ee Dastuurka. Mrakaa waxaan *Soojeedinayaa in la tafsiro inta aynu dooda ku jiro si loo helo wax sax ah.*

Qaabdhismeeka Maamulka sidii xeer-hoosakii hore ugu qornayd iyo sida hada loo qoray way kala duwantahay, ilamana qurux badna aniga, tusaale ahaan mar la leeyahay qaybta la doortay ilama quruxbadan in lagu qoro waayo mar la leeyahay Gole wakiilo waa Gole la doortay. Laakiin waa lagu dhigi karaa structure Golaha.

Qaab dhismeedka maamul waa mid aynu inagu leenahay, lakiin xaguu ka bilaabmaya, Xog-haya Guud iyo lataliyayaasha sida ku qoran Xeer-hoosaadka, sidaa maaha ayaan qabaa Qodobka 66aad ee Xeer-hoosaadkeena waxa uu leeyahay qaab dhismeedka maamul waa wax uu Golahani leeyahay waana waax ka mid ah oo ah waaxda maamulka, markaa *waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa loo daayo sidii hore.*

Qaabka dhismeedka fadhiga Golahu, ama sida ay u fadhiistaan kuwa aduunku waa Gudoomiyaha oo xaga sare fadhiya, halka labada Gudoomiye ku-xigeen ay fadhiisanayaan halka ka hoosaysa Gudoomiyaha, *markaa waxaan leeyahay sidii uu markii hore u qornaa ha loo daayo.*

Sidoo kale waxan taageersanahay in aan la baadhin mudanayaasha, iyo in alfa-betka loo qoro, dhanka kale waxaan ku taageersanahay sheeka in aan cidna loo istaagin waayo dad islaam ah ayaynu nahay Asc.

**Md. Bashiir Xuseen Xirsi** ***(3min 28sec)*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, xidhibaanada iyo shaqalaba waan salaamayaa, waxaanan ku faraxsanahay sida qiimaha iyo sharafta leh ee ay doodu inoogu socoto, intii aan soo diyaariyay waa lawada yidhi waayo xaga danbe ayaan ku dhacay, markaa waxaan kaliya ku yara noqon lahaa qodobka 10naad farqadiisa 15aad maadaama oo la sheegay gudoomiye ku xigeedka laad uu ku jira mooshinka, maxaa la yeelayaa hadii kal 2aadna ku jirro, *waxaan soo jeedinayaa isna in aanu ku jirrin oo xubinta ugu da'da wayni hogaamise fadhigaa.*

*Gumdoomiyaha iyo ku xigeenada hadii mooshin laga wada keeno waxaan soo jeedinayaa in uu hogaamiyo xildhibaanka ugu da'da weyni hadii uu mooshinka ku jirana waxaan leeyahay mudanahu ku xiga da'ahaan waa in uu hogaamiyaa.*

*Sidoo kale waxan soo jeedinayaa hadii mudanaha dadki soo doortay ay ka keenaan petition waxaan odhan lahaa waa in laga aqbalaa, maadaama oo uu xildhibaanku ku fadhiyo dadkii soo doortay.*

**Md. Xuseen Ismaaciil Jaamac** ***(9min 13sec)*** waad mahadsantahay mudane Gudoomiye, waan idin salaamayaa Gudoonka iyo xidhibaanad Golaha fadhiyaba Asc; Mudane Gudoomiye qodob badan oo aan halkan ku soo diyaarsaday waa laga hadlay, markaa waan ka sii gudbayaa.

**Qodobka 3aad ee sheegaya awoodaha Golaha;** waxaan soo jeedinayaa marka laga yimaado Hay'adaha dawlada, in hay'adaha iyo wakaaladaha lagu daro Xeer-hoosaadka uu wada shaqayn dhaw la yeelan karo, hadii uu doonan u yeedhan karo Saxiibada Somaliland ee xaga hor-marka ka caawiya sida UN-ka EU-da iyo Hay'adaha sama falkaoo runtii qayn ka qaata barnaamijyada yoolasha horumarimeed ee aduunyadu isku raacday, taasina ay ka mid tahay waxyaabaha uu golahani u samaysanyahay.

**Qodobka 5aad ee ka hadlaya fadhiyada Golaha Cusub,** qodob kaasi waxa uu khilaafsanyahay Dastuurka qodobkiisa 44aad, sidaa daraadeed waxaan arintaa ku taageersanahay Xildhibaan Maxamed Abiib ee ahay in sida dastuurka loo raaco isugu yeedhista Golaha *ayaan soo jeedinayaa.*

**Qodobka 7aad** Qaab-dhismeedka Golaha waa in Meesha aan hadal lagu qorin ee waa in ay Meesha timaad Stucture oo uu ku cadyahay qaabka ay isku hoos imanayaan oo uu ug usareeyo Gudoomiyuhu oo aanu noqon wax mugdi ah inaga galin.

**Qodobka 8aad farqadiisa 14aad** Magacaabista Xog-hayaha Guud iyo ku xigeenkiisa waa in la faah-faahiyaa, waana in lagu faa-faahiyaa Xeerka shaqaalaha Golaha, oo la yidhaa sidee ayuu gudoomiyuhu u dooranaya xoghaya iyo ku xogeenkiisa.

**Qodobka 10aad** ee ka hadlaya xil-waayida Gudoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa, waxaan leeyahay aad ayuu iskugu qasanyahay, sidoo kale waxa uu ka hor-imanayaa Dastuurka Qodobkiisa 50aad farqadiisa 5aad, *waxaan soo jeedinayaa in loo daayo sida uu sheegayo qodobka 50aad xarafkiisa "C"*

**Qodonka 15aad ee Maamuuska iyo xasaanada Mudanayaasha Golaha;** waxaan ku soo kordhin lahaa in mudanayaashu tagi karaan in ay tagi karaan meelaha saldhigyada, danbi baadhista iyo meelkasta oo dadka lagu xidho, looguna ogolaado si aan turxaam lahayn.

**Qodobka 37aad farqadiisa 2aad xarafkeeda "B"** ee xadidaya Mudada dooda Xildhibaanada waxaan soo jeedinayaa in Meesha laga saaro oo uu mudanuhu dodo ilaa inta ay doodiisu u dhamaanayso, waxanan ku taageersanahay mudane Siciid.

**Qodobka 52aad** ee ka hadlaya Tirada Guddi Hoo-saadyada ee la soo jeediyay in uu galahani yeesho 13-guddi hoosaad, *waxaan soo jeedinayaa in Golahani uu yeesho 10-guddi hoosaad, waayo waxaa dhici karta in guddiyadu ay kooram waayaan ay shaqadooda ku qabsadaan.*

**Qodobka 58aad** waxa uu sheegayaa Guddida Deegaanka, khayraadka iyo wax-soosaarka iyo tamarta, *waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo qaab qoraalkeeda Guddida Beeraha, tamarta, biyahay iyo khayraadka Dabiiciga ah si ay uga muuqato magaca guddidaa ilaha wax soo saarku.*

Sida ku cad Xeer-hoosaadkeena waxaa Goalah amnigiisa iyo hawshiisaka ka masuul ah Gudoomyaha Golaha. Markaa waxaan soo jeedinayaa in Golahani uu yeesho policy-ga shaqaalaha, habraaca qandaraasyada, habraaca Allaabta iibka, iyo code of conduct, *waxaan soo jeedinaa in Goluhu uu yeesho hababkaa oo dhan. Asc. Waad mahadsantihiin.*

**Md Maxamed Xuseen Jaamac (Raanboow)** ***(3 min 35 sec):*** Bismilahi Raxmaani raxiim. Marka hore waxaan u ducaynayaa xildhibaanadi inaga horeeyey oo Qaranka iyo Umaddaba wax badan u qabtay, si gaar ah waxaan ugu ducaynayaa Xildhibaanadii deegaankayaga ahaa ee aan bedelay, ilaahay khayr ha siiyo.

Waxaan si gaar ah uga hadlayaa **Qodobka 5aad farqadiisa 4aad** oo ah "isugu yeedhida haddii Goluhu iskii u fadhiisan waayo" uu leeyahay Guddoomiyaha Golaha Guurtida isugu yeedhaya. Waxaan soo jeedinayaa in Qodobkaa guud ahaanba meesha laga saaro,

dastuurka ayuu ka soo horjeedaa, labada Golena waa isku awooduun, oo haddii laga fiirsan waayo lagu bedeli maalinta 45aad Guddoomiyaha Maxkamada sare isugu yeedho.

**Qodobka 10aad** ee ah xil ka qaadista Xubnaha Shir-guddoonka. Shir-guddoonkeena waxayn ku dooranay hal dheeri, halkana waxa lagu qoray saddex meeloodoow laba ayaa xilka ka qaadaya (2/3). Waxa fiican in labada dhinac dhinacuun isugu luga duwano ama Shir-guddoonka lagu doorto saddex meeloodoow 2/3 ama hal dheeri lagu doorto ooh al dheerina lagaga qaado.

Mudane Guddoomiye iyo mudanayaal Golaha Wakiilada waxa laga filayaa mid u dhaga nugul shacabka, oo ku dhaqma dastuurka oo dimuquraadi ah, xeer-hoosaadkuna waa inuu intaas ka turjumaa.

Waxa ii muuqata in aanay sinaba sharci iyo caqli toona u ahayn in Shir-guddoon lagu doortay hal dheeri, in haddana la yidhaa waxa lagu ridayaa seddex meeloodoow laba meelood (2/3) dhinac uun waa in la isugu luga duwadaa, si Shir-guddoonku u ahaado mid ugu yaraan ixtiraama Xildhibaanada kalsoonida Golaha u wada haysta.

Waxaan taabanayaa dhawr Qodob oo yar yar oo Iyana meesha ku qoran sida awoodka cadaynta maragyada awoodka cadeynta ururada habka ansixinta masuuliyiinta saacadaha masuuliyiinta inoo yimaada su'aalaha la waydiinayo, maamulka iyo awooda Guddi hoosaadyada, awooda kulamada iyo warbixinada u yeedhida maragyo iyo cadeyn qaadistooda. Waxaan leeyahay waa in lagu faah-faahiyaa xeerkan arrimahaas.

Akhriska koowaad iyo akhriska labadaa qaabka loo sameynayo, waa in la waafajiyaa sida Baarlamaanada adduunku u sameeyaan, habkay dadweynuhu xeer u soo Gudbin karaan waa habkee, waa in la tilmaamaa siday u soo gudbinayaa iyo sida loo cadeynayo dadka saxeexay ee 5000 ee qof ee sharcigu qoray.

Waa in wixii faah-faahin ee dastuurka ah lagu qoraa, waa in inta la dejinayo xeerka Miisaaniyada xeer-hoosaadka lagu daraa iyo habka gaarka ah ee miisaaniyadda lagu ansixinayo. Mudane Guddoomiye iyo mudnayaal waxa Iyana dareenkeeda leh, haddii laba mudane Golaha ay ugu da'weynaadaan oo isku da' noqdaan, isku bil noqdaan, maalin noqdaan isku sanad noqdaan Iyana waa inaynu xal raadinaa.

**Md. Cabdiqani Maxamed Adan (3min 10sec)** Bismilahi Raxmaani raxiim. Waad mahadsan tahay Guddoomiye. Maadaama oo maanta 38 xildhibaan isku diwaangeliyeen in ay doodaan. Qodobadii xildhibaan kastaa soo qortay in looga horeeyey, aniga oo soo koobaya qodobadii aan soo qortayna la iiga horeeyey,

**Qodobka 5aad farqadiisa 8aad** waxay sheegaysa marka la dooranayo Shir-guddoonka maalinta u horeysa Golaha, sida aan wada ognahay maalintii dhawayd mushkilad ayaa

halkan ka dhacday oo way nagii ogayn buuqii iyo sawaxankii halkan ka dhashay, ka dib markii la waayey xeer sax ah oo lagu Guddoomiyo doorshada Guddoomiyaha Golaha Wakiilada, isla markaana waatii Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Guddoomiyaha Maxkamada sare ina soo dhexgaleen.

Waxaan soo jeedinayaa **Qodobka 5aad farqadiisa 8aad** Guddoomiyaha Maxkamada sare waa inuu helaa oo Koomiishanka Doorashooyinka ka helaa liiska afarta qof ee ugu da'da weyn, waayo waxaynu ogayn doorashadeenii Shir-guddoonka lagu dooranayey 81 xildhibaan ayaa fadhiyey. Haddii labada xildhibaan ee ugu da'da weyni ka maqnaadaan meesha khlaaf ayaa soo galaya, markaa Guddoomiyaha maxkamada sare waa inuu hayaa afarta qof ee ugu da'da weyn Golahaas la soo doortay si aanu khilaaf uga dhicin haddii qofka koowaad ee ugu da'da weyn iyo qofka labaad ee ugu da'weyn.

**Qodobka 24aad** waa in lagu cadeeyaa habka qoraalka, waayo habka qoraalka mad-madaw badan ayaa ku jira. Qodobka 34aad xarafka (R) wuxuu leeyahay "Nuqulka xeer kasta oo Golaha ka baxa, waa in si sax ah loo hubiyaa oo waliba oo la sameeyaa laba hubinood" mudane Guddoomiye hoolka Golaha Wakiiladu ku shirayo oo carbondiogzide iyo oxygen soo galaysaa is lahayn ha lagu xidho qaboojiyo.

**Md. Mubaarig Xuseen Maxamed (Xeel-dheere) (6min 28sec):** Bismilahi Raxmaani raxiim. Anigu waxaan is dultaagi Doon dhawr qodob, waxaan ugu horeyn doonaa Qodobka 10aad ee sheegaya xil ka qaadista Guddoomiyaha iyo Gudoomiye ku xigeenada. Farqadiisa 2aad waxay sheegaysaa in 27 xildhibaan ay mooshin ku soo oogi karaan xil ka qaadista oo xil ka qaadistaasi ku ansaxayso 2/3. Waxaan leeyahay taasi waa qayrul Dastuuri meel kaga qoran tahayna ma jirto. Qodobka 128aad farqadiisa 2aad ee Dastuurka JSL waxa uu leeyahay "Dastuurka ayaa ugu sareeya xeerarka dalka, xeer kasta oo aan isaga waafaqsanaynina waa waxba Kama jiraan, kaa waxa faafaqaya oo taageeraya xeer-hoosaadka Qodobka 90aad farqadiisa 1aad oo odhanaysa waxa xeer-hoosaad saldhig u ah Dastuurka JSL. Sidaa daraadeed Qodobka 79aad ee Dastuurka farqadiisa 2aad wuxuu sheegayaa in Xildhibaanka leh xasaanada dastuuriga ah lagaga qaadi karo 2/3.

**Qodobka 96aad farqadiisa 1aad** waxay sheegaysaa in Madaxweynaha Xilka lagaga qaadi karo kala badh (Absolutely majority) ama kala badh iyo hal oo 42 ah. Markaa madaxweynuhu waxa weeye qofka ugu mudan Madaxda Qaran sida uu sheegayo Qodobka 93aad farqadiisa 1aad ee Dasuurka JSL.

Waxaan u arkaa in **Qodobka 10aad** ee xeer-hoosaadku Goluhu baalmarsan yahay Dastuurka, waana wax lala yaabo, in Xildhibaankii Xasaanada lahaa iyo Guddoomiye oo fulin Gole ah isku si xilka looga qaado.

Mudnayaal waxaan soo jeedinayaa Absolutely Majority oo ah kala badh iyo hal, maadaama oo hore loogu doortay Simple majority.

**Qodobka 16$^{aad}$** oo ah ka soo xaadirista fadhiyada Golaha, **farqadiisa 2$^{aad}$** waxaan odhan lahaa maadaama oo aynu nahay Gole cusub oo waliba dhalinyaro u badan oo Eneergy haya waxaan odhan lahaa saacadaha shaqada ha la kordhiyo. Si qaranka inta kale inoogu dayato oo saacadaha mustaqbalka la kordhiyo.

**Qodobka 16$^{aad}$ farqadiisa 14** waxa ku jira qalad, waxa uu odhanaya waxa la eegayaa Qodobka 73$^{aad}$ farqadiisa 3$^{aad}$ ee Dastuurka. Halkaa wuu qaldan yahay waxa uu sax ku yahay Qodobka 50$^{aad}$ farqadiisa 3$^{aad}$ kaana ha la bedelo.

**Qodobka 69$^{aad}$** ee wax ka bedelka xeer-hoosaadka Golaha. Waxaan odhana lahaa farqada 1aad ee guddida joogtada in sideeda loo daayo, sidoo kale farqada 4aad ee ah wax ka bedelka waxa keeni kara 1/3 oo Golaha ah, waxa kale oo keeni kara ayaan odhan lahaa oo option la siiyaa. Waxaan odhan lahaa farqada 1aad waa in laga dhigaa B iyo T.

**Qodobka 52$^{aad}$** ee Tirada Guddiyada Golaha. Waxay mudabayaal badan soo jeediyeen in arrimaha bulshada iyo shareecada la si raaciyo. Taasi suurto-gal maaha, waayo arrimaha bulshada waxa hoos imanaya caafimaadkii, waxabarshadii, Sport-gii iyo warfaafintii oo culayska intaas leeg ayey leedahay. Lama hoos gelin karo Guddi kale.

Waxaan soo jeedinayaa oo mudanayaal hore ku raacayaa in miisaaniyadda lagu darro xeer-hoosaadka si musharahkayaga aanu leenahay, fadhiyada qarashaadka aanu leenahay, habeen dhexyada aanu leenahay haddii aanu tagno safaro, haddii safari dibedeed jiraan qarashkooda. Arrimahaas oo dhan waa in xildhibaanadu mid mid u ogaadaan, si ay ugu darsadaan qorshe hawleedyada ay Guddiyadu samaynayaa. Sidoo kale waxaan raacinayaa waa in internal Audit Golaha ahi jiraa si qarashaadka miisaaniyada Goluhu u baxaan u ogaano, maadaama oo aynu doonayno in aynu Xukumada dabagal ku samayno, markaa inagu aynu iska bilawno oo aynu internal Audit samaysano.

**Md. Axmed Ibraahim Cabdi (Jimo-jilic)** ***(7min 28sec)*** Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeenada, Xildhibaanada, Xoghayaha, Shaqaalaha iyo saxaafada dhammaantiin Asalaamu Calaykum.

Hawshii waa badatay doodiina way dheeraatay, waxaan odhan karaa nuquladii maalintii hore inaloo dhiibay. Waxaan Xildhibaan Maxamed Abiib ku raacsanahay xaga tusmada. Waxaan leenahay hadda ka dib kan ama kuwo kale oo la qaybinayaa waxaan leeyahay tusmo ha yeeshaan.

Shaqaaluhu waxa kale oo ay noo soo dirin nuqul kale oo bold-kii leh, waanay ku mahadsan yihiin Mudane Guddoomiye. Nuqulkii hore waxoogaa farqiya ayaa jira.

**Qodobka 3$^{aad}$ farqadiisa 14$^{aad}$** halka kalmad oo kaliya ayaan ka saxayaa "halka heshiiyada xukymadu **Gasho** waxaan u bedelayaa **"Galayso"**

**Qodobka 55aad farqadiisa 3aad** oo ay miisaaniyad kasta oo hore Gole ama qarash kasta oo aanu Goluhu hore u ansixin aanay xukumadu geli Karin. Markaa halkaas masharuuc kasta oo dhaqan dhaqaale oo xukumadu galayso waa faah-faahintiisa (terms) xukumadu keentaa oo aynu hore u imaadaan si Golaha oo uu hore u ansixiyo.

**Qodobka 11aad farqadiisa 3aad** halka nabadgelyada laba qodob. Qodobka 8aad ee isla xeer-hoosaadku waxa uu ka hadlayaa xilka ama masuuliyadda nabadgelyada waxa siinayaa Guddoomiyaha, masuuliyad taas la mid ahna waxa uu siiyey Xoghayaha Guud ee Golaha. Si aanay isaga hor-iman labadaas masuuliyadood, waxaynu leenahay kaaliyaha Nabadgelyada ee Guddoomiyaha. Qodobka 11aad farqada 3aad Xoghayuhu waxa uu u noqonayaa Guddoomiyaha Kaaliye si aanay Qodobka 8aad iyo Qodobka 1aad isaga hor-iman.

**Qodobka 15aad farqada 2aad** Xildhibaanadun waxay xaq u leeyihiin xurmayn iyo maamuus dhamaystiran. Xafiisyada dhammaan Gudaha dalka iyo safaaradaha dibedda oo xurmaynta xildhibaanadu meel kasta ka helayaan taas noqoto oo safaaradaha dibeddu ogaataan marka Xildhinaandu soo baxayaan.

**Qodobka 15aad farqada 5aad** waa sixitaan kaliya marka Xildhibaan laga qaaday, waxa qoran markii. Ha laga dhigo "marka"

**Qodobka 29aad farqada 6aad xarafka (J)** waxaan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyey, iyada oo lala akhrinayo Qodobka 40aad ee Dastuurka.

**Qodobka 39aad farqada 6aad** nuqulkii hore way ka maqan tahay, laakiin nuqulka naloo soo diray sideeda yey ugu jirtaa. Waxaan leeyahay ha la qaato nuqulka la inoo soo diray maadaama oo ay nuqulkii hore ka maqan tahay.

**Qodobka 42aad farqada 3aad** waxa uga soconaa dhaqan galin oo waxaan leenahay Guddidii soo samaysay ha soo wada saxeexdo.

**Qodobka 48aad farqada 4aad** marka uu helo, halkaasina waa sixitaan gadoomiyaha Guddida, halkaasina waa sixitaan.

**Qodobka 52aad farqadaha 9aad iyo 12aad** Guddiyada iyo arintooda oo shuruucka iyo shareecada labadaba waxaan ku raacsanahay sheekhdeena waaweyn ee Xildhibaanada Axmed Kucadeeye Xildhibaan Sokeeye. Guddiyada in la isku min guuriyada xildhibaanadii ka hadlay ayaan la qabaa. Nuqulka saxda ahi waa nuqulkii markii dambe la inoo soo diray.

**Qodobka 65aad farqadiisa 4aad** waxa qoran (Type error) waxaanay halkaasi noqonaysaa yeedhmada.

**Qodobka 56aad farqada 5aad** waxay ku wacan tahay in sidan loo dhigo, in masuulkaasi Gudan waayo xilkiisa Dastuuriga ahaa, isla markaana shuruudihii lagu magacaabay ay bureen, waxaan ku bedeli lahaa shuruuduhii xil gudashada uu jabiyey.

Xeer-hoosaadku waxa uu dhaqan galayaa marka dhammaanba soo jeedimihii ay sidooda uga muuqdaan oo ay imaadaan.

**Md. Abokor Siciid Cali Gaboobe** ***(11min 21sec):*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Calayhu Aftal salaasu wasalaamu, Asalaamu Calaykum Wa Raxmatulaahi Wax Barakaatu.

**Qodobka 10aad** wixii la yidhi waan yar tibaaxi waxna waan ku dari. Qodobka 10aad farqada 6aad wuxuu leeyahay "Haddii mooshin xil ka qaadisa lagu keeno Guddoomiyaha, waxa fadhiga markaa hogaaminaya ama shir-Guddoomiya Guddoomiye ku xigeenka 1aad, haddii uu Guddoomiye ku xigeenka 1aad uu isaguna ku jiro xildhibaanada mooshinka keenay, waxa hogaaminaya Guddoomiye ku xigeenka 2aad" meesha waxa markaa taala haddii labaduba ku jiraan xildhibaanada mooshinka keenay, yaa markaa shirka Guddoominaya. Waxa fiican taas in laga jawaabo.

**Qodobka 10aad farqadiisa 7aad,** waxa uu leeyahay haddii Guddoomiyaha iyo labadiisa ku xigeen laga keeno mooshin xil ka qaadis ah, sidan ayaa loo dhaqmayaa. "Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenada laga keenay Mooshinka xil ka qaadista, waa in laga wareejiyo Guddoominta fadhiyada ama gfadhigaasi intuu markaa dhamaanaayo". Sidaa darteed waxa shir-guuddoominaya ayuu leeyahay xildhibaanka ugu da'da weyn. Halkaas Iyana waxa meesha soo geli karta, inaga oo ka faa'iidaysanayna wixii aan ka soo baranay maalintii ugu horeysay ee aynu fadhiisanay, haddii xubintan ugu da'da weyni ay ka qayb tahay ciddan mooshinka keentay, markaa kuma qorna cidii xilkaa qabanaysay.

Waxaan odhan lahaa ha lagu darro "haddii aanay ku jirin cida mooshinka keentay, haddii ay ku jirtana la yidhaa cidii ku xigtay ee aan ku jirin Mooshinkaas".

**Xarafka (B)** waxa uu leeyahay haddii aanay Guddoomiyaha ama Guddoomiye ku xigeenku ay lumiyaan xilka, si waafaqsan **Qodobkan 10aad** ee xeer-hoosaadka Golaha, Goluhu wuxuu muddo Toddoba maalmood ah ku dooranayaa Guddoomiye iyo Guddoomiye ku xigeen.

Marka xaaladaasi socoto doorashadaas cidda Guddoominaysaana ma cadda, markaa waxaan soo jeedinayaa intaasna lagu darro.

**Qodobka 15aad** wuxuu si fiican u tilmaamayaa xasaanadsa iyo maamuuska uu leeyahay Mudanuhu.

Sida xildibaanada ka dhawaajiyeen, waxa ka horimanaysa amniga Golaha **Qodobkan 29aad** wuxuu leeyahay **B,T,J** laakiin xarafka **(J)** waxa uu si toos ah uga horimanayaa

**Qodobka 15aad farqadiisa 3aad** oo odhanaysa lama baadhi karo xildhibaanada naftiisa, gaadhigiisa iyo Gurigiisa.

Waxaan ayidsanahay in amniga Goluhu uu muhiim yahay, laakiin **Qodobka 29aad xarafa (B)** waxay odhanaysaa, haddii uu mudane hub soo qaato oo uu la soo galo Golaha, waxa horkeenayaa Guddida si anshaxa loo mariyo. Arrintaas iyada lafteeda ma cadda waxaan jeclaa in halkaas la cadeeyo, oo la yidhaa xildhibaankii la maamuusay ee hub la soo gala waa in la ciqaabaa oo la ganaaxaa ilaa la gaadhsiiyaa xilka ka qaadis.

**Qodobka 46aad** ee ka hadlaaya waajibaadka Guddi hoosaadyada, waxa ka mid ah kormeerida iyo qiimaynta shaqada dawladda, waxaad ogtihiin inay tahay kormeerida iyo qimayno shaqooyinka qofka Wakiilka ahi qabanayo, haddana meelna kuma qorna marka taxayo shaqoooyinka ay qabanayaa tusaale ahaan Guddida lambar 50.

**Qodobka 60aad** waxa uu odhanayaa oo kaliyaata waa Guddida Garsoorka, caddaalad, shuruucda iyo xuquuqda Aaadamaha. Farqada 3aad oo ah Waajibaadka Guddidan waxa ka mid ah; Dabagalka dhaqan gelinta shuruucda ee Goluhu ansixiyey. Laakiin qiimayntii iyo kormeeridii ay la haayeen meel kagama qorna. Intaas ee Guddi kormeerka iyo qiimayntu meelna kagama qorna waana arrintii muujinaysay Check and balance.

**Qodobka 16aad** waxa ku qoran kal fadhiyada. Waxaan uga jeedaa laga soo bilaabo lambar 9 ilaa 16 ee Qodobkaasi, waxa uu ka sheekaynayaa uun haddii uu mudanuhu intaa maqnaado iyo mudanihii intaas maqnaada ciqaabkiisa ayuunbuu ka sheekaynayaa. Haddii ciqaab yimaado waa in Iyana ay timaadaa abaalmarino (rewards) ama dhiiri-gelin. Meeshaas waxa ka maqan ciddii wax wanaagsan samaysa wixii lagu abaalmarin lahaa oo wanaag ah.

Waxa xeerka ku wada jira iyada oo A, B, C la isticmaalay iyo iyada oo la isticmaalay B, T, J. hal qodob ayaa lagu wada isticmaalay A, B, C iyo B, T iyo J. waana page 33 ee xeer-hoosaadka.

**Qodobka 29aad** waxay ku wadab jiraan, markaa waxaan leeyahay waa in uun wax la wada isticmaalaa. Erey bixinta laguma Darrin waxa uu yahay mashruuc sharci, markaa iyadana ha lagu darro si loo fahmo.

Xagga maamuuska waxa na maamuusay Xeerka iyo Dastuurkaba, markaa dadkii ina soo doortay aynu maamuuskaa la ina maamuusay ugu shaqayno oo aynu shaqada bilawno 8 subanimo sida xildhibaan Cabdinaasir inoo sheegay. Waad mahadsan tihiin.

**Md Fu'aad Axmed Diiriye** ***(12min 59sec)*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeenada, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo saxaafada dhammaantiin waan salaamayaa.

**Qodobka 3aad farqada 8aad anixinta iyo diidmada** muujinaysa wasiirada, wasiir ku xigeenada, wasiirul dawlayaasha iyo hay'adaha ee loo cuskaday Qodobka 113 ee Dastuurka. Waxaan leeyahay ansixinta iyo diidmadu isma laha. Markaa qodobkaasi waxa uu taabanayaa hay'adaha gaar ah ee dawlada, uu ka tilmaamay Xeer-ilaalinta, Banka dhexe, Hanti Dhawrka Guud iyo Hay'dda Shaqaalaha dawlada, haddii loo baahdana kulamo kalena waa la samaynayaa.

Markaa Qodobkaa loo cuskaday ansixinta ama diida Wasiirada, ku xigeenada iyo wasiirul dawlayaasha iyo Hay'adaha Qaranka qodobkaa loo cuskaday isma laha, halkaa dib ha loo eego Insha Allaah.

**Qodobka 5aad** isna kaabis ayuu u baahan oo laga dhawaajiyey, waxaan ku raacsanahay in la xubinta ugu da'da weyn haddii musharax tahay in laga reebo waa la xusay, haddii laba ka mid ahi isku da' yihiin in Iyana la xuso oo aynu ku xusno xeer-hoosaadka waa muhiim. Si aanay u iman qaskii iyo qayladii aynu galnay maalintii dhawyd oo kale.

Haddii laba isku da' yihiin Iyana aynu xusno, oo nidhaahno ma waxaynu qaadanaa xagga magacyada Alphebet-ga, ma waxaynu eegnaa codka ay ku soo baxeen mise labadooda ma ka tagnaa oo ma qaadanaa sdiay codadka ugu kala sareeyeen.

**Qodobka 5aad** xubinta ugu da'weyn ee shirka ugu horeysa hogaaminaysa in lagu xuso Iyana inay cod lahayn ilaa loo baahdo. Marka horeysa ee la dooranayo shir-giuddoomka fadhiga ugu horeeya, inay xusno xubinta uguda' weyn in aanay cod lahayn ilaa loo baahdo.

**Qoodbka 6aad qaabka** uu u qoran yahay in isna waxoogaa la yar cadeeyo waa muhiim, qodobka 6aad **" haddii Guddoomiyaha ku xigeenka 1aad am aka 2aad uu jagada bannaanaatay iclaamiyo in uu u sharaxan yahay, waa in uu iska casilaa Xilka Guddoomiye ku xiegeenka 1aad ama guddoomiye ku xigeenka 2aad Goluhu ka aqbalayaa isla markaana waxaa Goluhu Guddoominaya mudanaha ugu da'da weyn ee aan ahayn musharraxa, habka doorashada Guddoomiyaha iyo ku xigeenadiisa waxa loo kala horaysiinayaa sida magacyadu u kala horeeyaa"**

Waxa isku daray Guddoomiye ku xigeenkii 1aad iyo 2aad, markaa waxaan soo jedinayaa in la kala yar saaro oo qaab kale loo dhigo. In labada guddoomiye ku xigeen midkood iclaamiyo inuu musharax yahay, waa marka uu meesha ka baxo Guddoomiyuhu. Haddii Guddoomuhu meesha ka baxo oo Guddoomiye ku xigeenkaa 1aad musharax yahay, Guddoomiye ku xigeenka 2aad ayaa hogaaminaaya, haddii Guddoomiye ku xigeenka 2aad musharax yahay, Guddoomiye ku xigeenla 1aad ayaa meesha hogaaminaaya.

Haddii labada Guddoomiye ku xigeenka musharaxiin noqdaa, Iyana in loo eego Qodobadii hore ee lagu dooranayey shir-guddoonka ayaa haboon ee xubinta ugu da'da weyni hogaaminaysay.

Marka shir-Guddoonka codka loo qaadayo, waxaan odhan lahaa halkii Alphapetiga loo eegi lahaa, waxaan soo jeedinayaa in xagga da’da loo eego, oo haddi ay saddex yihiin ama laba yihiin loogo, maadaama oo dastuurku xaq gooniya siiyey xagga da’da.

**Qodobka 8$^{aad}$ farqada 6$^{aad}$**, waxa ajendaha soo jeedinaya Guddoomiyaha, waxaanu ku soo jeedinayaa AF ahaan iyo qoraal ahaanba.

**Qodobka 9$^{aad}$ farqada 2$^{aad}$** Iyana waxaan soo jeedinayaa in meesha laga saaro, taana waxa cadaynaya farqada 1aad iyo 2aaad Guddoomiye ku xigeenada waxay shaqada qabanayaa marka uu guddomiuhu maqan yahay, iyo marka uu Guddoomiyuhu igmado.

**Qodobka 52$^{aad}$ farqada 6$^{aad}$,** waxay sheegaysaa Guddiyada, nuqulkii hore ee la ina siiyey waxa uu sheegayaa 11 Guddi Hoosaad, halka nuqulkii dambe uu sheegayo 12 Guddi hoosaad. Waxaan ku raacsanahay oon taageersanahay 12-kii Guddi hoosaad ee nuqulkii hore ku jiray, iyada waxaan soo jeedinayaa in lagu kabo wixii dhiman.

Isla qodobkaa laftirkiisa farqadihiisa 3aad, 4aad iyo 5aad ayaan iyagana yar eegaynaa, markaa Guddiyada ugu yaraan waxay noqon karaa shan ayaa lagu soo qoray, haddii ugu yaraan uun lagu xuso oo aan haddii dambe laga soo xidhin, Guddiyada qaar oo la xiisaynaya 20 iyo in ka yar laga dhigo, qaarkoodna in shantaa xubnood lagu daayo ayaa qurux badan. Markaa in labada dhinacba la iska taago ugu yaraana uu noqdo shan xubnood ugu badnaana uu noqdo 20 xubnood.

Waxaan soo jeedinayaa Guddiyada in ugu badnaan 20 xubnood la qaato ugu yaraana 7 xubnood la qaato. **Qodobka 52$^{aad}$ farqadiisa 4$^{aad}$** Iyana waxa u xusan ugu yaraan, markaa Guddida joogtada ahi ugu yaraan waxay noqonaysaa 13 xubnood, xagii dambe way ka furan tahay oo wixii la doono ayaa lagu darri karaa.

Waxaan soo jeedinayaa in la soo xidho oo la yidhaa ugu badnaan ugu badnaa 17 xubnood ama 19 xubnood. Laakiin haddii uu furnaado waxay noqonaysaa in cidda awooda u leh ay iyadu inta ay doonto ay ka dhigato.

**Qodobka 52$^{aad}$ farqadiisa 5$^{aad}$** Iyana waxa ku xusan muddo xileedka Guddidu ugu yaraan waxay noqonaysaa hal sanno, ugu badnaana la yidhaa intaas ayey noqonaysaa. Waxaan soo jeedinayaa ugu yaraan hal sanno ugu badnaana labo sanno.

**Qodobka 66$^{aad}$** waxa uu sheegayaa in masuuliyiinta xilalka loo igmaday loo yeedhi karo, lana weydiin karro waajibaadkooda shaqo. Dawladii inaga horaysay ama Goluhu hore waxa jirtay dhaqan ah target laga dhigto hal masuul oo bishan loo yeedho oo bisha dambe loo yeedho, si waxoogaa waxyaabo aan qurux badnayn looga samaysto meeshaa waji. Ma rabo in wajiyada la samaysano aan tilmaamo.

Masuulka loo yeedhayo marka loo yeedho ee laga guto waajibaadkiisa shaqo, wixii shaqo ah ee looga baahnaa in ugu yaraan muddo lix bilood ah la siiyo, haddii aanay jirin xaalad

loogu yidhaa oo markaa taagan. Haddii masuulkaa marka kasta loo yeedho waxaynu ka mashquulinaynaa shaqadii uu qarankan u qaban lahaa, waxaan soo jeedinayaa in wakhti la siiyo masuulka oo aan waji iyo arrimo gaar ah aan laga diyaarsan.

Nuqulkii dambe ee la soo diray waxa ku jira waxoogaa khalad ah, oo waxa ka qaman qodobka qodobkii 59aad, markaa halkaasina waxay u baahan tahay in la saxo ayaan soo jeedinayaa.

**Md. Mukhtaar Ibraahim Xaashi** ***(1min 44sec).*** Mahadsanid Guddoomiye, marka u horeysa waxaan u mahadcelinyaa Guddidii ka soo shaqaysay, ee wakhtiga siiyey waxaan si aad ugu sii mahadcelinayaa 67 mudane ee wixii Guddidu ka soo shaqaysay qaatay.

**Qodobka 6aad farqadiisa 6aad** habka doorashada magacyada waxa la yidhi B, T, J waan waafaqsanahay, haddii mudanaha sida loo dooranayo la yidhi ha loo kala horeysiiyo xarfaha, haddii saddexda magac ay noqdaan isku mid, sida Maxamed Axmed Maxamed maxaa xal ah.

Markaa qodobkaas ma waxa la eegayaa magac afraad, waxaan odhan lahaa taas sidaa ha laga dhigo ayaan odhan lahaa anigu.

**Md. Xuseen Adan Cabdi (5min 41sec)** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha iyo Shir-guddoonka, Mudanayaasha, Xoghayaha Guud iyo ku xigeenkiisa, shaqalaha iyo saxaafada. Asalaamu Calaykum Warax matulaahi Wa Barakaatu.

Sida ku cad **Qodobka 53aad farqadiisa 6aad iyo 7aad** ee dastuurka JSL. Golaha Wakiilada waxay awood u leeyihiin, inay Wasiirka iyo Madaxda dawlada ama Madaxda sare ee Qaranka, iyagan oo waajibaadkooda Gudanaaya inay wax ka waydiiyaan. Maadaama oo Dastuurku mudanayaasha xaq u siiyey, inay waajibaadkooda gutaan xaqna ay u leeyihiin hawlaha socda ee executive wax ka weydiiyaaan.

Haddii ay dhacdo in masuulka qaabka ay doonayaan wax u weydiiyaan uu kala horyimaado is hortaag, ama qaabilaad la'aan ama kala war- wareegid haddii ay dhacdo marar badan ay dhacday Golayaashii inag horeeyey.

Waxaan soo jeedin lahaa maxaa inooga meel yaano ooh ore xeer-hoosaadka ugu jirin imikana lagu soo darro, waxaan odhan lahaa maxaa inooga meel yaala oo xagaynu uga gudbi karnaa.

**Qodobka 6aad farqadiisa 6aad** ee doorashada Shir-guddoonka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka waxa la raacayaa habka alphabetical, waxaan odhan lahaa ha lagu darro sidaa loo kala horeysiiyey magacyada, Iyana ha lagu daray oo nidhaadno sida CV u soo kala horeeyo ee loo kala horkeeno. Hadalka Mudanayaashii iga horeeyey ayaa yidhi intaas ayaan ku soo gebo-gabeynayaa.

**Guddoomiyaha.** Mudanayaal waxay ahayd in aan idin kala dooran siiyo in aynu salaada soo tukano, oo 13 xidhibaan ee hadhay dooda dhiibtaan iyo in aynu salaada ka dib kala tagno oo barritoole, maadaama oo ay tahay maalintii u horeysay. Maalmaha kale waynu ka talo galaynaa doodaha dhaadheer

**Md. Yaxye Cabdilaahi Amiin** ***(5min 53sec):-*** Shir-gudoonka, Mudanyaasha iyo Shaqaalaha waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, bacda salaam, gudoomiye aad iyo aad baad ugu mahadsan tahay inaad ka jawaabto tabashadayadii shalay oo aad u soo horeysiiso kuwayaga laymanka dambe fadhiya oo isu arkayay observers oo aan midna laga siinin jaanis, waxaan u mahad-celinayaa Gudidda ka soo shaqaysay kaabista iyo wax ka badalka Xeer-hoosaadka ee wakhtigooda u hurtay si fiicana uga soo shaqeeyaya, hadana waa wax bini'aadmi qabtay wuxuun baa la tabanayaa, waxa loo baahan yahay in lagu sii daro, tii uun baynu wadnaa, insha'alah way inoo hagaagaysaa.

Qodobkayga ugu horeeya waxa weeye maamuus ka xayuubinta Madaxweynaha, Gudoomiyaha Golaha, ku-xigeenadiisa iyo xubnaha Golaha Wakiilada, Madaxweynaha **Qodobka 20aad** waxa loo cuskaday Qodobka 96aad ee Dastuurka waxaana maamuuska lagaga xayuubinayaa Absolut majority oo ah kala badh iyo hal, Gudoomiyaha iyo ku-xigeenadiisana Qodobka 10aad waxa laga qaadayaa aqlabiyad saddex meelodwo meel (2/3), mudanayashana sidoo kale oo waa saddex meelodwo meel (2/3), qodobadaasi xeer-hoosaadkii hore way ku jireen, sidaa darted, waxaan soo jeedin lahaa maadaama Madaxweynihii Absolut majority yahay, Gudoomiyayaasha iyo Mudanayashana simple majority la keeno, madaxweynaha tiisa waxba lagama badali karo oo dastuurka ayaa qeexaya waana 42.

Xeer-hoosaadku waa shaqadii ugu horeysay ee aynu qabanayno waana muraayada la inaga daawan doono, yaan la arkin inaynu sad-bursiimo sameynayno oo inagu isbadbaadinayno, cadaalad daro ayaana halka ka bilaabmaysa hadii ay hirgasho, waxa la yidhi aflifka hore kaaga xumaada al-baqru ku dhibaa, waxa dambena sidaas uun baa loo arki doonaa.

Waxa kale oo aan ka hadlayaa **Qodobka 8aad** awoodaha gudoomiyaha, waxa lagu sheegay qodobkaas 21 awoodood oo uu leeyahay Gudoomiyaha Goluhu, laakiin kumaan arag inuu soo magacaaabo sharci-yaqaano maadiya iyo kuwa shareecada diinta ahba, waxaan soo jeedinayaa in halkan lagu soo daro La-taliyayaasha sharciga iyo shareecadaba.

**Qodobka 52aad** Gudiyo badan baa la soo dhigay oo halka lagu soo qoray, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro Gudi u adeegta dadka danyarta ah, dadka ay saameyso aafadu, dadka barakacayaasha ah, dadka tabaalaysan oo masaakiinta inay dabagalaan, caawiyaan, inay dawlada iyo hay'addaha qaadhaan bixiyayaasha ah wax uga soo

gooyaan, inay tacliintooda daba socdaan, taasi waxay keenaysaa in la inoo arko inaynu danaynayno oo mudnaanta siinayno danyarteena, marka Gudiddaas ha lagu soo daro gudiyada.

Waxa kale oo aan ka hadlayaa inaynu tixgalin siino wadooyinka wadankeena ama traffic-kada aad iyo aad baynu naf iyo maalba uga waynay walina way socotaa, xaga nidaamka, xaga dareewalada, xaga diiwaanka iyo xaga dadka wada, marka intaasna laga shaqeeyo oo gudiyada la magacaabay mid ka mid ah priority looga dhigo inay ka shaqeeyeen oo badbaadiyan nafta iyo maalkaba ayaan soo jeedinayaa. Intaas ayaan kaga baxay, WSC.

**Md. Nuur Cismaan Guuleed** ***(4min 12sec):-*** Mudane Gudoomiye, ku-xigeenadiisa, Xildhibaanada, Shaqaalaha Golaha iyo Saxaafada ASC, Ilaahay baa mahad leh marka hore, mahade alle ka dib, waxaan u mahadnaqayaa Gudiddii soo sameysay xeer-hoosaadka, xeer-hoosaadkan waxa sameeyay waa bini'aadam, bini'aadam wuxuu sameynaa waa dal-daloollaa kolayba, inagan Goelwaynaha ah baan dhamaystiri karayn, sidii uun bay dal-dalooladii u jirayaan, koley meelaha wax ka dhiman yihiin markaynu ku shaqeynay iska soo baxaysaa.

**Qodobka 6aad Farqadiisa 6aad** ee sheegaysa sida loo kala horeysiinayo magacyada, magacyadu ma kala horeeyaane xarfaha kala horeeya, marka siday xarfaha magacdu ugu kala horeeyaan Af-somaliga baa loo kala horeysiinayaa, maaha Af-ingiriisi, afkeena aynu ku shaqeyno oo leenahay waa Af-somali, kaas uun baa la raacayaa.

**Qodobka 16aad Farqadiisa 12aad** oo ka hadlaysa hadii xildhibaanku maqnaado 56 maalmood sanadka gudihiisa iyagoon aan isku xig-xigin waxa laga jarayaa gunada, lacagta laga jarano waxa la siinayaa Mudanayaasha iyo shaqaalaha, anigu halka hadii ganaax yimi waa inay abaal-marina timaadaa, halkaa anigu **waxaan soo jeedin lahaa in la siiyo Mudanayaasha iyo Shaqaalaha ugu soo horeeya oo abaal-marin loo siiyo.**

Xildhibaanka maqnaada 56 maalmood sanadkii ee loo aqoonsaday nin hawshiisii gabay waxa loo raacayaa ciqaabtiisa **Qodobka 73aad Farqadiisa 3aad** ee Dastuurka, marka Qodobkaas Dastuurku kama hadlayo mana khuseeye waa in laga saaro, waxaana soo jeedinayaa in loo daayo Golewaynaha loo gudbinayaa. WSC.

**Md. Eng. Xirsi Cabdilaahi Xirsi** ***(12min 59sec):-*** Bimilaahi Raxmani Raxiim, Mahadsanid Gudoomiye, Xildhibaanadii horeeyay waan la qabaa mahad-naqa ay gudidda u mahad-naqeeyn, halka Qodobo aan badnayn baan wax yar ka taaban doonaa.

**Qodobka 3aad Farqadihiisa 14aad, 15aad iyo 20aad, Farqada 14aad** waxaan ku raacsanahay Xildhibaankii soo jeediyay in halkaas heshiisyada Xukuumada gasho ay ka tahay, laga dhigo xukuumado galayso oo aynu hore u sii ogaano intay dhicin.

**Farqada 15aad** waxa kaliya oo aan ku daryaaa maadaama oo ay qoran tahay mashruuc sharciyada ay soo gudbiyaan, Xukuumadu, Guurtidu iyo Mudanayaasha Golaha ka

tirsan in lagu daro iyo kuwa ay soo gudbiyaan **5000 oo ka mid ah Shicibku** in laga dooddo iyana madaama ay xaq u leeyihiin mashruuc sharciyadooda.

**Farqada 20aad** Iyana waxay odhanaysaa ogolaanshaha xaalada deg-dega ah, halka waxaan raacin lahaa madaama ogolaansho qoran tahay in diidmadiina la raaciyo waayo khasab maaha inaynu ogolaano oo waynu diidi karnaa.

**Qodobka 14aad Farqadiisa 2aad** oo ka hadlaysa xuquuqda ay mudanayaashu leeyihiin, isagoo sheegaya in lagala tashado wixii ku saabsan deegaanadii laga soo doortay, lana tixgaliyo ra'yigooda, farqadaasi waxay u baahan tahay in la sii cadeeyo oo tallo iyo tixgalin maxaynu uga jeednaa, ma waaxaynu uga jeednaa markay deegaankii tagno aynu ka talino la yidhaahdo waad mahadsan tihiin dabadeedna la iska sii wato, ma waxaynu uga jeednaa inay talladeenu leedahay awood intaas ka badan.

Anigu waxaan soo jeedinayaa in farqad kale la raaciyo oo la yidhaahdo **xildhibaanada laga soo doortay gobolka iyo xafiiska goluhu gobolka ku leeyahay awaooddo caynkaasa ayay ku leeyihiin gobolka,** sida horumarinta gobolka in lagala qayb-qaato golaha deegaanka, sidoo kale golaha deegaanka lala xisaabtamo oo toosin gole la yeesho, marka maadaama oo ay heer gobol ay tahay waxaan soo jeedin lahaa inay ku koobnaato xildhibaanada gobolkaas ka soo jeedda, wixii ay u baahdaana ay golewaynaha keenaan.

**Qodobka 15aad** oo ka hadlaya maamuuska Mudanayaasha, **Farqadeeda 3aad horta intaynaan ka hadlin qodobka dambe ee aynu la akhri doonon** way inoo qoran tahay Mudanaha inaan la baadhi Karin naftiisa, gurigiisa iyo gaadiidkiisa, xubnaha amaanka ama askariga kuugu yimaada inay gurigaaga baadhaan ama gaadhigaaga baadhaan kolay waxaad tusaysaa ID card-kaaga si aad isugu sheegto, ID card-ka la ina siiyayna wuxuu ku qoran yahay Ingiriisi, waynuna ognahay in badan oo ciidanka ahi ma akhriyaan luuqadaa, waxaan soo jeedinayaa ID card-ku inuu isku badalo afsomali oo halka ay representative ay ku qoran tahay ay ku qornaato xubin golaha wakiilada ah si uu askarigiiga halkaa uga akhriyo.

Hadaba, mudanaha askarigii intaas u sii dhaafo oo gurigiisa ama gaadhigiisa baadho maxaa la gudboon, ma gudoomiyuhuu soo garaacayaa? Ma taliyuhu soo garaacayaa? Maxaa sii xigaya, waxaan jeedinayaa in arrintaas xeer gaar ah ka sameyno oo sii cadayno.

**Qodobka 29aad** baadhista mduanayaasha soo galaya dhimaheenan runtii waan la qabaa in laga saarao, laakiin hadana waxaynu ka fikiraynaa si aamaankeenii loo ilaaliyo maxaa inooga yaala, halka dood baa ka furan

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac** ***(4min 27sec):-*** Bismilaahi, Mahad-sanid Mudane Gudoomiye, anagu waanu dambeyno waxaanu odhan lahay horaa loo yidhi, laakiin kolay waan iska xaal-xaalin, waxaan ku horeyn lahaa arrin aan doonayo inaan soo jeediyo oo inagu soo noqnoqota, waa sharci-dejin, inagu ma nihin sharci-dejin ee waxaynu nahay xeer-dejin,

Illaahay baa SWT Sharci-dejiye ah, waxaynu nahay xeer-dejin sameeyanaa xeerar waafaqsan sharciga iyo dastuurka oo la inoo keenaa ama abuurnaa oo ansixinaa ama diidnaa, marka waxaan jeclaan lahaa inaynu arrintaas ku baraarugsanaano Insha'alah.

Waxaan wax kaa taaban lahaa **Qodobka 7aad** ee Qaab-dhismeedka Maamul **Farqada 4aad Xarafkeeda (I)** waxay sheegaysaa si loo sugo kala madax-banaanida waaxa dawlada xoghaynta iyo shaqaalaha kale ee Golaha xuquuqdooda iyo waajibaadkooda waxa nidaaminaya lifaaq xeer-hoosaadka ah, anigu maan fahmin waxa loola jeedo, waxa qabaa waa in la cadeeyo waxa loola jeedo marka la akhrinayo si loo fahmo.

**Qodobka 8aad Farqada 12aad** typing eror baa ku jira waa in la saxaa, inta dambe waxa ka maqan "**marka uu soo galo**, waa in la saxaa farqadaasna.

**Qodobka 29aad** Amniga Golaha horaa looga hadlay Xarafka (J) waxay ka hor-imanaysaa qodob dastuuri ah, marka intaasna laga saaro sida mudanayashii hore sheegeen baan soo jeedinayaa.

**Qodobka 31aad** ee Xushmada Istaaga Golaha, kaasna waxaan jeclaan lahaa in la waafajiyo Shareecada Islaamka waayo waxaynu dad muslimiin ah, maxay shareecadu qabta in la eego ayaan jeclaan lahaa.

**Qodobka 42aad** ciwaankiisa waxa ku qoran Mooshin af-somali iyo ingiriis labada, kaasna waxaan qabaa inaynu af-somaliyayno oo had iyo jeer afsomali wax ku qorno, mooshina wixii afsomali u dhigmi lahaa inaynu helno. Waxa kale qodobada qaar ku qoran a, b, c marka taasna waxaan jeclaan lahaa in xarfaha afsomaliga la isticmaalo oo laga dhigo b, t, j, waxyaabaha farqadaha ka sii farcamanaya inaynu cadeyno oo wax u bixiyo.

**Md. Ibraahim Maxamed Jaamac** ***(9min, 27sec):-***ASC, Gudoomiyaha iyo dhamaan Xildhibaanada kale ee fadhiya Golaha iyo shaqaalahaba aad baan u salaamayaa, somalidu waxay tidhaahdaa aniga hadhay looma hadlo, hadana hadalka qaar baan ka maarmayn in la dul istaago, taasoo noqonaysa xoojin si qodobka aynu ku celcelino uu noqdo qodob aynu tixgalin siinayno, markaa runtii waxaabo badan xildhibaanadii iga hore baa dulmaray, laakiin waxaan jeclahay inaan dhowr qodob ka hadlo.

**Qodobka 10aad** xil-ka xayuubinta Gudoomiyaha iyo ku-xigeenada ama shir-gudoonka guud ahaan, oo iminka sida gudidaydii oo aan u mahadnaqayo inoo soo diyaarisay ay kaga hadleen oo noqonaysa 2/3 ama 55, gudoomiyaha iyo ku-xigeenada ay ka dhigeen garbo siman, anigu in sidaa loo dhigo uma arko, bini'aadmiguna koley khalad wuu sameeyaa, ninay habari dhashay hal ma seegi waayo, marka anigu waxaan leeyahay taas ha lagu celiyo absolute majority ama 42, taas oo iila muuqata in lala xisaabtami karo Gudoomiyihii iyo ku-xigeenada si hadii khaladaad soo noq-noqday uu ka dhaco oo aanay u noqon fardo aan waligood la gaadhi kakrin oo lala xisaabtami Karin.

Maadaama Madaxweynihii dhamaa ee Qaranka oo awooda dastuurka ugu badan haysta oo ah madaxweynaha laga soo doortay dalkoo dhan ee doorashada inta le'eg ku soo baxay hadana absolute majority lagu ridayo, inkasto ay tahay qodob dastuuriya, hadana madaxweyinihii dhamaan baa inta lagula xisaabtamayaa oo lagu ridayaa, waa wax tariikhda dhacday oo shalay Madaxweyne AHN Maxamed Ibraahim Cigaal hal cod oo gudoomiyihii qaybe AHN oo halka manta Gudoomiye C/risaaq inoo fadhiyo fadhiyay uu ku baxsaday.

Hadii Madaxeynihii halka taagan yahay maaqaamkiisii waa in idinka halka loo soo celiyo, anigoo durutaan iyo bari aad riftid iyo ha kuu fududaato oo luqunta aad ka jabisaan aanay iga ahayn, laakiinse sidaas tii madaxweynaha loo yeeli waayay in idinka la idiin yeelo aniga ilama qumana.

Magacaabida Gudoomiyuhu Magacaabayo Gudiyada, halkan waxa inoo fadhiya Shir-gudoonkii oo aanuu maamuus iyo karaamo idiin hayno, laakiin Gudoomiyihii baa magacaabaya Gudiyadii, Xildhibaanada halkan fadhiyaana koley siyaasad bay leeyihiin, xisbiyay ka soo baxeen, dareenada kala duwanaan kara, waxyaabo la isku khilaafi karaa iman kara, sidaanu shalay idiinku codaynay, iyadoo codkayagu siyaasadaysan yahay, hadalka lama daba fadhiiste halkiisa loogu tago ayaan jeclahaye, bari cunfi baa ka dhici kara, bari markaad magacaabayso gudiyada, maadaama aad gudoonkii wada fadhidaan in saddexdiinu aad cod ku soo kala baxdaan oo halka 2 raaco siday qabaan gudiddiiba loo magacaabo oo arrintaasi shuuro noqoto, halka gudoomiyaha magacaabi kara ahna ay noqoto shir-gudoonka magacaabi kara oo sidaas maamuuska u wada huwanaataan aad iminkaba shir-gudoonka aad u wada tihiin, in gudoomiyihii isaguun magacaabo, marna aad shir-gudoon wada tihiin taasi aniga ilama qurux badna.

Xarfaha la isticmaalayo waa in afsomali laga dhigaa b,t,j, inta badan tiro ayay isticmaalaynaa oo Qodobka tiro ayaynu isitcmaalaynaa, farqadaha tiro, laakiin wixii farqadaha ka sii farcama waa xuruuftii shibanaha ee b,t,j la isticmaalo.

Xildhibaanadii iga horeeyay waxyaabo badan bay ka hadleen oo qodob badan soo qaadeen, waxa aniga aad ii soo jiitay waxa weeye arrinta sharciga wada-marista (traffic), arrintaas traffics-ku waxay keentaa dhib farabadan, dhimasho joogto ah, waxaana lagu dhameeyaa hab-dhaqan ah, laakiin aduunka wax dhaqan lagu dhameeya ma jiraane wixii traffic-ga ka dhaca waxa lagu dhameeyaa maxkamadaha caadiga ah, kuwaas oo sharciga mariya, kuwaasoo nafta bini'aadmiga ah qiimeeya, kuna ciqaaba xadhig, ilaa taas la yeelano ma toosi karayno, waxayna ka bilaabmaysaa in gaadhiga safety-giisu wanaagsanaado, laba in qofka gaadhi wataa uu sito sharcigiisii oo ah liisankii uu ku wadi lahaa, inaga iyadoo safety-gii aanu wanaagsanayn marayona waddooyin jajaban, hadana dhinaca uu doono ayuu kaa marayaa, taasi waxay keenaysaa nabadgalya darro, waxay keenaysaa shilal badan iyo dhibaato.

Waxaan soo jeedinayaa in Gudiyada lagu daro gudi qaabilsan gaadiidka iyo wada-marista oo arrintaas ka shaqaysaa. WSC.

**Md. Maxamed Khadar Daahir** ***(12min 39sec).*** Bismailaahi Raxmaani raxiim. Mudane Guddoomiye waad mahadsan tahay, waxa kale oo aan salaamayaa Mudanayaasha Golaha Wakiilada, aniga oo Guddoomiye soo koobaya, Qodobada aan ka hadlayo raggii iga horeeyey aan ku taageero.

Waxaan doonayaa Qodobka aan saxo in aan horeysiiyo. Qodobka xil ka qaadista Guddoomiyaha iyo Ku xigeenadiisa. Sida uu tilmaamayo Dastuur JSL. Waxan qeexaya qodobka 96[aad], Qodobkaasi waxa ku bilaabyaa, iga raali ahaada waxaan doonayaa in aan qeexo xildhibaanada qaar oo u arkayey in Madaxweynaha Jamhuuriydda Somaliland xilka lagaga qaadi karro 42 xildhibaan, arrintaasi sidaas uguma jirto, markaa si loo fahmo waxa u dhigan yahay Qodobkani sidan: haddii Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeen dembi kala ah B) Khiyaamo Qaranka, T) Ku xadgudub dastuur.

Waxa ku soo oogi karra Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka dembiyada ku xusan farqadan ugu yaraa saddex meelood halmeel (1/3). Markaa soo oogida dembiga waxa iska leh 1/3 oo ka tirsan Golaha Wakiilada, iyaga oo eedeynta u gudbin doona Guddoomiyaha Golaha Wakiilada, Golaha wakiiladu waxa uu ku ansixin karra kala badh tirada guud ee Xubnaha Golaha Wakiilada hal dheeri (Absolutely majority). Markaa absolutely majority waxa weeyaan waa ansixinta soo oogidan ay keeneen xubnaha ah saddex meeloodoow hal meel (1/3). Sidaa ay tahay la isma gaadhin Madaxweynana ciddi xil Kama qaadin.

Halkaas markay arrintu marayso waxa ku xigaya Qodobka 2aad oo odhanaya "Golaha Wakiilada waxa uu igmanayaa Guddi aan ka badhnayn 10 xubnood oo eedeynta Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeen kaga oogta Golaha Guurtida hortiisa" markaa ogaada Golaha Guurtida ayaa la isla tagayaa oo eedeynta madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka kaga oogi doona.

Eedeyntaas waxa Golaha Wakiiladu adeegsan karaa Qareeno Madax-bannaan oo arrinta eedeynta ka caawiya.

**Qodobka 3[aad]** waxa uu odhanayaa; Waxa u fadhiisanaya Xukunka eedeyntaas Golaha Guurtida oo uu Guddoomiye ka yahay Guddoomiyaha Maxkamada sarre oo dhagaysanaya Guddi uu igmaday Golaha Wakiilada ay ku soo oogeen dacwada Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka. Iyada ooy Madaxweynuhu ama madaxweyne ku xigeenku isaguna yeelanayo qareeno gaar oo ka hor difaaca Golaha Guurtida, waxaanu Golaha Guurtidu ku anisixin karaa eedeyntaas cod saddex meeloodoow laba meelood. Waxaan filayaa Iyana cadahay arrintaasi ee ansixinta martay

ee isku rogtay in Golaha Guurtida la hor akhriyo.  Madaxweynaha waxa xilka ka qaadi karra saddex meeloodoow laba meelood.

Haddii aan u soo daadego Xeer-hoosaadkii hore, Guddoomiyihii hore waxa xilka lagaga qaadayey saddex meeloodoow laba meelood (2/3). Jaran jaradaas ayuu maray oo labada Guddoomiye ku xigeen ee isaga ka hooseeyey lamay sinayn way ka hooseeyeen, Guddoomiyaha Golaha Guurtidu isna jaran-jaradaas ayuu maray. Maadaama oo aanu waddankeenu wali tis-qaadin oo ay fudud dahay in aynu si fudud qas u galno, arrintaasi waa arrin dan inoo wada ah oo guud ahaan waddanka dan u ah oo haddii la yidhaa Madaxweynihii 42 xubnood ha laga rido, dee maalin 42 ayaa u soo fikiraya oo waddanku qas ayuu inagu galayaa.

Golaheena waxa looga fadhiyaa sidii ay aad iyo aad waddan ay wax uga bedeli lahaayeen, una horumarin lahaayeen. Sidaa daraadeed anigu waxaan sopo jeedin lahaa aragtida Shan iyo tobanka mudane (15) ee Guddida ahayd ee loo xil-saaray arrintan inay ka soo shaqayso ee halkan ku soo qoreen oo ah saddex meeloodoow laba meelood ay shir-guddoonka oo dhamaystiran xilka ka qaadi karaa, aad baan u ayidsanahay waanay ku mahadsan yihiin Guddidii arrintaas soo qabatay.

Xeer-hoosaadkeenu arrintaa wuu ka hadlayaa, waxa kale oo ka hadlaya Qodobka 39aad ilaa qodobka 56aad ee Dastuurka waxay ka hadlayaan Golaha Wakiilada. Meel uu ku sheegay ma jirto sidda xilka looga qaadayo, markaa xeer-hoosaadkeena ayaa qeexaya sidaa uu ku qoran yahayna waa ayid.

Guddoomiye markaan intaas ka tago waxaan jeclaan lahaa Walaalkay Axmed Kaare oo isna qodob soo jeediyey, markaa aad ayaan u ayid sanahay oo hore ayuun iigu qornaa waa Qodobka odhanaya, marka Golugu uu fadhiisanyo saddex meeloodoow laba meelood waa inay Golaha joogaan, waxaan aamiunsahay way adkaan doontaa, waxaan dhicin doonta in aanu Goluhu wuu isu iman karri waayo iyada oo qolaba qolada kale iska eegaysa, markaa si aanay taasi u dhicin waxa qurux badan in Absolutely majority laga dhigo.

Guddoomiye **Qodobka 11aad farqadiisa 13aad** ee Xeer-hoosaadka imika la soo bandhigay, xeer kasta oo Gudbaya oo u gudbaya Madaxweynaha waxaan jeclaan lahaa in sidii aynu u ansixinay inay u gudbeen si loo ogaado draf aynu helno, si aanu ogaano u hubino in xeerkan gudbayaa yahay xeer saxda ahaa ee aynu ansixinay.

**Qodobka 29aad farqadiisa 2aad Xarafka (J)** sidii odayaashii hore ka dhawaajiyeen baan la qabaa, sababtu tahay waxa uu ku xad-gudbayaa Qodob Dastuuri ah oo Qodobka 49aad ah, isla markaana waxa uu ka hor-imanayaa isla xeerkan aynu gacanta ku hayno, Qodobka 15aad farqadiisa 3aad isna wuu ka hor-imanayaa oo waxay isku yihiin laba iska horimanaya.

Waxa kale oo vajib ahddii aad u fiirsato **Qodobka 29aad farqadiisa 6aad** waxa uu ogoilaanayaa oo uu odhnayaa "Madaxda dawladu inay soo geli karayaan Golaha Wakiilada, iga oo aan la baadhayn, xildhibaankii qaran ee la soo doortay inuu soo galo Golihii isaga oo la soo baadhayo, taas laftitkeedu waxay inoogu muuqataa inay ceeb inagu tahay. **Waxaan soo jeedinayaa in Iyana taas meesha laga saaro.**

**Qodobka 26aad** waxa laga hadlay doodaha iyo anshax marinta Xubnaha Golaha Wakiilada, Qodobkaasi waxa uu ka soo hadlay Qodobo muhiim ah, laakiin haddii uu intaas ku ee kaan waayo maxaa ciqaab ku dhacaya qodabka kuma jirta, waxaan jelcalaan lahaa qofka ku xad gudbaa waxaa wanaasgan ee la soo qoray, waxaan soo jeedin lahaa in ciqaabtii isna xeerka la soo raaciyo.

**Qodobka 60aad** waxaan ka codsanaa Guddoomiyaha iyo Golaha in la saxo Magac Guddida Ilaalinta iyo Gabagalka Hantida Qaranka, halka hore waxay ku qoran tahay Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida qaranka, xaga dambena waxa ku qoran Guddida Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka. Markaa halkaas ha la inaga saxo.

**Ugu dembeyn Qodobka 61aad** waxa uu ka hadlayaa Guddida maaliyadda, dhaqaalaha iyo Ganacsiga waa balaadhan oo koobsanaysa dhaqaalaha waddanka. Sidaa darteed, waxaan soo jeedin lahaa in la balaadhiyo shaqada Guddidaas oo imika aad moodo waxoogaa inay xaga marka laga eegayo xaga xeer-hoosaadka waxa ku qoran aad gacmaha loo qabtay.

Waxaan soo jeedin lahaa in lagu darro kala xadeynta ganacsiga iyo Liisamada. Waxa kale oo aan soo jeedin lahaa ilaa xad in awood loo siiyo Guddida dib u eegista cabashooyinka dadweynaha ka yimaada, dabeeto ay talo soo jeedin ka sameeyaan.

Waxa kale oo aan soo jeedin lahaa in warbixin saddex biloodle ah la siiyo Golaha iyo Guud ahaanba Guddida. Waxa kale oo aan soo jeedin lahaa in Guddida awood loo siiyo kula xisaabtanka qorshayaasha horumarineed ee waddanka iyo u kuurgalka la socodka sicir-bararka iyo dabar-jarka faqriga.

Waxaan soo jeedin lahaa in lagu darro ka warqabka caafimaad qabka dhaqaale ee waddanka iyo kula xisaabtanka hay'adaha ay khusayso siyaasadaha dhaqaalaha in sidoodii loo fuliyey iyo in aan wali la fulin.

**Md. Saalax Maxamed Diiriye *(7min 6sec).*** Bismilaah, Alxamdulilah, a-sanaa'u lilaah, Asalaatu Wa salaamu calaa rasuuli lilaah Salalaahu Calayhi wasalam, Asalaamu Calaykum Warax-matulaahi Wa Barakaatu. Amaa Bacad.

Mudane Guddomiye ugu horeyn waxaan u Mahad-naqayaa Guddidii ka soo diyaarisay xeer-hoosaadan oo ay ka muuqado mudadii ay ku maqnaayee inta qodob ee uu ka kooban yahay iyo inta page ee uu ka kooban yahay. Waxa ka muuqata aqoon iyo xil-kasnimo aad iyo aad ayaan ugu Mahad-naqayaa.

Maadaama oo shalay markii la qoraayey loo qoray siday safka ugu kala horeeyaan, anna magacaygu dembeeyo oo aan meel dambe fadhiyo waxay noqotay in ay xildhibaano badani ay iga horeeyeen, wixii ii qornaa in badan oo ka mid ah way ka hadleen waan ka tagi doonaa, inta ay ka hadleen ee aan wax ka idhaana waan koobi doonaa, meeshii kabniin u baahan erey yar ayaan ku kabi doonaa.

Qodobada soo noq-noqday waxa ka mid ah **Qodobka 6aad** qaabka loo dooranayo Guddoomiyaha iyo labadiisa ku xigeen. Habka Guddoomiyaha iyo labadiisa ku xigeen waxa loo kala horeysiinayaa siday magacyadu u kala horeeyaan. Xeerka waxa ku qoran in la raacayo English Spelling, A, B iyo C luuqadeena rasmiga ahina waa Somali.haddiiba aynu taas English ah qaadano, waxa dhici karaysa iay kulmaan qof marka magaciisa English loo qoro iyo marka Soomaali loo qoro uu isku Spelling yahay, iyo qof marka English loo qoro labada magac isku eekaadaan, markaa asal ahaan ma ka soomaaliga ah ayaa la raacayaa, mise ka English ku noqday spelling noocan ah ayaa la raacayaa. Inaynu ka dheeraano wax kasta oo muran abuuri karaa oo la kala saaro waan soo jeedin lahaa.

Musharaxiintu haddii ay ka siman yihiin da'da waliba qolada qurbaha ayaa aad isku sharaxda, markaa Da'da iyo Magaca saddexaadna way ka sinaan karaa, sidaa darteed haddii ay bisha, sanadka iyo magacaba ka siman yihiin waa inay jirto si kale oo loo kala saaro, waan qori tuur, cod badnaan iyo wax kaleba jiri karaan.

**Qodbka 15aad maamuuska** iyo sharafta xildhibaanada, waxa la yidhi in aan xildhibaanka la baadhi Karin, xildhibaanka Gurigiisa lama baadhi karo ayaa in badan lagu cel-celiyey. Waxaan ku kabayaa garnaqsibaa soo bixi karra meelaha kale iyo goobaha kale ee muhiim ah, xildhibaanka yaan lagu baadhi la yidhaahdo. Haddii la yidhaa Golahaagana waa lagu baadhayaa meelaha kalena ayaan la igu baadhin, halkaa is burin ayaa kai man lahayd. Taas waxaan la qabaa xildhibaanadii hore waan in maamuusku sinaado.

**Qodobka 47aad** ee qaab-dhismeedka Guddi hoosaadyada **farqadiisa 1aad.** Guddi hoosaad kasta oo Golaha Wakiilada, waa inay yeelataa Guddoomiye iyo Guddoomiye ku xigeen ayuunbaa qoran, xoghaye laguma sheegin.

**Qodobka 48aad** ee sheegaya kulmada Guddi hoosaadyada farqadiisa 5aad, waxay qoraysaa marka Guddomiyuhu cilaamiyo kulan waa inuu xoghayaha Guddidu waxay ogeysiinaysaa xildhibaanada kale. Markaa xaga dambe Guddoomiye iyo Guddoomiye ku xigeen ayaa qoran, xaga dembana waxa soo galay xoghaye.

Mudane Guddoomiye waxaan waxaan wax ka odhanaya Qodobka 31aad ee nidaamka fadhiga Shir-guddoobka. Waxaan soo jeedinayaa in nidaamka, haybadeena iyo soo jireenkeenii hore ku jiro sidaa aad hadda u fadhidaan, oo meel gaar ah oo Guddoomiyaha la fadhiisiyaa aanay karaamo gaar ah u kordhinay. Sidaa uu hadda u fadhiyana aanu nuskaan ku ahayn, waxaana ka muuqada inaad wada tashan kartaan mar kasta, waxaana halkan ka muuqata innaad hal koox tihiin, lama kala garan karo in aad kala dudeysaan

iyo in kale. Wadamada shisheeye ee tusaalala loo soo qaato, waxaynu ka qaadanaynaa wax kasta oo hoprumar ah oo aan diinteena ka horimanaynin, laakiin kuma qasbanin waxaan macno badani ku jirin in aynu daliishano waddan hebel ayaa sidaas u dhaqma, sidaa darteed waxa ka mudan inaga wixii dhaqankeena iyo curfigeena sii adkeynaya.

Guddoomiyaha Golaha Wakiilada waxa maamuus ugu filan inuu yahay Guddoomiyaha Golaha Wakiilada, waa tiirka saddexaad ee isu dheelitirka dawlada oo ay tahay in mucaarid iyo muxaafidba lagu ixtiraamo, isaga oo hogaaminayaa mudanayaasha Golaha Wakiilada kuwii ka codeeyey iyo u codeeyeyba. Markaa waxaan qabaa in sidaa aad u fadhidaan sharaftiina iyo karaamadiinu ku jirto.

Haddii laba mooshin hal marka la keeno waxa dhici karta in hal xildhibaan labadaba ku jiro, uu kooranka u biixiyo labadaba. Iyadana waa inay cadahay ma sidaas ayuu ansax ku yahay mise waa inuu mid ahaan uun raaco.

**Md Mubaarig Muuse ismaaciil (*8min 51sec*).** Bismilaahi Raxmaani Raxmiin. Asalaatu wasalaamu calaa Rasuuli laahi Salalaahu Calayhi Wasalam. Waxaan salaamayaa Shir-guddoonka, Mudnayaasha iyo saxaafada.

Waxaan ka hadlayaa **Qodobka 10aad** ee ka hadlaya Xil ka qaadista Guuddoomiyaha. Waxaan runtii aad iyo aad ugu mahadnaqayaa Guddidii ka soo shaqaysay xeer-hoosaadka aad baan ugu mahadnaqayaa inaga oo ku raacsan siday u soo jeediyeen xeer-hoosaadka. Waxaan soo jeedinayaa oo aan ku raacsanahay inay kor u soo qaadida inta xilka laga qaadayo karro Guddoomiye ku xigeenada oo la gaadhsiiyo saddex meeloodoow laba meelood 2/3 sida Guddoomiyaha la soo gaadhsiiyo.

Waxa xildhibaanada qaarkood soo tilmaameen in Madaxweynaha xilka lagaga qaadi karo simple majority, iyaga oo aan Dastuurka soo akhrisan oo Madaxweynaha dalka marka Guurtidu u codeyso lagaga qaadi karro saddex meeloodoow laba meelood (2/3). Runtii waxa muhiin in aynu ogaano, Golahani waa Gole xeerka iyo Dastuurka sameeya, xeerka dalka lagu wado waxa dejiya Golaheena iyo Golaha Guurtida.

Golaha koowaad ee xeerarka dejiyaa waa inaga waa Golaha Wakiilada, Golaha kalena waa Golaha Guurtida oo Guddoomiyahooga waxa xilka lagaga qaadi karaa waa 2/3, iyagan oo ah Golihii labaad ee xeer dejinta. Markaa Golaheena koowaad oo ah xeer-dejinta in Xildhibaanada qaar soo jeediyaan in Guddoomiyaha xilka lagaga qaadi karo hal dheeri (Simple majority) waxaan u arkaa inay tahay arrin aan waafaqsanayn Golahi waxa uu ku dhisan yahay.

Markaa waxaan soo jeedinayaa in sidi hore lagu daayo, Guddoomiyihii hore ee Golaha Wakiilada ee 15 sanno fadhiyey waxa xilka lagaga qaadayey absolutely masjority. Golaha Guurtida sidoo kale, Madaxweynaha sidoo kale.

Waxaan soo jeedinayaa in xeerka sidii Guddidii ka soo shaqaysay ka soo dhigtay loo daayo, labada Guddoomiye ku xigeena ee ay soo jeediyeen in la dalacsiinaya la dalacsiiyo.

**Qodobka 60aad farqadiisa 4aad** ee Guddida Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga. Waxa uu dib u eegayaa siyaasada lacageed ee Xukumada Jamhuuriyadda Somaliland. **Halkaas waxaan** ku darri lahaa ereyga kana talo-bixinayaan. **Waxaan soo jeedinayaa in lagu darro talo-bixinta dib u eegis oo kaliya maahee, laakiin in ay ka talo-bixinyaan siyaasada lacagta ee Xukumada.**

Waxa farqadaas ka hoosaysay ee Guddidaasi Dhaqaalaha, maaliyadda iyo Ganacsiga inay u kuur galayaan siyaasada cashuuraha iyo dakhliga, waxaan ku dari lahaa ama ka dhigi lahaa "Jideynta, Daraasaynta Siyaasada cashuuraha iyo Dakhliga" in kalmadhaas lagu darro xeer-hoosaadka si Guddi u gudato waajibaadkeeda shaqadeeda.

**Qodobka 60aad** waxaan ku soo darri lahaa maadaama uu farqada 7aad ku dhammaanayo, waxaan soo jeedin lahaa in lagu darro farqad, kaas oo tilmaamaysa sida dastuurkeena ku qoran Qodobka 54aad iyo 55aad ee Miisaaniyadu waxa uu ka hadlayaa in lagu sameeyo daraasad xisaab sannadeedkii hore ee maaliyadda, qodobkaasi inooguma jiro xeer-hoosaadka, markaa runtii waxaan odhan lahaa ha lagu soo darro farqad 8aad, waxaanay tilmaamaysaa in daraasad ka baaraan degaya xisaab xidhkii sanad maaliyadeedkii dhammaaday oo wasaarada Maaliyaddu soo gudbiso muddo aan ka badnayn lix bilood oo ka bilaabmata sanad dhammaadka sanad maaliyadeedka.

**Qodobka 39aad** farqada 1aad xeerarka Madaxweynuhu soo celiyo. "Madaxweynuhu. Isaga oo adeegsanaya awdoodda distuurku siiyey eek u xusan Qodobka 7aad ee farqadiisa 5aad wuxuu Golaha ku soo celin karaa xeerarka ay ansixiyeen golayaasha xeer-dejintu, haddii uu u arko inuu qodob ama qodobo distoorka ka soo horjeedaa ku jiraa:

**Qododka 77aad farqadiisa 5aad** ee dastuurka kuma laha wax diidmo ah, laakiin waxa uu ku leeyahay soo jeedin. Sida dastuurku tibaaxayo Golaha Wakiiladu waa xeer dejinta Koowaad, halka Golaha Guurtiduna uu yahay xeer-dejinta 2aad.

Waxaan soo jeedin lahaa halka ay ku qoran tahay Madaxweynuhu wuxuu soo celinayaa xeerarka, waa fiican in aynu isla garan xeerarka Madaxweynuhu soo celin karro, sida xeerar nabadgelyada ama difaaca waddanka.

**Qodobka 39aad farqada 2aad** waxa ku qoran "Haddii xeer golayaashu ku ansixiyeen aqlabiyad gaadhsaysa ama ka badan saddex meeloodoow laba meel (2/3), Madaxweynuhu xeerkaas ma soo celin karo".

Waxaan odhan lahaa ha laga dhigo in aynu ku ansixino 1/3, waayo waxa jira xeerar laga soo shaqeeyey oo laga soo talo-bixiyey, waxaaba laga yaabaa in aynaan helin xildhibaano

badan oo gaadha 2/3 oo kooramku inoo buuxsami waayo. Waxaan soo jeedinayaa in aynu hal dheeri ku ansixino.

Waxaan soo jeedinayaa in lagu soo darro qaybta faahinta maadaaam xeerarka ansixino uu madaxweyhunu dhaqangelinayo, waxaan ku darri lahaa waa inay xukumadu faafisaa, maadaama oo faahintiisu aanay inaga inoogu qornayn.

**Qodobka 16aad** ee ku saabsanaa wakhtiga ama saacadaha uu shaqaynayo Goluhu, xildhibaanada qaar waxay soo jeediyeen in shaqada la bilaabo 7:30 ilaa 12:00 duhurnimo. Waxa farqada 4aad qoran "Goluhu haddii aanu dhamaysan wakhtigii loogu talo-galay ee 12 duhurnimo, waxa ku qoran inu Goluhu shaqada sii wadan karo ilaa 3 galabnimo. Markaa uma malaynayo in halkaasi wax kodhin u baahan tahay.

Mudnayaasha waxaan u sheegayaa in saacadahan go'an ee aynu meesha fadhinaa, waxa jira saacado kale oo xildhibaanku wakhtigooda gaarka ah ay akhristaan xeerarka oo ka soo shaqeeyaan. Saacadahan aynu fadhinaa waa saacado kooban oo aynu doodno oo aynu fikirkeena ka dhiibano halkan. Waxaan leeyahay taas sideeda ha loo daayo.

**Md. Maxamed Saalax Cabdi** ***(7min 27sec).*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Alxamdulilaahi Rabil caalamiin Wasalaatu Wa salaamu Calaa Arshafil mursaliin sayidanaa Muxamed Salalaahu Calayhi Wasalam. Asalaamu Calaykum Warax ma Tulaahi Wa Barakaatu.

Guddoomiyuhu wuu mahadsan yahay, waxaan u mahadnaqayaa Guddidii ka soo shaqaysay xeerkan, ka dib waxaan ku bilaabayaa **Qodobka 5aad oo badan laga hadlay oo farqadiisa 1aad loo daayo sida dastuurka ku qoran oo nuxurkeedu yahay inuu Goluhu fadhiisan karo maalinta 45aad si iskiisa loogu daro oon ku seconmment-garaynayo xildhibaanada Maxamed khadar Daahir iyo Axmed Maxamed maxamuud (Kaare), in 42 ku fadhiisan karaa**. **Farqadaha 3aad iyo 4aad** ee isla **Qodobka 5aad** in laga saaro in marka 45 casho dhammaadaan uu Guddoomiyaha Golaha Guurtidu igu yeedhi karo, **waxaan soo jeedinayaa in lagu bedelo in Guddoomiyaha Maxkamada sare isugu yeedhi karo marka ay dhammaato mudada 45 casho ahi oo ay ku fadhiisan karaa 42 mudane.**

**Qodobka 5aad farqada 8aad** ee isaguna tilmaamaya habka shir-goonku isugu xigayon ama loo daadihinayo, waxa la sheegay qofka ugu da'da weyn iyo ka labaad haddii ay u sharaxan yihiin Guddoomiyaha in aanay xilkaa qaban. Halkaas waa in lagu daraa haddii ka 3aad ama 4aad ee ugu da'da weyn ay sharaxan yihiin halka kuma xusna. Waa in la raaciyaa habka ay isugu xig xigaa da' ahaan.

**Qodobka 8aad** oo ka hadlaya awooda Guddomiyaha Golaha Wakiilada **farqada 19aad** waxay ka hadlaysaa oo odhanaysaa "Waxa uu magacaabayaa iskuna bedelayaa Xubnaha Guddiyada Golaha" waxaan **soo jeedinayaa in lagu daro "ka dib marka uu la tashado xubnaha shir-Guddoonka".**

Isla qodobka 8aad kama muuqata maamulka dhaqalaha ee iyo Budget Golaha inuu Guddoomiyuhu maamulo. **Waxaan soo jeedinayaa in kasta oo ay ka mid tahay, haddana waxaa soo jeedinayaa in qodobkaas lagu daro awoodaha Guddoomiyaha.**

**Qodobka 10aad farqadihiisa 6aad iyo 7aad mooshinada ka keenista Guddoomiyaha iyo Ku xigeendiisa ku sabsan iyadan habka loo guddoominayo kulankaasi mooshinka laga keenay Guddoomiyaha iyo ku xigeenadiisa mooshin, waxa Guddoominaya Guddoomiye ku xigeenkiisa 1aad am aka 2aad haddii aanay ku jirin xubnaha mooshinka keenay.**

Kuma jirto haddii ninka ugu da'da weyn ee guddoominayaa uu mooshinka, markaa Xildhibaan Bashiir ayaa sheegay oo seconmment-garaynayaa. Isaguna haddii uu ku jiro mooshinka xubinta ugu da'da weynu in aanu guddoomin ayaan odhan lahaa ha lagu daro.

**Qodobka 13aad farqada 3aad xarafka (c)** in ay qabtaan kulamo guud ay bulshada kula socodsiinayaa arrimaha Golaha horyaala si ay ugala tashadaan iyo guud ahaan xaalada waddanku halka ay marayso. Ha lagu darro iyo arrimaha Golaha horyaal. Waxaan ku dari lahaa haddii aanay keenay waxa looga waramayaa ee Golaha horyaala khatar amni ama xasilooni darro siyaasadeed.

Maah-maaha ayaa tidhaa nin weyn iyo naag naago ka umulisay midna siday wax u ogyihiin ma sheegaan, waxa jira arrimo aan loo baahn nahayn inay Golaha dhaafaan ama fadhiyo xidhan oo Golaha ah kaga hadli karno oo aanay ahayn in inaga ina dhaafaan.

**Qodobka 15aad farqadiisa 5aad** oo isaga hore loogab hadlay, laakiin aan seconmmment ku xoojinayaa oo xasaanada ka qaadka xildhibaanku ay noqoto 42 xubnoon, halka xeerka uga taalo saddeex meeloodoow laba meel (2/3).

**Qodobka 54aad** oo ka hadlaya awoodaha Guddiyada, kama muuqadaa Guddida Arrimaha Gudaha iyo Guddida joogtada ah, waxaan soo jeedinayaa kuma jirto ee ha loogu daro u yeedhista madaxda dawlada markay shaqo uga baahdaan.

**Md Khadar Cali Xasan** ***(33min 27sec).*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye iyo mudanayaal ku Guddoomiye ku xigeeno iyo xildhibaanada sharafta badan aad baad u mahadsan tihiin.

Mudane guddoomiye hadalkii wuu naga raagay, laakiin waan u samirnay waxaan jeclaa in aad ugu horeysiiso Xildhibaan Ibraahim oo kale.

**Qodobka 2aad tilmaamo badan oo uu tilmaamayey ayaa laga saaray, waxaan soo jeedinayaa tilmaahaha guud ee Golaha in dib loogu soo celiyo. Waxaan la qabaa garyaqaan Xildhibaan Bile oo shalay soo jeediyey.**

Guddoomiye Golaheenan had iyo jeer waxaan jecelahay inuu u bato curin iyo wax soo kordhin. Waxaan soo jeedin lahaa in xafiis hoosaad kumeel gaadh ah oo Goluhu leeyahay Gobolka Togdheer la inooga sameeyo. Xarunta Guud ee Golaha Wakiiladu waa Caasimada, laakiin arrumo kale oo Gobolada ah waynu samaynsan karnaa.

**Qodobka 3aad farqadiisa 8aad** waxa tilmaamaysaa ansixinta amar diida Wasiirada, wasiir ku xigeenada, Madaxda Hay'adaha sida qodobka 13aad jideeyey ama madaxda kale ee qaranka ee dastuurka ama xeerar kale jideeyeen.

**Waxaan soo jeedinayaa in xeer-hoosaadka lagu daro masuuliyiinta u baahan in la ansixiyo, waayo garan karo madaxda dawlada ee u baahan in la ansixiyo. Markaa waxaan soo jeedinayaa in lagu daro.**

**Qodobka 14aad** waxa ku cad ansixinta heshiisyada Xukumadu gasho. Waxaan soo jeedinayaa heshiisyada Xukumadu galayso ee arrimaha dibedda, ee arrimaha Siyaasada, dhaqaalaha iyo arrimaha nabadgelyada.

Mudane Guddoomiye iyo mudnayaal haddii xukumadu gasho heshiis ay u bixiso heshiis dhaqan, laakiin ah dhaqan ahaan heshiis siyaasadeed ama heshiis dhaqaale ama heshiis nabadgelyo, heshiis ay ciwaanka ka bedeshay oo la ina horkeeni waayo maaxaa dhacaya. Waxaan soo jeedinayaa in dastuurka loo eego nagana dhigo halkaas inay Golahani awood u yeeshaan inuu ansixiyo.

**Qodobka 14aad farqadiisa 17aad** Golaha wakiiladu waxa uu xukumada u gudbinayaa talooyinka iyo tilmaamo ku saabsan hogaaminta siyaasada guud ee dalka. Su'aashu waxay tahay haddii aynu talooyin gudbino oo Golaheenan sharafta badani talo soo saaro, meel hoose la dhigo (desk bin) ooh aba yaraatee aan la tixgelin maxaa ka dhalanaya. Waxaan leeyahay Golahani ha qaato waajibaad ka dhalan kara haddii la diido, talooyinka Golaha in la qaato maxaa ka dhalan kara?

**Qodobka 53aad farqada 7aad** Guddiyadu waxay awood u leeyihiin in ay u yeedhaa Wasiirada iyo Madaxda dawladd, waajibkeenana ka gudano oo haddii masuulka loo yeedhay haddii su'aalihii aynu waydiinay ku dhaco ee shaqada (performance) xagaynu uga gudbaynaa se mar labaad ma u yeedhi karaan oo ma la xisaabtami karnaa.

**Qodobka 7aad** qaab-dhismeedka maamul ee Golaha. Mudane Guddoomiye iyo Mudnayaal aniga oo ixtiraamaya soo jeedimihiinii badnaa ee aad soo jeediseen, waxaan soo jeedin lahaa in qaab-dhismeedka Goluhu uu yeesho Jaantus la wada arki karo (Structure) oo sawir ahaan uga muuqda xeer-hoosaadka. Qaabdhismeed ma waxaynu u dhignaa in shir-guddoonku u sareeyo, oo qaybta maamulku ku xigo, oo taliyaasha ama waaxda hadal qoraalku ku xigto ayaan u dhignaa. Mise sida NGO-yada ayaan ka dhignaa GA, Shir-guddoonka, Taliyaasha iyo waaxyaha.

**Qodobka 8aad awoodaha Guddoomiyaha.** Waxaan soo jeedinayaa in Guddoomiyuhu yeesho certeria maamuleed uu ku xisaabtamo oo ah habka ay u kala horeynayaan mudanayaasha hadlayaa, iyada inamada qoraalku ay mar kasta xaga hore ka bilaabaan, taasna aad ka la haato hab maamul habka uu u kala xulayo iyo sida uu u maamulayo.

**Qodobka 9aad** xil-waayida Guddoomiyaha iyo ku xigeenada. Waxaan soo jeedinayaa in farqada 2aad ee xil ka qaadis loo daayo 2/3, waayo waxaynu ogahayn markii maayiradii dalka xil ka qaadistooda laga dhigay hal dheeri in ay shaqayn kari waayeen.

**Qodobka 13aad farqadiisa 2aad** waxay u dhigan tahay "iyadoo la eegaayo waajibaadka ku cad farqada 1aad ee qodobkan, mudane kasta oo ka mid ah Golaha Wakiilada, xil gaar ah ayaa ka saaran matalaada deegaanka codbixiyayaasha laga soo doortay.

Waa shaqada aan ku baraarujinayo Shir-guddoonka iyo Mudnayaasha, shaqada uu Golahani hayaa waa shaqo matalaadeed oo Golaha kan xayndaabkiisa ka baxsan fadhiyadiisa. Taasna waa in maanka lagu hayo.

**Farqada 3aad** waxay u qoran tahay "xiliyada fasaxa Golaha, Xildhibaanada waxa looga baahan yahay arrimaha soo socda" markaa halkan optional ayaa laga dhigay oo xildhibaanka ayaa ikhtiyaar la siiyey, laakiin waxaan soo jeedinayaa in la yidhaa wuxu tagayaa oo amar laga dhigo, waayo su'aalaha ugu badan ee dadku na waydiinayeen waxay ahayd ma soo noqon doontaa mise waad maqnaan doontaan.

Waxaan soo jeedinayaa oo aan taageersanahay farqada 3aad ee Qodobkan xarafka (B) oo odhanaya "kharashka mudanaayaashu ay ku booqanayaan sdeegaandii laga soo doortay waxa lagu qoondeynayaa miisaanidaa Golaha, iyadoo lagu qaabaynayo wadar ahaan" waan taageersanahay qodobkaas, waayo xildhibaanu marka uu deegaankiisa tagaayo waxa uu u baahan kkarash maadaama oo shiri iyo kulamo la tashi uu u qabanayo dadkii iyo deegaanadii laga soo doortay.Waxaan taageersanahay in miisaaniyada loo qoobdeeyo haba koobnaatee. Farqada 4aad waxay odhanaysaa "Shan iyo toban xildhibaan (15) wax ka badan fasax lagama siin karo kal-fadhigiiba"

Waxaan mudane Guddoomiye soo jeedinayaa in aam ka la haato qaab xulasho (certeria management). Haddii aan kuu imaado aniga oo fasax kaa doonaya, oo aad u sheegtay in aad 15 xildhibaan aad fasax siisay, waxa haboon si aanu kaaga xumaan waa in aad ka yeelataa xulasho aamuleed, ama in aad xeerka u jabiso.

**Waxaan mudane Guddoomiye soo jeedinayaa in mudanaha laga talo-geliyo in talo laga siiyo ka talo bixinta deegaankii xildhibaanka laga soo doortay sida ku cad farqada 2aad ee qodobka 14aad.**

**Qodobka 15aad maamuuska iyo xasaanada Mudanayaasha Golaha**. Farqadiisa 5aad waxay u qoran tahay sidan "Markii xildhibaan laga qaadayo xasaanadda waa in ay ogolaadaan saddex meeloodoow laba meelood 2/3 tirada guud ee xubnaha Golaha,

iyadoo laga reebaayo kuraasta bannaanaanshahooda la baahiyey". Mudnayaasha qaar waxay soo jeediyeen laga dhigay absolutely majority, oo loo daayo 2/3. Waxaan soo jeedinayaa si aanu mudanuhu kalsoonidu u xooganaato aan loogu hanjabin.

**Qodobka 16aad** ka xaadirida fadhiyad Golaha. Mudane Guddoomiye waxaan halkan ku sheegayaa shqada mudanuhu maxay tahay Marka la leeyahay

Shaqada mudanaha la soo doortay waa laba oo kala ah matalaad iyo xeer-dejin. Mudane Guddoomiye waxaan halkan ku sheegayaa shaqada mudanuhu maxay tahay Marka la leeyahay xeer-dejin inuu xeerka ka soo curin karo guddida dhexdeeda. Fadhi weynahani muxuu qabanayaa, fadhi weynahani waxa uu dhagaysanayaa doodihi xeerkaa la soo unkay, sidaa daraadeed mudanayaasha halkaa yara khalad fahmay ee u qaatay in shaqada Goluhu tahay saddexda saacadood ee halkan oo qudha, waxaan u sheegayaa in aanay halkaas khalad fahmin. In shaqada Goluhu hayaan ay tahay shaqada ay Guddiyadu hayaan oo wax Guddida line meel la ahi shaqo ayey xanaf tireen halkan ka la keeno, markaa saddex saacadood ee aynu halkan joognaa waa dood laga doodayo uun sharcigaa ama shaqadaa Guddi hoosaadku soo qabatay oo la qabyo tirayo.

Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in wakhtiyada shaqadu sideedaa ahaato, mudane Guddoomiye waxa jirta shaqo kale oo ah matalaad, markaa shaqada matalaadi maxay tahay. Dadkii ku soo doortay waxay doonayaa in aad kala shaqayso shaqo ka baxsan Golaha oo marka dhib haysta ama hawl haysata, markaa waa matalaadin aad xildhibaanka u ahayd, waxaanay u baahan tahay Iyana wakhti.

Waxa laga yaabaa in Xildhibaanadu inay shaqeeyaa 18 saacadood in ka badan oo waxa laga yaabaa 12 habeenimo xildhibaanku shaqaynayo. Markaa hawsha matalaada iyo doorka mataladaa in aynu Xeer-hoosaadka ku cadaynaa waa mid aan soo jeedinayo.

**Qodobka 17aad** Labiska iyo haybada Mudanaha. Mudane Guddoomiye halkan waxa loo baahan yahay inuu halkan ku cadaato dharka Diinta islaamku ku cadaato, maxaa loola jeedaa. Labaiskaan diinta islaamka waafqasanayni waa kee? Waa noocee, waa waa qaabkee. In halkaas la cadeeyo ayaa muhiim ah, oo la garto labiskaa diinta Islaamka waafaqsanayn.

**Qodobka 19aad farqada 4aad,** waxa uu sheegayaa hadal jeedinta ka dib in mudanayaashu su'aalo waydiinayaa. Mararka qaarkood waxa dhacda in shir-guddoonku uu mudanayaasha ka hor istaago in su'aalm la waydiiyo madaxweynaha. Haddii Guddoomiyuhu mudanaha u diido inuu Madaxweynaha su'aal waydiiyo, maxaa dhalan karaa, waa qodob isna u baahan in aynu maanka ku hayno.

**Qodobka 26aad** habka dooda iyo anshaxa Mudanaha. Waxa ku jira type error. Mudanaha raba inuu hadal jeediyo wuxuu raacayaa talaabooyinka soo socda: a) marka

Guddoomiyaha hadalka siiyo mudane, waxa uu ku bilaabayaa mahadsanid Mudane Guddoomiye, halkaas waxbaa ka maqan ha la dhagaystiro.

**Qodobka 19aad farqada 2aad** waxay ka hadlaysaa Amniga Golaha Wakiilada, xarafka (J) Mudane kasta marinada mudanayaasha ee fadhiga, iyada oo lagu baadhayo qalab casri ah, markaa mudanayaal badan ayaa isku raacay in aan mudanaha la baadhi Karin, laakiin halkaa tafsiirkansaarani waxa uu yahay in lagu baadho qalab casri ah. Macnaheedu waxa weeye in aan mudanaha gacmaha loola tagin, laakiin shandadiisa iyo gaadhigiisa qalab casri ha lagu baadho, taas oo lagu ogaan karo inuu sito qalab ama aalad hub ah. Qodobkaas la iskama indho tiro karo, Golahii inaga horeeyey waxa dhacday in lala soo galay hub. Xubnaha qaar waxay soo jeediyeen in anshax ciqaabeedka xooga la saaro, laakiin haddii Guddida anshaxa taageerayaashaydu mudanauhu ku badan yihiin oo Gudddida anshaxa talaabo ka qaadi waydo uu halis galiyo amaanka mudanayaasha, sidaa daraadeed waxaan odhan lahaa qalaba casri ha lagu baadho, laakiin markuu Golaha ka baxsan yahay waa mamnuuc in la baadhaa.

**Qodobka 32aad** fadhiyada Golaha. Waxaan taageersanahay in sidaa ay imika shir-guddoonku u fadhiyaan ilaa aynu jaran-jarooyin kale aynu ka gudbayno.

**Qodobka 33aad** soo badhista mashruuc sharci. Mudane Guddoomiye iyo mudanayaal dastuurka JSL haddii aad aragto aasaaskiisa ama page koowaad, waxa uu dhigayaa in aasaaska dalkani uu dhigayo maamul daadejin wax la yidhaa, oo ay ku jirta mabaa'diida guud ee dastuurka, sidaa daraadeed mar kasta oo hay'adaha dawlada ee jiraa shacbiga u dhawaadaan waa mar kasta oo dadku dareemaan kalsooni farabadan.

Sidaa awgeed **Qodobka 33aad farqadiisa 3aad** waxaan soo jeedinayaa in muwaadiniinta soo jeedin kara mashruuc sharci in laga soo dejiyo 5000 oo qof oo loo soo dejiyo 2500 ilaa 3000 oo qof. Waxa jira xeerar badan oo dadku caqabado badan ka dareemayaan, waxaan soo jeedinayaa in dadka loo dhib yareeyo oo dadka lagu soo dhaweeyo 3000 oo qof ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 35aad** ee Guddiyada. Waxaan halka ka sheegayaa in wakhtiga Guddiyadu u baahan yihiin uu yahay wakhti farabadan. **Waxaan adkaynayaa in mudanayaashu 7:30 yimaadaan oo ilaa 7:30 ilaa 8:30 heer Guddi loo shaqeeyo, fadhigana la shaqeeyo ilaa 12:00Pm, ka dib salaada marka laga soo baxan xafiisyada Guddida lagu noqdo oo la shaqeeyo.**

**Qodobka 47aad qaab-dhismeedka Guddid hoosaadka. Waxaan soo jeedinayaa Qodobkaasi waa 5 farqadood in lagu kordhiyo farqada 6aad "Guddi hoosaadku waxay yeelanaysaa qorshe hawleed, waxay qorshahooda u gudbinaysaa Guddoomiyaha si uu ula socdo qorshahooda"**

Mudane Guddoomiye haddii aynu leenahay Kaw iyo toban (11) Guddi, waa in aad hubisaa in aanay shaqooyinkoodu isku dhicin oo aad qorshe hawleedkooda hayso si

aanay isugu dhicin, qodob ayaa sheegayaa in aanay wiigii 4 jeer kulmayaan. Waxa laga yaabaa inay xeer la soo abuurayaan Matalan Wasaarada Arrimaha dibedda waan in aad la socotaa Guddoomiye. Waana in aad samaysataa aalad casi ah oo kuu sahli kartaa in aad la socoto Guddidaas.

**Qodobka 52aad** Golaha wakiiladu isaga oo Guddanaya xilkiisa iyo waajibaadkiisa ku xusan dastuuriga iyo xeer-hoosaadka waxa uu yeelanayaa Guddi hoosaadyo. Mudane Guddoomiye waxaan soo jeedinayaa Q**odobkaas farqadiisa 2aad** wuxuu dhigayaa Guddida Gabagalka iyo Ilaalinta Hantida qaranka. Mudane Guddoomiye waxa la lunsadaa hanti qudha maaha, waxa kale oo la lunsadaa maamulka hay'adeed.

Mudane Guddoomiye iyo Midanayaal waxaad ogaataan in aan lacag la lunsan Karin ilaa maamulku lumo. Nidaamka oo luma ayey lacagtu luntaa sidaa awgeed, **waxaan soo jeedin lahaa in laga dhigo Guddidaas "Guddida maamul-wanaaga iyo Dabagalka Hantida Qaranka".** Maamul xumada ayaa keeni karta inuu qofku leexsan karro ama lunsan karo Hantida umadda.

**Qodobka 57aad** waxa uu sheegayaa inay jirto Guddida siyasaasada, Arrimaha dibbedda, iskaashiga Caalamiga ah, qorsheynta iyo maalgashiga.

**Waxaan soo jeedin lahaa in lagu darro Guddida siyaasada, ururada iyo kobcinta dimuquraadiyada, oo ay noqota cidda u xil saarsan Golaheena kobcinta maamul-wanaagsa haday Ururo yihiin ama haday xisbyo yihiin.**

Waxa jirta Guddida Ururada iyo Xisbiyada, waxa loo baahan yahay cid la shaqaysa oo halkan ka dhisan.

**Waxaan taageerayaa soo jeedintii Xildhibaan Cumar Jaamac Faarax ee ahayd in Code of condect lagu lifaaqayo xeer-hoosaadka oo markaa mudanayaashu ay saxeexaan ooh ab dhaqanka mudanaha markaa laga saxeexayo.**

Waxaan soo jeedinayaa oo aan adkaynayaa in soo jeedintii mudanayaasha ee ahayd soo jeedinta in luuqada Goluhu tahay Af-soomaali. Mudane Guddoomiye ID cards waxa ku qoran Englisha, waxaan soo jeedinaynaa in Af-soomaali laga dhigo oo siyaasada xeer-hoosaadka la raaco. Waxa kale oo aan taageerayaa soo jeedintii Xoghaya Guud ee ahayd in aan wax qalab ah lala soo gelin Golaha sida shaaha, waayo shaahu laftiisu waa hub.

Waxaan ka baxayaa mawduuca sidii xildhibaanadii iga horeeyey ay sameeyaa, sidaa daraadeed waxa xeer-hoosaadku ina farayaa in aynu ilaalino, kor joogtayno, hubino xeerarka dalka u yaala.

Mudane Guddoomiye nidaamyada dalka ka jira ama Institutinadu dhawr qaybood ayey u qayb samaan waxa jira dawladu la yidhaa responsive Government ama responsive institution oo dhaga nugul oo u jawaaba dadka.

Mudane Guddoomiye indhaha lagama qarsan karo in 10 qof dadkeena ka mid ahi walaac ay soo abuuraan oo walaac kiciyaan. Dhagaha kama fureysan karno waa in ay inaga helaa jawaab ay mudan yihiin, sidaa awgeed waxa maalmaha baraha bulshada ka socotay dood laba dhinac ah oo difaac iyo weerar ah oo ku saabsanayd Jaamacad la yidhaahdo Barwaaqo University.

Mudane Guddoomiye inaga oo Jaamacadaas xuquuqdeena ilaalinayna, ilaalinaynana dhaartii aynu marnay shacabiga hortiisa eegaynana dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland **Qodobkiisa 1aad** uu yahay ilaalinta shareecada islaamka eegaynana oo niyadda ku hayna xeerka waxbarshada Xeer Lr.77 **qodobkiisa 5aad farqadahiisa 1aad, 2aad, 8aad, 9aad, 12aad, 15aad iyo 16aad** ay tilmaamayaan in aasaaska waxbarasho kasta la ilaaliyo inay diinta islaamka ku qotonto iyo **Qodobka 6aad** ee Xeerka waxbarshada **farqadihiisa 1aad, 7aad, 9aad 15aad** ay tilmaamayaan in aan la ogalayn in dalkan Manhajka waxbarshada ee dalka lagu dhex qariyo wax kale.

Ilaa inta laga gaadhayo **Qodobada 10aad, 11aad, 13aad, 21aad, 32aad, 44aad, 92aad, 93aad iyo 94aad** intuba waxay tilmaamayaa oo qeexayaan circulamka la dhigayo, macalinka dhigaya shuruucdiida, institution qaabka uu noqonayo. Inaga oo aan ku xad gudbayn institution-kaa jira haybadiisa iyo karaamadiisa, inaga oo aan ka fikirayn xuquuqda dadka walaaca abuuraya, ianag oo og in wasaarada Diinta iyo awqaafto shalay soo saartay warsaxaafadeed ay ku sheegtay inay arrintaas baadhitaan ku samaynayso.

Inaga oo og in Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland uu booqday iskuulkaas oo uu ka markhaati kacay inay Jaamacadaasi ay wanaagsan tahay, inaga oo maanka ku hayna in Wasaarada Diinta iyo Awqaaftu aanay burin Karin ama shacbigu aanay aaminsanayn in ay burinayaan qoraalama hadal ka soo baxay Madaxweynaha. Inaga oo og in aynu shacbiga matalayno, inaga oo og in aynu ilaalinayo xuquuqda muwadiniinta iyo Institution-ka intaba.

Waxaan soo jeedinayaa Mudane Guddoomiye adiga oo raacaya xeer-hosaadkeena Guddid gaar ah oo soo baadha xaqiiqdana shacbiga u soo bandhigta, waayo waxaynu ku fadhinaa kalsoonida shacbigeena fariinta aynu soo saarnana way ku qancayaan oo soo saarayna inay Jaamacadaasi sax tahay ama manhajkeeda wax ku qarsoon yihiin, inaga oo kaashanayna khuburo manhajka ku takhasustay. Aad iyo aad ayaan idiin salaamayaa Aslaamu Calaykum warax Ma tulaahi Wa Barakaatu.

**Md. Axmed-yaasiin Maxamed Xassan (13min 47sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, waan Salaamayaa Mudanayaasha Golaha, walaalaha shaqaalaha sharfan.waxaan salaamayaa Saxaafada sharfan laakiin hadalka mudanayaasha wax ku darta si warkooda loo iibsado ama waxka yara dhinta. Ugu horayn waxaan u mahadnaqayaa Guddidii inoo fududaysay xeer-hoosaadka.

**Qodobka 7aad,** Waxaa ku xusan Xafiisyo, sida Xafiiska Xisaab-xidhka iyo Xafiiska Miisaaniyada, waxaan isleeyahay xafiiska xisaab-xidhka waxaan qabaa in hoos loo dhigay Goleheenan oo ah Golaha la xisaabtanka, markaa waxaan leeyahay hadii uu halkaa hoose ee uu hada yaalo lagu daayo golahan far ayaa ku godnaanaysa, markaa waxaan soo jeedinayaa in sida xog-hayaha guud loo soo magacaabo isna loo soo magacaabo xafiiska xisaab-xidhka oo guddida maaliyaduna talo uga bixiso. Si uu xisaab-xidhada warbixin inooga siiyo.

Waxaan aad u sii adkaynayaa in la helo xisaabiye Guud oo khibrad leh ayaan soo jeedinayaa oo ay soo xulaan guddida dhaqaaluhu.

**Qodobka 10aad** waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa xasaanad ka qaadida sidiisaa lagu daayo, iyadoo shaqo badan la inaga sugayo, hadii kale Golahani waxa uu golahani gali doonaa ila meerayso.

**Qodobka 14aad farqadiisa 3aad** Xuquuqda mushahar iyo gunno ee Gudoomiyaha, ku xigeenada iyo xildhibaanadu waxay ka bilaabanayaan maalinta Maxakamada sare ku dhawaaqdo. *Waxaan leeyahay mudanayaasha qaar ayaa maqnaan kara,* markaa xubnahaa aan la dhaarin ama xubintaa aan wali shaqo laga hayn, hadii sidaa la yidhaa waxay noqonaysaa isaga oo aan shaqo qaba ayuu mushahar qaadanayaa, markaa waxaan soo jeedinayaa in la yidhaa mudanayaasha mushar koodu waxa uu bilaabmayaa maalinta maxkamada sare dhaariso oo mudanuhu goob joog ahaado.

**Qodobka 16aad** xaadiriska ama daahfurka Golaha, waxaan aad iyo aad u taageersanahay Walaalkay Abdinaasir oo ku cel-celiyay waa in aynu soo kalahno oo aynu shaqadeena si fiican u qabsano, oo aynu noqono meel lagu daydo.

Sidoo kale waxaan inoogu qoran xildhibaanka iska maqnaada cudur daar la'aan 3maalmood in warqad loo qoro, *anigu waxaan aamin sanahay in ninka hal maalin maqnaada cudurdaar la'aan in loo qoro warqada digiinta*, sidoo kale mudanaha maqnaada mudo 7casho waxaa laga jarayaa ayaa kuqoran, *markaa waxaa leeyahay ha loo libin laabo ganaaxa laga qaadayo.*

**Qodobka 26aad** waxaan soo jeedinayaa in lagu daro meelaha ay ku qorantahay Mudane in lagu darro Mudane/marwo, sidoo kale waxaan *soo jeedinayaa kalmad wanaagsan oo koobsanaysa wanaag oo dhan oo* ***ah "HUUNO"*** *lagu darro xeer-hoosaadka ayaan soo jeednaa oo tusaale ahaan marka gudoomiyaha lala hadlayo layidhaa* ***HUUNO GUDDOMIYE,*** *hadii xildhibaan lala hadlayana waa in la yidhaa Huuno xidhibaan.* markaa waxaan leeyahay qoladayadaa reer galbeedku bud iyo tooray midna ma qaadano ee waxaanu isticmaalaa huuno.

**Qodobka 31aad** waxaan ku taageersanahay walaalkay Ibraahin, oo waxaan leeyahay hadii uu madaxweynuhu soo galo ayaynaan u istaagin lakiin marka uu soo galo ee uu gacanta

taago ee uu ina salaamo waa in aynu gacanta u taagnaa oo aynu nidhaa Huuno soo dhawoow.

**Qodobka 47aad ee qaabdhismeedka Gudi hoosaadka;** waxaa ku qoran iyaga ayaa iska dhex dooranay Gudoomiyayaashooda, *anigu waxaan aamin sanahay in sida uu xog-hayaha guud loo soo magacaabo in loo soo magacaabo oo awoodaa gudoomiyaha loo daayo.*

**Qodobada 61aad iyo 62aad**; waxaad moodaa in labadaa qodob ay seerayaashoodu isa so ogalayo markaa *waxaan soo jeedinayaa in guddidaa laga dhigo Guddida dhqaalaha, Maaliyada, ganacsiga, ilaalinta iyo Daryeelka garanka* oo ay noqoto guddi xoogan.

Mudanayaal marka dalkeena la eego waxaynu nahay dad-yawga u tirada yar waxaan filyaa jabuuti oo ay awood kale ilaaliso ayaa inaga tiro yar, marka waxaan soo jeedinayaa si aynu u noqono ama aynu u jidayno sunne fiican waan xeer-hoosaadkeena lagu daraa in mudane walba guursado saddex xaas maadaamo oo uu mushaharkiisu ku filan yahay.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in ranjiga Meesha oo cad mudana aynu fadhinay in midabo loo yeelo ayaan soo jeedinayaa.

Ugu danbayn waxaan soo jeedinayaa in shirgudoonku sidaa ay u fadhiyaan u fadhiyaan oo woxogaa miiska loo balaadhiyo waadmahadsantihiin Huunayaal. Wsc.

**Md. Saleebaan Axmed Carab** **(6min 23sec):-** Shirgudoonka, Xildhibaanad, Saxaafada iyo marti sharactaba Asc; Mudane Gudoomiye waa xilidanbe qodobadii aan odhan lahaana si waafiya oo faah-faahsan ayaa loo soo jeediyay, markaa ku noqnoqashadeeduna waxba soo kordhin mayso, markaa waxaan is dul taagayaa hal qodob.

**Qodobka 13aad farqada 2aad ee ah** *Iyadoo la eegaayo waajibaadka ku cad farqada 1aad ee qodobkan, mudane kasta oo ka mid ah Golaha wakiiladu, xil gaar ah ayaa ka saaran matalaada degaanka codbixiyaasha laga soo doortay*; mudanayaal dalka oo dhan ayay u nahay mudanayaal waxa aynu ku dhaaranay in aynu u shaqayn doono si sinaan iyo cadaalad ah, markaa hadii la yidhaa gobol gaar ah iyo degmo gaar ah ma tal qaar ayaanay xilhdibaanaba ka joojin, oo masuuliyadeeduna inaga ina saaran tahay ee yaan cid lagu halayn ayaan leeyahay.

Sidoo kale Goboladaasi barrigu way ka danbeeyaaan gobolada kale hadii ay noqon lahayd mashaariicda, horumarkaba iyo adeegyada aas-aasiga ahba aad ayay u liitaan, xildhibaanada markii la soo dooranayay waxa uu soo balan qaaday in uu horumar keenayo, markaa waxaan ku talinayaa in aan xildhibaan kasta loo dirin meeshii uu ka soo baxay ee si guud loogu diro gobolada dalka, kana soo warbixiya deegaan kasta.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in gobolada dalka la isasoo gaadhsiiyo, qodobkaa ayaan isleeyahay lagama hadal oo waan banaanyahay waa qodobkaa. Wakhtiga oo kooban daraadii intaa ayaan ku soo koobayaa wsc.

**Md. Maxamed Cismaan Maxamed** **(28min 37sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Waxaan salaamayaa Shirgudoonka iyo mudanayaasha kale, waxaan si kookooban uga hadli doonaa qodobo dhawr ah. Waxaanan ku faraxsanahay sida habsamida leh ee ay doodan xeer-hoosadku u socota, waxaa kale oo aan si kooban u taageeri doonaa qodobadii ay xildhibaanadu ka hadleen.

**Qodobka 10aad Farqadiisa 3aad,** qodobkaasi waa qodob dood badan golejheenan ka dhaliyay, waxaana jiray laba aragtiyood oo kala *in laba iyo afartan (42) dhigo mid kalane waxay ahay in 55 loo daayo sida uu xeer-hoosaadkii hore sheegayay* iyada oo soo jeedinta 42ku ay damaanad qaadayso dimuquraadiyada waana aragti aad u mihiim ah, halka 55-kuna ay damaanad qaadayso deganaanshiyaha Golaha.

*Waxa ay ila tahay ama aan soo jeedinayaa in meel dhex la iskugu yimaado lagana dhigo 50-mudane si uu murankuba u yaraado.* Markaa hadii qodobkaa laga gudbo waxay ila tahay in uu shirgudoonku qabsan doono shaqooyinkiisa ugu horeeya ee golahan u yaala ee ay ka midyihiin.

Sidoo kale waxan soo jeedinayaa in Gudoyada Golaha laga dhigo 10-guddi hoosaad, oo ay ku jirto guddida hawlaha Goluhu, sida uu qorayo xeer-hoosaadkani ma cadaynayo gudiyada tiradoodu inta ay noqonayso *waxaanan soo jeedinayaa in tiro rasmi ah lagu qoro. Waxaanan u dhigi lahaa sidan: in guddida Joogtada ah laga dhigo 13xubnood, Guddida arimaha bulshada oo ah guddi aad u miihiim ah waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo Guddida arimaga bulshada, diinta iyo dhaqanka lagana dhigo 11xildhibaan, gudiyada dhaqaalaha arimaha Gudaha, laga dhigo 9xubnood midkiiba. 4ta guddi ee kalana laga dhigo 7xildhibaan.*

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in guddida arimaha Golaha la balaadhiyo oo lagu daro Gudoomiye xigeenada gudiyada tiradoodu ka badantahay 10ka, sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in gudiyada marka ay xeer ka doodanayaa in Gudoomiye ku xigeenka Hawlaha Golaha lagu daro.

Qodobka ku saabsan maaliyada Golaha, waxaa looga jeedaa in la helo daaf-furnaanta, maadaamo oo aynu la xisaabtamayno qaranka inan waa in ay jirataa arinkaasi, waxaa kale oo muhiim ah in la sugo meelihii wax ay ku bexeen, *sidaa daraadeed waxaan soo jeedinayaa in uu gudoomiyuhu sanadwalba kal-fadhiga 1aad la ina siiyo warbixin, hadii uu gudoomiyuhu cid u igmanayo iyo hadii ay ka imanayso guddi maaliyadaba, mudanayaashuna hadii ay wax-ku darsanayaana wax ay ku darsadaan.*

Qodobka ku Saabsan amniga Golaha, waxaan la qabaa in aan la baadhin mudanayaasha, Qodobka fadhiga 1aad ee Golaham, in uu ku furmayo 42-ka ayaan la qabaa, qodobka wakhtiga Golaha la imanayo waxaan qabaa in sidii hore loo daayo, waxaa kale oo aan intaa ku darayo in xeer-hoosadku uu tusmo yeesho. Sido kale waxaan soo jeedinayaa in marka la ansixiyo la tafaqyo tiro inta aan faafinta rasmiga ah lagu soo saarin ayaan soo jeedinayaa waad mahadsantihiin.

**Md. Saleebaan Diiriiye Barre (28min 37sec):-** Ugu horayn mahad celinta allah, Gudoonka Golaha, xildhibaanada, marti sharafta iyo saxaafadaba ASC. Xeerka waxa loo sameeyaa inuu jiro mudo badan lagamana eego xaalada markaa lagu jiro ee waxa loo eegaa maxaa iman kara,

**Qodobka 5aad** Fadhiga Ugu Horreeya Ee Golaha Wakiillada Cusub, waxaan leeyahay markii uu ku jiray Qoraalkii hore hadana macada, markaa waxaan soo jeedinayaa in la cadeeyo.

Yaa iska leh iskugu yeedhida Golaha QODOBKA 44AAD ee Dastuuka oo qoraya in uu madaxweynu Isugu Yeedhidda Golaha Cusub, bilkadib marka uu soo dhameeyo komishanku, waxaan leeyahay ama aan soo jeedinayaa qodobada xeerarka waa in aynu dastuurka waafajino

Sida uu dastuurku dhigayo oo ah "*Golaha cusub waxa uu qabanayaa fadhigiisa ugu horreeya 30 (soddon) maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta gudiga doorashooyinku ku dhawaaqo go'aamada doorashada*" markaa waxaan is weydiinayaa ku dhawaaqida doorashada yaa iska leh Ma komishan doorashooyinka qaran mise Maxkameda sarre, waxaan *soo jeedinayaa in lagu daayo maalinta uu komishanku ku dhawaaqo natiijada hordhaca ah.*

**Qodobka 8aad** Shirka lagu dooranayo Gudoomiyaha Golaha wakiilada waxaa guddoominaya mudanaha ugu da'da weyn, haddii mudanaha ugu da'da weyni yahay musharax waxa shirka Guddoominaya mudanaha ku xiga da'a ahaan haddii aanu musharax ahayn, haddii uu isna uu musharax yahay waxaa gudoominaya xubinta da'a ahaan ku soo xigta waxaana sheegaya Guddoomiyaha Maxakamadda Sare.

Mudane Gudoomiye waxaan ku kordhi lahaa **Farqad 9aad iyo faqad 10aad una dhigan; -**
**9-** Hadii laba mudane oo isku da'a ahi Golaha joogaan waxa lagu kala saarayaa sida magacoodu ugu kala horeeyaan alif beetada af soomaaliga ah, tan ingriisiga ah meel kuma leh dastuurka dalka, luuqada 2aad ee dalkuna waa luuqada carabiga ah,

**10-**Awooda Gudoomiyaha ee mudada koobani waa inta la codaynayo, wuxuna yeelanayaa xuquuqda gudoonka golaha oo kale marka ay timaado in tirinta codadku is le'ekaadaan, oo inuu isagu laba cod yeelanayo, shirka dib uma dhigi karo, lama dhaariyayo, ciidanka kala duwani Golaha masoo geli karaan, waxana reeban sidii

dhacday salaasadii 3 August in ciidanku la wareegaan furayaasha golaha, waana inay debeda ayey ka joogayaan, dhawraana sida xeerarku sheegayaan.

**Qodobka 6aad** Qaabka Loo Dooranayo Gudoomiyaha Golaha iyo Labaddiisa Ku-xigeen, **Farqada 1aad** oo u dhigan sidan; Si Waafaqsan dastuurka, xildhibaanka ugu da'da weyn Golaha ayaa shirgudoominaya doorashada Gudoomiyaha iyadoo la tixraacayo **Qodobka 5aad farqadiisa 7aad** ee Xeer-hoosaadka. Waxaan soo jeedinaa in lagu kordhiyo iyo **Qodobka 8aad** ee xeer hoosaadka golaha.

**Farqada 4aad oo u dhigan sidan;** Marka ay bannanaato jagada Gudoomiyaha, xilka waxaa sii wadaya ku-xigeenka 1aad, Goluhuna shaqo kale ma qaban karo ilaa uu doorto Guddoomiye, taas oo ku dhacaysa 7 maalmood gudahood haddii uu kalfadhigu furan yahay, Hadii kal-fadhiga xidhan yahayna fadhiga ugu horeeya ee kal fadhiga xiga ayaa lagu dooranayaa. *Waxaan soo jeedinayaa in xaga danbe laga darro Mudo aan ka badnayn 7 cisho*

Farqada 6aad oo u dhigan sidan; Haddii guddoomiye ku xigeenka 1aad ama ka 2aad uu jagada bannaanaatay iclaamiyo in uu u sharraxan yahay, waa in uu iska casilaa xilka Gudoomiye-ku-xigeenka 1aad ama Guddoomiye ku-xigeenka 2aad goluhuna ka aqbalaa isla markaana waxaa golaha guddoominaya mudanaha ugu da'ada weyn ee aan ahayn musharraxa, habka doorashada Gudoomiyaha iyo ku xigeenadiisa waxa loo kala horaysiinayaa sida magacyadu u kala horeeyaan.

*Waxaan Soo-jeedin: Iyada oo loo eegayo afka Somaaliga ama B T J X KH, iyo farqadahana A E I O U. Waxana aan soo jeedinayaa dhamaanba in xeerka laga saaro, (English alphabetic) Sidoo kalena loo sameeyo nidaam habraac ah oo Nomber leh, lana habeeyo xeerka oo sida ay isugu nooca yihiin la isu xejiyo, tusaale ahaan, shirgudoonka, fadhiyada golaha, dooda golaha, gudiyada, shaqaalaha golaha,*

**Qodobka 7aad** Qaab-dhismeedka Maamul ee Golaha

Qaab-dhismeedka Golaha wakiiladu waxa uu noqonayaa sidan

a) Mudanayaasha wakiilada oo ka kooban:

I. Gole-weynaha

II. Gudoomiyaha Golaha Wakiilada

III. Gudoomiye ku xigeenada

IV. Guddi –hoosaadyada

V. Xog-haynta golaha

VI. La taliyayaasha siyaasada, sharciga iyo dhaqaalaha

*Waxaam soo-jeedinayaa in lagu Kordhiyo Fadhiga golaha iyo structure ka waxan qabaa in dhamaanba la bedelo qaab dhismeedka golaha, laga dhigo fadhiyada laba laba mudane oo lagu daro fadhiyada waxa ka dhimanba dhamaan fadhiga golahana lagu soo koobo, laba kursi, inagoo ka eegayna xaga caafimaadka, mudanayaasha iyo martidana la kala xidho.*

**Qodobka 8aad,** Awoodaha Guddoomiyaha Golaha Wakiillada

**Farqada 5aad** oo u dhignaa sidan; Wuxuu furayaa fadhiga haddii uu kooramku dhan yahay, xidhayaana fadhiyada haddii aanay soo jeedimo kale ka jirin Golaha, *Waxaan soo jeedinayaa in Xaga danbe laga daro ama aan la gaadhin waqtigu salaada. Sidoo kale waxaan ku soo kordhiyay in lagu daro Faerqad 22aad una dhigan sidan;*

22. *Wuxu magacaabayaa la taliyayaasha sharci ee golaha sida Lataliye-sharci, dhaqaale, siyaasadeed iwm oo lagu xusho khibrad iyo aqoon ay u leeyihiin hawlohooda. sida ku xusan qodobka 52aad ee dastuurka farqadiisa 2aad, si la mid ah sida xoghayaha guud uu u magacaabayo gudoomiyaha goluhu.*

Sida Uu Sheegayo **Qodobka 52aad** ee Dastuurku: -

1. Golaha Wakiiladu wuxuu yeelanayaa Xoghayn uu madax ka yahay Xoghaye Guud oo aan ka tirsanayn Golaha Wakiilada, kana kaalmaynaya Shir-guddoonka Golaha hawlaha xafiiska, dhammaan arrimaha maaliyadda iyo maamulka, wuxuuna yeelanayaa Ku-xigeen.

2. Golaha Wakiilada wuxuu yeelanayaa lataliyeyaal sida Lataliye-sharci, dhaqaale, siyaasadeed iwm oo lagu xusho khibrad iyo aqoon ay u leeyihiin hawlohooda.

**Qodobka 10aad Xil-Waayida Gudoomiyaha & Ku-xigeenadiisa**

Waxa aan is dul taagayaa Farqada 5 aad hadii Moshinka xil ka qaadista waxaa laga doodayaa laguna codaynayaa (7) maalmood gudahood oo maalmo shaqo ah, kamana yaraan karto 24 saacadood gudahood laga bilaabo taariikhda la keenay Golaha. *Waxaan soo-jeedinayaa in aynu qaadno sidii xeer hoosaadkii hore ku qornayd xilka qaadista gudoomiyha.*

**Qodobka 16aad Ka Xaadiridda Fadhiyada Golaha farqada 5aad** Waxa Goluhu yeelan karaa aalad casri ah oo sahasha xaadiriska mudanayaasha iyo ilaalinta sacadaha imaatinka iyo bixida. *Waxaan soo jeedinayaa in Gebi ahaanba farqadaa waa in laga saaro, maadaama ay jiraan xanuuno saf mar ah, sidoo kalena aan lagu kalsoonaan Karin, sida ay u shaqaynayso, golihii horena wuu diiday) waana in lagu bedelaa ama la dhinac wadaa waraaqda liiska magacyada ee" attendance list" kuna xusan farqada 6aad ee isla qodobkan.*

**Farqada 8aad** Fadhiyadu waxay bilaabmayaa 8:30 Subaxnimo ugu dambeyn 09:00 subaxnimo. *Waxaan soo waa in mid la tuuro 8 subaxnimo iyo 9 subaxnimo*.

**Farqada 9aad** Xildhibaankii fasax la'aan ama cudur-daar la'aan ka maqanaada fadhiyada (3) maalmood shaqo oo isku xiga wuxuu mutaysanayaa digniin qoraal ah. Waxaan soo-jeedinaa in lagu bedelo 7 maalmood oo shaqo iskuna xiga.

**Farqada 15aad**, Mudanaha maqnaashihiisu gaadho konton iyo lix maalmood (56) oo aan isku xigin sanad gudihii waxaa loo aqoonsanayaa mudane xilkiisa gudan waayey waxaana qabanaya Qod. 73aad, Faq 3aad ee dastuurka. Mudanahan waxa go'aan ka gaadhaya gole weynaha. Qodobka 73aad ee dastuurku wuxu u qoran yahay sidan:

**Qodobka 73aad** waa qodob qeexaya xarunta golaha guurtida un dhigan sidan; xarunta golaha guurtidu waa magaalo-madaxda. Halka uu Waayida xilka mudanaha Golaha wakiilada uu qeexayo Dastuurka Qodokiisa 50aad, *waxaan soo jeedinaa in halkaana la saxo.*

**Qodobka 17aad Labiska iyo Haybada Mudane, Farqada 2aad** ee u dhigan sidan: Mudanayaasha haweenka ee ka tirsan Golaha wakiilada waa in a lebiskoodu ahaadaa mid asturan. *Waxaan soo jeedinaa in laga dhigo; (waa inuu ahaadaa kan ay shareecadu jidaysay, cid wax xukunta oo alleh ka xukun wanaagsani ma jirto, markaa aan u tudhno aakhiradeena iyo aduunkeenaba)*

**Qodobka 20aad** Eedaynta iyo Maamuus ka xayuubinta Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa, *waxaan Soo-jeedinayaa in qodobka laga saaro xeer hoosaadka Golaha wakiilada, waayo waxba ku kordhin maayo, intani dastuurka ayey ku taal.*

**Qodobka 29aad Amniga Golaha Wakiilada**

1. Waxaa reeban in qofna la soo galo hub xarunta iyo madasha fadhiga Golaha Wakiilada ama xafiisyada Golaha qofkii la soo gala waxaa laga qaadayaa talaabo sharciga waafaqsan: -

Waxaan laayahay Hadii mudanuhu hub la soo galo waa maxay cuquubada ka dhalanaysaa, hub kuse waa noocee, waa in la cadeeyo, Budh, Bakoorad, Bastoolad ama Tooraydii reer Burco.

*Waxaan soo-jeedin: in qodobkanxaalada amni ee geeska inaga oo ka war hayna, wixii amni ah waxaynu leenahay qaybteena ama ugu yaraan, inaan is barbar taagno ciidamada amniga,* sida uu *qorayo qodobka 38aad ee dastuurka, dalka farqadiisa 4aad, aarlamaanka iyo fadhiyada wada jirka ah 4. Himilooyinka xilgudashada baarlamaanka waxa ugu muhiimsan arrimahan soo socda: b- sugidda nabadgelyada iyo ammaanka jamhuuriyadda iyo u madax-bannaanida maamulka dhulkeeda, baddeeda, iyo hawadeeda. T- in jamhuuriyadda somaliland yeelato dhammaan xeerarka ay u baahan tahay dawlad islaam ahi.*

**Qodobka 34aad Habka Mashruuc Sharci Marayo Farqada** 1aad Mashruuc sharci kasta oo Golaha loo soo gudbiyaa wuxuu marayaa habkan:

a) Waa in mashruuc sharci kasta oo Golaha Xukuumadu soo gudbiso laga hor akhriyaa wareegtada madaxweynuhu ku soo gudbiyey loona qaybiyaa nuqulada mashruuca sharciga mudanayaasha.

Waxaan soo jeedinayaa in lagu darro; Waa in loo dhiibo la taliyaha sharciga mudo aan ka badnayn 48 saac, uu kaga warbixiyo, soona waafajiyo sharciga, kuna soo celiyo sharci yaqaanka golaha iyo gudiga uu hoos tago mashruuc sharcaasi, waana in laga shaqaysiiyo laguna ixtiraamo shaqadiisa maadaama isku si loo magacaabayo iyaga iyo xoghayaha golaha.

Sidoo kale waxaan ku darayaa in hadii madaxweynaha Qaranka loo istaago aanay wax dhib ahi ku jirin. Dhanka kale waxaan soo jeedinayaa in guddida loo dirro xeer ay dooda ka qayn ahaato si ay ugu saxdo una iftiimis wixii la fahmi waayo.

Ugu danbayntii waxaan soo jeedinayaa in xeerkan dib loo habeeyo si wixii isku xidhmayaba dhinac la isku xidh loona sameeyo tusmo si ay qofka eega ugu fududaato. Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa marka uu xeerku inga baxayo waa in uu shaabad lahaadaa, iyo hadii mareega golahaba la galinayo, sidoo kale waxaan taageerayaa mudanayaasha sheegay in budget-ka Golaha soo dhex-dhigo Golaha oo la ogaado. Waan mahadsantihiin

**Md. Ibraahim Cali Jaamac Suudi- (6min 23sec):-** waan salaamayaa Gudoomiyha iyo xildhbaanad, wixii aan wax-ka-baddeli karo ayaan isku dayayaa, **Qodobka 8aad Farqadiisa 7aad** aad ayaan ugu raacsanahay sida uu u dhgay.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in la cadeeyo sida uu gudoomiyuhu ugu qaybiyo hadalka, marka hadii aanay jirin wax la raaco dhinac ayaan wax ka tirsanaynaa.

**Qodobka 7aad xarafkiisa "C"** oo ka hadlaya qaab dhismeeka Golaha waxaan *soo jeedinayaa in halkaa lagu daro in ay ka madhnaadaan ama ka barri ahaadaan in lagu soo eedeeyay musuqmaasuq ama aan shaqo laga eryin.*

**Qodobka 69aad** oo ha wax-ka-beddealka Xeer-hoosaadka Golaha, waanu ka kooban dyahay oo kala ah; mid leh Guddida Jaagtada ah ayaa wax ka beddelaysa midna ay leedahay 1/3 tirada Guud ee Golaha *markaa waxaan soo jeedinayaa in lagu daayo in wax-ka beddelka xeer-hoosaadka ay wax ka beddelaan 1/3 tirada Golaha wakiilada.*

**Qodobka 67aad farqadiisa 1aad,** oo odhanaysa xilka iyo amniga guud ee Golaha waxaa ka masuul ah Gudoomiyaha Golaha wakiilada, *Markaa waxaan leeyahay miisaaniyada Golaha waa in Golaha La horkeenaa oo la ogaado sida ay wax u qabanayaan.*

Mudane lab-saalax waxa uu ka hadlau **Qodobka 49aad xarafkiisa "B"** oo sheegaysa in shirarka gudiyadu u furan yihiin dadweynaha iyo saxaafada marka laga reebo marka laga doodayo arimo Qarsoodi ah oo taabanaya amniga dalka qandaraasyo qarsoodi ah iyo warbixino muhiim ah oo Golaha khuseeya. Markaa waxaan soo jeedinayaa in lag asaaro qandaraasyo qarsoodiya waayo waa gole daah-furaanta iyo hufnaanta ka shaqeeya.

Qodobka ah in uu shirgudoonku wada fadhiisto aniga waxaa ila quman in Gudoomiyuhu uu gaar u fadhiisto oo ay labada Gudoomiye xigeena dhulka u soo degaan.

Qodobka sheegaya in madaxweynaha loo istaago waxaan qabaa iyada oo ay Golaha Shuyuukhi ku jirto, waxaa la yidhi nabigeenii NNKH wuu diiday in cid loo sitaago, sidaa daraadeed waa in la sameeyaa qaab waafaqan diinta oo madaxweynaha loo soo dhaweeyaa lana ixtiraamaa madaxweynaha Qaranka.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in aan xildhibaanka Gunadiisa iyo Mushaharkiisa aan la taaban ayaan qabaa waad mahadsantihiin.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada**
________________________________

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
________________________________